Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya
Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta
**XARUNTA HORUMARINTA MANAAHIJTA**
TEL. 21267
S.B. 7163

جمهورية الصومال الديمقراطية
وزارة التربية والتعليم
مركز تطوير المناهج
تليفون ٢١٢٦٧
ص . ب ٧١٦٣

# SOOMAALI

## DUGSIGA DHEXE

## Fasalka Toddobaad

## 7

# AF SOOMAALI

## DUGSIGA DHEXE

Fasalka Toddobaad

7

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo
aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin oggolaansho

Waxa lagu daabacay Madbacadda Qaranka
Xamar — 1983

# TUSMO


| | Casharka | Bogga |
|---|---|---|
| 1. | Almadar (Gabay) | 1 |
| 2. | Webi (Sheeko) | 3 |
| 3. | Aloolka (Hees) | 5 |
| 4. | Laanta Caafimaadka (Curis) | 6 |
| 5. | Kala sinnaan dad (Geeraar) | 7 |
| 6. | Wadaaddo iyo Wiilwaal (Sheeko) | 9 |
| 7. | Ololaha Horumarinta Miyiga (Gabay) | 11 |
| 8. | Afrikay huruddooy (Hees) | 14 |
| 9. | Kacaankii Oktoobar (Curis) | 16 |
| 10. | Hays xakabin meel (Gabay) | 17 |
| 11. | Rah qaameysan (Sheeko) | 19 |
| 12. | Geed iyo ruux (Hees) | 20 |
| 13. | Guubaabo (Buraanbur) | 21 |
| 14. | Shaah aan shaahba ahayn (Geeraar) | 22 |
| 15. | Nimaad dhashay kuma dhalin (Sheeko) | 24 |
| 16. | O g o w (Hees) | 26 |
| 17. | Dardaaran (Gabay) | 28 |
| 18. | Waxtarka dhirta (Curis) | 30 |
| 19. | Maxay ku nuugtaa ama ... (Sheeko) | 31 |
| 20. | Dhirta (Geeraar) | 33 |
| 21. | G e e l a (Hees) | 37 |
| 22. | Waa waxaan ku raacay (Sheeko) | 39 |
| 23. | Ina Xagaa-Dheere (Sheeko) | 41 |
| 24. | Waari meyside.... (Hees) | 42 |
| 25. | Warshadda Dharka (Curis) | 44 |
| 26. | Cadka rag isku raaco (Sheeko) | 45 |
| 27. | Dhallinyarada (Gabay) | 48 |
| 28. | Midab-gumeysi diida (Hees) | 50 |
| 29. | Dumarow aqoon (Gabay) | 52 |
| 30. | Dheg-Dheer (Sheeko) | 54 |
| 31. | H o o y o (Hees) | 56 |
| 32. | Hawl iyo hantiwadaag (Gabay) | 58 |
| 33. | Sayid Cali iyo xoolihii ummadda (Curis) | 59 |
| 34. | Timirtii horeba dab loo waa (Sheeko) | 60 |
| 35. | Calaacal (Gabay) | 61 |
| 36. | Afka Hooyo (Hees) | 62 |
| 37. | Wax na diley (Gabay) I | 64 |
| 38. | Saddex maan-laawe (Sheeko) | 66 |
| 39. | Ii gunuddey caashaqe (Hees) | 68 |
| 40. | F a a l (Curis) | 71 |
| 41 | Wax na diley (Gabay) II | 72 |
| 42. | Afar walaalo ah (Sheeko) | 73 |
| 43. | Laba-Eef (Hees) | 75 |
| 44. | Ku dhawaaqa farteenna (Geeraar) | 77 |
| 45. | Gobannimo shinkeed galay (Hees) | 79 |
| 46. | Isma gabo fariid! (Sheeko) | 81 |
| 47. | Farriin waa qaan (Gabay) | 84 |

# HORDHAC

**Buuggan oo ah kii toddobaad ee Suugaanta Dugsiyada aasaasiga ah, waxaa loogu talo galay ardayda Fasalka Toddobaad ee habka cusub.**

**Buuggani wuxuu la socdaa kuwa ka horreeya ee ku salaysan habkan cusub ee dheereynta muddada waxbarashada ee dugsiyada aasaasiga ah. Casharrada buuggan ku jira waa kuwo xul ah oo la socda mustawaha ardada. Inkasta oo qorayaashu ku dadaaleen in ay si quman buuggan u qoraan, haddana haddii ay wax gol-daloollo ahi ay soo baxaan, waxa barayaasha laga codsanayaa in ay buuxiyaan wixii ka dhiman.**

**Xafiiska Manaahijtu, wuxuu si hagar la'aan ah ugu mahadcelinayaa dhammaan barayaashii ka qayb qaatay ururinta, qoridda iyo habaynta casharrada buugga. Mahad gaar waxaa iyana leh shaqaalaha Wakaaladda Madbacadda Qaranka ee ka qayb qaatay soo saaridda buuggan.**

*Maamulaha Xafiiska Manaahijta*
*Xasan Daahir Obsiiye*

## CASHARKA 1aad

### *AL-MADAR*

Gabaygan waxa tiriyey *Xaaji Cabi Cabdullaahi Muuse.* Xaaji Cabdi waa gabayaa caan ah, gabayo badanna leh, waxaanu ku nool yahay magaalada Burco. Aabbihii Cabdullaahi Muusena waa gabayaa weyn oo aad loo yaqaan. Gabayo badan oo hiddaha iyo dhaqanka aad ugu wanaagsan ayuu tiriyey.

Gabaygani waa xifaalo. Xaajigu isagoo ku hiranaya dhaqankii miyiga iyo kan magaalada ka taagan, ayuu dhallinyarada Soomaaliyeed ee wax baratey si xifaaltan ku jiro ugu dhega-hadlayaa.

Xaajigu wuxuu tabayaa duqeytidii gar-aqoonta ahayd ee geedka ka talin jirtay, cilmi-falagga iyo xilliyada astaamahooda tiqiin; doobabkii u dar-bannaan jirey hawl-maalmeedka ee xoolo ogaalka ahaa. Dhallinyaradana waxa uu u hogo-tusaaleynayaa in aany ka diimoonin dhaqankooda iyo degaankooda.

Xaaji Cabdi wuxuu aad iyo aad uga welwelsan yahay cidda mar-jac u noqon doonta dhaqanka iyo hiddaha Soomaaliyeed maadaama ay odayaashii taa dayactirayeyna ay dhammaanayaan. Wuxuu yidhi:

*Duqeydii dhammaatay tolow, dirirka yaa eegi?*
*Dab-shidkii hadduu galo ayaa, dhuxulihii daadin?*
*Ayaa daaha laantii ku xidhi, qudhac intuu diiro?*
*Degmo tuhun ma guurtee ayaa, sahanka loo dooran?*
*Reerkoo yagleel degay ayaa, guri u soo deyri?*
*Hangoolkiyo degsaarkii ayaa, gudin u soo daabi?*
*Haddii geelu deyr dhalo ayaa, doobiga u qaadan?*
*Dugaaggiyo qaniinkiyo ayaa, daabka ka ilaalin?*
*"Almadar" duug ma reebtee tolow, dumarka yaa guursan?*
*Tolow yaa dadkoodii wax siin, gacal ma doonaane?*
*Tolow deynka yaa bixin gashiga, kama dambeeyaane?*
*Tolow yaa u daalacan kitaab, diinna cid u sheegi?*
*Anuunbaa iska daalee naftaba, uma dadaalaane.*

**Sharax Ereyada:**

Yagleel: Guri ama qormo cusub degey, ootey.

Degsaar: Garabsaar, wax oodda la isaga dhigo, sida maqaar, ama saan garabkana la saaro.

Qaniin: Dulin (shilin, kudkude iwm).

Daab: Urdooxan ku dhaca nirgaha yaryar.

Duug: Madhax, dhaqaaleyn.

Gashiga: Deynka.

**LAYLIS:**

1. Ereyadan iyo weedhahan gabayga laga soo guuriyey mid walba halkay ku jirto adoo la kaashanaya macnahooda sug:

Dirir, Dabshid, Dhuxulo, Sahan, Deyr, Hangool, Gudin, Daab, Deyr-dhal, Doobi, Dugaag, Reebto, Gashi kama dambeeyaane, Yaa kitaab daalacan, Naftaba uma dadaalaane.

2. Tuducyadan laga soo qaaday gabayga macnahooda sheeg:

b) Duqeydii dhammaatee, tolow dirirka yaa eegi?

t) Dabshidkii hadduu galo, ayaa dhuxulihii daadin?

j) Degmo tuhun ma guurtee, ayaa sahanka loo dooran?

x) Haddii geelu deyr dhalo, ayaa doobiga u qaadan?

3. Tuduca tobnaad, "Tolow yaa dadkoodii wax siin, gacal ma doonaane?".

b) Dadka laga hadlayaa waa kuwee?

t) Maxaa gabayaagu ugu calaacalayaa dadkaas?

j) Markaad weynaato muxuu waalidkaa kaa mudan yahay?

4. Gabaygan kumaa curiyey? Yuu la hadlayaa?

b) Hangoolka iyo daabka gudimada maxaa laga sameeyaa?

t) Gudimada, hangoolka iyo degsaarka maxaa lagu qabtaa?

j) Maxay ku kala duwan yihiin guriga yagleesha ah iyo ka jabadka ahi?

x) sahanku kaalintee buu kaga jiraa dhaqanka miyiga?

kh) Dugaag iyo qaniinku maxay yihiin? Xoolaha dhibtay u geystaan, maxay ku kala duwan yihiin?

d) Gabaygu muxuu uga jeedaa dhallinyaradu naftooda uma dedaalaan?

Almadar: Dhallinyaradii Dugsiyada Gobollada Waqooyi dhammaysatay ayaa loo yiqiin Almadar.

## CASHARKA 2aad

### *W E B I*

Cigaal baa geeloodii la raaciyey. Geela wuxuu ku lahaa hal u gooni ah oo wax ka qaayo weyneyd oo la odhan jirey Webi. Wuxuu maalintii oo dhan la joogaba, goor ay ahayd hiimse-hiimse ayuu arkay hashii oo libaax cunayo. Cigaal baa intuu cararay geela intiisii kale degdeg u ururiyey oo duubey. Markaasna naxdintii hees aan loo fadhiyin uu geelii ugu heesay oo yidhi:

*Wixii Webi cunay*
*Waan arkayoo*
*Waa il giirraa,*
*Wax dameer le'eg*
*Oo ka daba weyn*
*Yuu ahaayoo*
*Waa u jeedoo*
*Hobayo hidow.*

Markaa uu Cigaal u heesayey geela waxaanu u jeedin nin geel jira ah oo maqlaayey heestiisana si fiican u qabsaday. Wuxuu Cigaal geelii u heesaba markuu xareeyey ayuu is-yiri waar berrito yeelkadeede caawuun ha qadin. Intuu walaalkii oo hoos uga yar u tegey buu ku yidhi, "Walaal maantoo dhan baan geela la soo joogey, waanan qandhaysanahaye hashaada Sulub aan maalo ee adna Webi maal markay xigsimooto." Walaalkii baa yeelay markaasuu Cigaal Sulub maaley oo dhagida galay.

Markii geela badankiisii la maaley, ayaa Webi la is-yidhi maala. Illayn waa hal maqane waa la waayey. Cigaal baa la toosiyey oo la weydiiyey hashii Webi. Isaga oo is-luleysiinaya buu yidhi, "Waar hashu geelay la socotee qolqolka ka eega." Markii laga quustay baa la yidhi, "Waar halkee kuugu dambeysay?" Cigaal baa yidhi, "Hashii xeraday ila soo gaadhey, malaha way xera weydaaratey." Hashii baa la raadiyey markaasaa baadi-doonkii alla ku hagaajiyey ninkii heesta Cigaal maqlayey. Waa la is-wareystay. "Waar maxaa lagu soo hoyday?" baadi-doonkii Webi baa yidhi. "Wax dhiill ah ma ogine, idinkuse", ninkii heesta Webi maqlay baa yidhi. "Wax dareen ah ma ogin, hal baase naga dib-jirtey ee waxba ma aragteen?" "Maya, oo goormay luntay?" "Shaki baaba nagaga jira ee ninkii geela raacay war kama hayno."

"Oo hasha magaceed?" "Webi, oo miyaad aragtay?" "Mayee ma arag, hase yeeshee, waxaan maqlay ninka la joogay oo magacii ku heesayey."

"Oo muxuu lahaa?" Ninkii wuxuu u sheegay baadi-doonkii heestii Cigaal Webi u tiriyey. Baadi-doonkii oo markan quustay baa gurigii ku noqday oo ku sii tashaday in Cigaal goobtii Webi la geeyo oo indhihiisa wax la tuso.

Markii gurigii lagu soo noqday ayaa Cigaal cadho lagula dhacay oo la yidhi: "Hadda kac oo na tus raqdii hasha aan libaaxii soo dilnee." Ciidankii baa hub qaatey iyo xadhig gar ah. Intii dhexda lagu jirey bay Cigaal weydiiyeen, "Waar waxa isha giiran ee aad aragtay ma waraabuu ahaa?" Cigaal ba hoos isula hadlay oo yidhi, "Alla idin kashif, tolow yaa i maqlayey?" Markaasuu u jawaabay oo yidhi, "Dee mayee waa ka weynaa, oo wuxuu ahaa wax dameer le'eg oon u maleeyey libaax." "Oo maxaad uga ridi weyday oo u bireyn weydey?" Ciidankii baa weydiiyey.

"Waar miyeydaan maqal libaax nin aan aqoon baa lax ka rita, dee anigu waan aqaan libaaxa." Iyaga oo Cigaal ku sii huruufaya, "Magacaa be, meel xun Alla ku dhig", ayey hashii gaadheen. Waxay ugu yimaadeen raqdii hasha oo keliya. "Ciidankii baa ku tashaday in ay dul-seexdaan oo libaaxii sugaan si loo dilo. Hase

ahaatee, Cigaal waa caddeystay markiiba oo wuxuu yidhi, "Waar yaadha waa nimanka, anigu libaaxii Webi cunay u badheedhi maayo oo gegidan seexan maayo ee meesha innaga mariya." Ciidankii baa kula booday oo yidhi, "Wadnaha cad kaa go'yee sownakan annaba kula joogna, miyaad naga naf jeceshahay?" "Anigu iyadoo afarta geesood la iga seexdo mooyee seexan maayo", Cigaal baa yidhi. "Waa hagaage naga seexo." Halkii baa la seexday. Cigaal waa nin maantoo dhan geel ilaalinayee markiiba wuu khuuriyey."

Cabbaar markii la jiifay ayaa libaaxii soo dhigtay markaa baa, Cigaal mooyee, inta kale illeyn diyaar bay u ahaayeene, gantaallo ayaa sida roobka lagaga dhigay oo halkaa lagu diley.

Meydkiisii inta la soo jiidey, oo sidii wax fadhiya laga dhigay ayaa Cigaal lugta loogu xidhay oo laga fogaaday. Dhagax iyo qoryo yaryar, ayaa lagu soo tuur-tuuray. Cigaal ayaa isla soo boodey. Wuxuu arkay libaaxa ag-fadhiya! Goor alla goor uu booday oo xadhigii goostay mooyee, Cigaal baa sida leebka is-ganey, isagoo samadaa ka qaylinaya, "Waar hayaay! Hayaay! Hayaay!...."

Colkii kale ayaa intay qosol jaanta wadheen ka daba yaacay oo gaadhay.

**LAYLIS:**

1. Cigaal muxuu geela u soo duubay?
2. Heestu maxay tilmaamaysaa?
3. Sheeg siduu Cigaal habeenkii isu dabbarey?
4. Waa maxay dulucda sheekadu?
5. Sheekadan magac kale ma u heli kartaa?

**MAAHMAAHO:**

1. Hadal intuu afkaaga ku jiruu amaanadaada yahay.
2. Doqoni xadhiga lagu xidhayo xusulladay ku sidataa.
3. Geel-jire geela waana wada jiraa, waana kala jirtaa.
4. Wixii lagu faqaa fagaaruhuu yimaadaa.

**GOOGAALEYSI:**

Dudumo yar duumo kaa xoortay. *(Lulada)*

## CASHARKA 3aad

### *ALOOLKA (Hees)* .

Aloolka waxa laga sameeyaa geedka duurka la yidhaahdo oo laamo dhuudhuuban leh. Suufaf calal ah iyo xadhko ayaa la isugu soohaa. Si farshaxan ah oo qaabsan ayey u sameeyaan. Inta ay sameynayaan haweenku waxay isku madadaaliyaan heeso jiib ah oo ay hawsha ku ilaawaan. Heestan oo ka mid ah heesaha Aloolka, waxaanu ka soo guurinnay buugga hiddaha iyo dhaqanka ee uu qoray Cumar Aw-Nuux.

*Alla waa xujooy oo waa xujooy!*
*Geel xerada diidaa waa xujooy!*
*Alla waa xujooy oo waa xujooy!*
*Xero kale ka ololaa waa xujooy!*

———ooOoo———

*Alla waa xujooy oo waa xujooy!*
*Faras xerada diidaa waa xujooy!*
*Alla waa xujooy oo waa xujooy!*
*Xero kale ka danana waa xujooy!*

———ooOoo———

*Alla waa xojooy oo waa xujooy!*
*Gabadh xilaha diiddaa waa xujooy!*
*Alla waa xujooy oo waa xujooy!*
*Xeelad bay ka wadataa waa xujooy-*

Waxa aan iyana ku daraynaa heesta cawska. Waxa laga sameeyaa cawska xadhko dun midab leh oo lagu tolo cawska engegay. Hees hawleeddan waxa lagu dareeriyaa cawska oo guryaha lagu dhiso, gogol lagu seexdana laga dhigto.

*Cawdu billoy belooy baydheey, hoyal!*
*Belo daran ka yaasiinay, hoyal!*
*In shar lehba sharkeed li'inay, hoyal!*
*Ay hooyaalaayow, hoyaalay!*
*Hooyaalow hooyee, hoyalee!*
*Cawskanow sabool diidow, hoyal!*
*Waqan suuqa lagu dhiginay, hoyal!*
*Soddon lagugu baayicinay, hoyal!*
*Yaa sameeyey lagu odhanay, hoyal!*
*Ay hooyaalaayow hoyale, hooyaalow!*
*Hooyee hoyalee!.*

*File A*
*Soomaali F. 7aad*
*Jimcaale Axmed Cusmaan*

## CASHARKA 4aad

### *LAANTA CAAFIMAADKA (WHO) - CURIS -*

Waxa jirta Laan Caafimaadka Adduunyada u qaybsan oo Jamciyadda Quruumaha ka dhexeysa ka tirsan. Laantaa waxa la sameeyey bishii Abriil toddobadeedii, kolkii uu sannadku ahaa 1948kii. Laanta Xarunteedu waa magaalada Janiifa ee dalka Iswiserland (Swizerland). Siddeed iyo toban dawladood oo dawladaha Laanta ku jira ka mid ah ayaa hadba doorta dadka Laanta ka shaqeeya.

Laantu caafimaadka cudurrada ay wax ka qabato waxa ka mid ah: cudurka feedhaha ee qaaxada la yidhaahdo, cudurka kaneecada ka kaca ee duumada la yidhaahdo, cudurka jabtida iyo xabbadda iyo cudurro kale oo badan. Laantaasu waxay caawisaa dalalka soo koraya. Iyadu waxay dhakhtarrada kaga duwan tahay meelaha cudurku ka bilaabmo ayey shaqadeeda u badisaa si waxyaalaha cudurka keenayaa u dhintaan.

Laantaasi waxay yeelataa shirar dawladaha ku jira isugu yimaadaan. Waxa kale oo ay leedahay xafiis shaqada maalin walba joogtada ah u maamula. Xafiiskaasi waxa u madax ah oo arrimaha Laanta fuliya Maamule Guud. Laantu waxay xidhiidhisaa wixii shaqooyin ah ee caafimaadka ku saabsan ee dalalka dunida ka socda. Laantaasu adduunyada aad bay xagga caafimaadka uga taageertaa, laba daraadle dalalka soo koraya.

Sannad kastaba bisha Abriil toddobadeeda ayaa xusuus loo sameeyaa, oo ah kolkii Laanta Caafimaadka (WHO) dhalatay.

**LAYLI:**

1. Goormaa la aasaasay Laanta Caafimaadka Adduunku?
2. Maxay qabataa Laantu?
3. Dalkee ama dalalkee bay caawisaa Laantaasi?
4. Sidee bay cudurrada ula dagaallantaa?
5. Cudurrada ay la dagaallanto wax ka sheeg?

## CASHARKA 5aad

### *KALA SINNAAN DAD - (Geeraar)*

Geeraarkan hoos ku qoran, oo aan qayb uun ka soo qaadannay, waxa tiriyey llaha u naxariistee Cabdullaahi Suldaan (Tima-cadde) oo 1964kii arkay dadkii oomaaliyeed ee halganka dheer ee gobannimadoonka ah ku soo jirey oo markii ornimo siyaasadeed iyo laba Gobol oo midnimadood la helay, halkii ay dagaal ornimo iyo horumar dhaqaale in loo horkaco ka sugaayeen, gumeysi cusub, abyaalad iyo musuqmaasuq lagu celiyey.

Doorashadii 1964kii markii nimankii taliska siyaasadda hayey ay dadkii abyaalad ku qaybiyeen oo si fool-xun dadkii lacag ugu kala jiiteen, ayaa abdullaahi Suldaan, isagoo taas ka xumaaday curiyey geeraarkaan (halkan kuma lhamma). Wuxuu si qayaxan u muujinayaa habkii foosha xumaa ee dadka lagu aybiyey, dhibaatada gumeystaha cusubi dadka ku hayey iyo nabadgelyada mmadda iyo horumarkeedu ku jiro midnimadeeda. Geeraarkaas wuxuu ku yidhi:

*Rag sagaashanka dhaafayoo,*
*Gadhka saynta gamaankiyo*
*Kebed soohan la moodaa,*
*Sambab loo lulayaayoo*
*Barruur saafiya moodoo*
*La sii jeedinayaa.*

———ooOoo———

*In Soomaali la laayoo,*
*Dayaaraadka sabbeeyiyo*
*Lagu seedhay rasaas aan*
*Saddex qaylo maqlaynoo*
*Sanqadheedii baxayso*
*Suubbanow Baarlamaankuna*
*Saalax watee ku eegay*
*Ninna daah kama saarna*
*Ummaddeenna sidaas ahee*
*Isticmaar salabeeyeyee*
*Leegana seedaha goysay*
*Nin siraa hodmi maayoo*
*Saancad baa ka ifaayoo*
*Sun baa maanta qarxaysee*
*Soomaaliyey ka fogow.*

———ooOoo———

*Sababteeduna waa*
*Subaxii Arbacaad*
*Nimankaynu wax siinayee*
*Sabixiyo Watiiniyo*
*Subxaanaad lagu dhaarshayee*
*Kitaab saarey gacmaha, iyo*
*Maseeteyste wadaad ahoo*
*Socodsiiyey distoorka, oo*
*Subxaanow Watacaalee*
*Sangafuur qabadsiiyayoo*

*Sidaa weeye lahaa, iyo*
*Kuwii baa dhex salooganoo*
*Nasrigu waa sir Ilaahi*
*Ninkuu doonaba siiyoo*
*Haanti waa laga siibey*
*Saabkuna dhaansami maayo.*

———ooOoo———

*Inta reer Saxardiid iyo*
*Reer Sarreeye Dubeeyiyo*
*Reer Samaale tihiin ee*
*Suldaan Caarshe ogaa, iyo*
*Cuqaashii san qallooc, iyo*
*Subax kiina casheeyaa*
*Idin seexinayaan*
*Sallaan aad ka baxdaan iyo*
*Salka meel aad dhigataan*
*Sacabkoo tima yeeshiyo*
*Saabuun xoor laga waayiyo*
*Waa dameer san madow, oo*
*Sinna loo arki maayo*
*Waanay suurto geleyn.*

**Sharaxa Ereyada:**

Gammaan: Fardo
Saalax watee: Dillaal af-madhan wax ku iibsada
Saalabeeyey: Xaaqey
Leego S.Y.L.

**Weydiimo:**

I. b) Ragga da'da ah ee Cabdullaagi geeraarkiisan ku bilaabay muxuu ka sheegay?

t) Barruurta saafiga ah muxuu uga jeedaa?

j) Ragga da'daas ah yaa sidaas u galaya, waxa laga sii jeedinayaana waa maxay? Dadka intiisa kale caynkaa ma la qabaan?

II. b) Yaa laayey Soomaalida geeraarkan lagu sheegay? Arrintooda muxuu taliskii markaa jirey ka qabtey?

t) Sharax:

"Suubbanoow Baarlamaankuna Saalax watee ku eegey".

"Isticmaar salabeeyey".

III. Wadaaddadu waxay "Sangafuur" qabadsiiyeen waa maxay?

IV. Cidhibxumada qabyaaladda ee geeraarkan lagaga hadlay faallo toosan ka bixi.

V. Geeraarkani arrimuhuu ka hadlayo soo koob.

VI. "Sacabkoo tima yeesha, saabuun xoor laga waayey, dameer san madow" muxuu Tima-cadde ku tilmaamay in ay la mid yihiin?

## CASHARKA 6aad

### *WADAADDO IYO WIILWAAL*

Wiilwaal oo maalin meel maraya ayaa la kulmay wadaad caalim ah, diintana ku xeeldheer, dadkuna ku wada yaqaan oo la odhan jirey Aw-Samatar Leedo. Wiilwaal baa ku yidhi: "Waar horta dadka wadaaddow maxaad ku waanisaan?"

"Garaad cabsida Ilaahay baan dadka ku waaninaa", Aw-Samatar baa intuu garaadka kor u eegay dhoosha ka qoslay. Wiilwaal baa cabbaar aamusay, faraskii ka soo degey oo wadaadkii fool-ka-fool isu hortaagey oo isagoo ilka caddeynaya weydiiyey wadaadkii: "Oo Ilaahay mooyee cid kale oo laga cabsadaa miyaanay jirin?" Wadaadkii baa naxay oo u qaadan waayey, gadaal buu u boodey sidii uu dab ku joogsadey. Madaxuu xaggan iyo xaggan u ruxay oo dhafoorka qabsaday oo hoos u yidhi: *"Innaalillaahi wa innaa Ileyhi raajicuun"*. Garaad cabsida Ilaahay cidina laguma labayn karo. "Ilaah mooyee cid kale in laga baqaa maba bannaana".

Wiilwaal baa iska dhaqaaqay oo faraskii dusha uga baxay oo wadaadkii ku yidhi: "Dood baan ka qabaa ee bal wadaaddadiinna oo dhan isu qayla dirta oo waa innoo berrito iyo geedkii halkaa ahaa". Halkii baa lagu kala dhaqaaqay, wadaadkii baa qaylo kula dhex dhacay culimadii degmada, Wiilwaal iyo arrinkiisii buu uga warramay. Halkii baa la isu wada cid dirtey. Kutubtii baa la soo qaatay. Xujooyinkii baa la isla soo aloosey. Kutubtaa la soo qaadey, iyadoo ballankii lagu soconaayo.

Wiilwaal meel ood badan oo Dhiba la yidhaahdo oo Jigjiga u dhow ayuu geed hadhaca hoostiisa ood dheer ku soo xeeray. Wuxuuna ka sameeyey ardaa ilaxidh leh, irrid keliyana wuu u banneeyey, daaftana dermo iyo caws si debecsan loogu goglay, dacalladana dhererku joog nin le'eg yahay; aqal-Soomaali weynna oodda dhabarkeeda ka dhisay. Adhi wanan soocan ahna meeshii buu keenay. Col fardooley ahna gees kastaba laba nin ka joojiyey.

Wadaaddadii oo halkii loo goglay dhaalacyeynaya, kutubtiina geedka u sudhan tahay, su'aashii ay filaayeen ee ay meesha u yimaadeenna u darban, ayaa Wiilwaal oo ay hareero socdaan laba nin oo xoog weyni dharkii dagaalkana huwan, laba seefoodna kala sita, wadaaddadii irridda iska soo taagey. Intuu faadhumaystay oo lugba meel dhigay giirna iska kiciyey, kelyahana qabsaday, wadaaddadiina il-xun ku eegay ayuu labadiisii nin ku yidhi: "Qabta"; isagoo gafuurka cirka u taagaya.

Labadii nin ee xoogga weynaa ayaa labadii wadaad ee ugu soo xigey soo qabtey oo soo kaxeeyey. Aqalkii bawdka ku dhegganaa bay la galeen. Kolkaasaa qub iyo qac iyo caadu yeedhay. Wadaaddadii oo yaabsan oo dhegta taagaya talana ka firirsan tahay ayaa labadii xoog-weyne soo noqdeen. Wiilwaal bay is-hareer taageen iyagoo seefihii dhiiggu tifta hayo gacmaha ku sita. Wiilwaal oo weli cirka afka u taagaya foolkana ururinaya, ayaa haddana labadii nin ku yidhi: "Qabta". Sidii oo kale, ayaa labadii wadaad lala kala orday, aqalkii lala galay oo qub iyo qacdu yeedhay, seefihii oo dhiig lehna mar kale lala soo noqday.

Mar Alla markii ay wadaaddadii arkeen labadii xoog-weyne oo soo noqday ayay oodda jabiyeen, qac! ... Qayb iyaga ka mid ah ayaa bowdkii intii dherer le'ekaa xagga shishe iska dhigey. Colkii fardooleyda ahaa ee debedda tubnaa ayaa soo qab-qabtay wixii soo fakaday. Wadaaddada intii kalena sidii ay isu garbinayeen ee midba kan kale dusha uga fuulaayey ayaa muskii oogada looga baxay. Iyadoo raggii la moodo biiq la qabtay oo qaar jidhkoodii ooddii jeex-jeexday, qaarna dubku ka hoolmay sidii loogu tumanayey, nin walibana leeyahay, "Tolow goormaa adna gacanta laguugu dhigi?", ayaa Wiilwaal ku yidhi: "Waar waa sidee oo maxaa idin helay? Sowdinkii lahaa Ilaah mooyee cid kale lagama cabsado!".

Goortaasaa wadaaddadii qaylo afka kala waaxeen: "Waar Garaad ha na dhammayn, waar Garaad ha na dhammayn!" Wiilwaal baa kolkaa yidhi, "Haddaba, ma ogaateen in Ilaahayna laga cabsado, aadamigiisana laga baqo? Maanta ka dib wadaad hub la' yaan la arkin. Wadaad walowba qalabkaaga qaado oo dadkaaga dhinac ka raac".

**Sharaxa Ereyada:**

Dhaalacyeynaya: Iska jiif-jiifa;
U daraban: U diyaar ah;
Faadhumeystay: lugihii kala durkiyey;
Bowdka: Ardaaga.

**Weydiimo:**

1. Ma Wiilwaal baa toosnaa mise wadaaddada?
2. "Raggii oo la moodo biiq la qabtay". Maxaa ka dambeeyey ee weedhan looga jeedaa?
3. Muxuu uga jeedaa: "Fool-ka-fool isu hortaagay". "Dhoosha ka qoslay", "Qaylo dirta", "Gafuurka cirka u taagey?"
4. "Gadaal buu u booday sidii uu dab ku joogsaday". "Madaxuu xaggan iyo xaggan u ruxay oo dhafoorka qabsaday", weedhahan waxa ka muuqda waa maxay?
5. Afartii wadaad ma dhab ahaan baa loo diley?
6. Dulucda Sheekadu waa maxay?

*Maahmaahyo:*

1. Arrin nin galay eed gal.
2. Af wax dhaafay afaaf gaadh.
3. Allana la kala baryi og, ereygana la kala oran og.
4. Afkaaga waxaad ka tidhaa agtaada ka day.

*Hal-xidhaale:*

Waxa habeenkii daaqa oo aan maalin daaqin.

## CASHARKA 7aad

### *OLOLAHA HORUMARINTA REER MIYIGA (Gabay)*

Cali Cilmi Af-yare, wuxuu ku dhashay meel ku aaddan Sanaag cidhifkiisa Bari. Intuu dhallinyarada ahaa wuxuu ahaa hoobal aad cayaaraha u jecel. Magaalooyinka markuu soo galay wuxuu qayb weyn ka qaatay halgankii gobannimadoonka. Muddo dheer wuxuu gabayaagu u shaqaynayey welina u shaqeeyaa Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha. Dadku waxay aad u barteen Cali caanna uu ku noqday gabayo murti leh oo ku baahsan wejiyada nolosha. Sababta uu gabaygan u curiyey iyo ujeeddadiisaba waxa laga garan karaa marka la akhriyo gabayga.

*Soomaali duullaanka iyo, dirirka ay hayso*
*Dunjigoodba qiirada gashiyo, dooyada is-dhaaftay*
*Duurkiyo miyiga loo kacee, lagu dareerayo*
*Danta loola jeediyo macnaha, daalin baan garane*
*Dulucdiyo runtii waa jahliga, inaynu duugnaaye*
*Dab munaafaq shiday baa la yidhi, duul dhan buu gubaye*
*Dillaal baa arlada meeraayiyo, tuug la soo diraye*
*Adoo daacad wada bay si kale, wax u duwaayeene*
*Dacar iyo dhunkaal kala qadhaadh, malabka doocaane*
*Duca-qabaha iyo kii san baa, looga digayaaye*
*Afkeennii la dilay waa iyadaa, loo dikriyayaaye*
*Nimankii dusha caddaa waxay, naga daboolaanba*
*Dibindaabyo koodkii waxay, nagu duduucaanba*
*Dhaqankeenna doorka ah waxay, hoos u dumiyaanba*
*Daayeerka gereygii Sanaag, uga dul geeraaray*
*Ee hawdka goortuu ku dilay, dib uga sheekeeyey*
*Dalanbaabi iyo ciil wixii, dacas na soo gaadhay*
*Doqontaa illowdiyo nimaan, damac ku nooleyne*
*File B*
*Jimcaale Axmed*

*Dulli qabaha beentiyo fidmada, kugu darooraaya*
*Daba-dhilif shisheeyaha la jira, nooma duur xulo e*
*Dadnimadaada oo muuqatiyo, duubigiiyo xoogga*
*Dugaagiyo cadawgii ku neceb, way dardarayaane*
*Innagoo danteeniyo ogsoon, waxaynu doonayno*
*Dalku waa u baahnaa fartee, cidaha deeqsiiya*
*Durdur iyo rakaad waa inaad, ugu dadaashaane*
*Deelqaafku waa ba'an yahaye, daacad u sheega*
*Yaan xarafku dalab yeelanine, diirka uga qaada*
*Murtidii la duugaayey iyo, dogobka nooleeya*
*Dildillaacsha maansooyinkaa, dahab ka buuxaaye*
*Dararta iyo heesaha macaan, looxa ugu duuga*
*Duuduub wixii kugu noqdaa, kaama daadago e*
*Siyaasadda la doortiyo waddada, dawga lagu gaadhay*
*Hantiwadaagga baaqiisa iyo, dawladnimadeenna*
*Duqu hadalladuu sheegay iyo, waxaynu doonayno*
*Ugu dara duruustaad dhigtaan, garasho waa doore*
*Dacwaddaasu waa macallimadda, midaan dareensiiyey.*

**Sharaxa Ereyada:**

Dunji: Asal
Dooyo: Shir
Duluc: Ujeeddo
Doocaan: Meel magaceed
Dibindaabyo: Dhib, Hagardaamo
Duduuc: Jujuub, Khasab
Dalambaabi: jaahwareer
Dacas: Daal
Dardarayaane: Jiidhayaane
Durduur: Laba celin
Rakaad: Saddex celin
Deelqaaf: Hadal aan munaasab ahayn, gaf
Dogob: Qori xaabeed weyn
Door: Fiican.

**L A Y L I :**

1. b) Goormaa lagu dhawaaqay far-Soomaaliga qoristiisa?

   t) Ololaha cidhibtirka akhris iyo qoris la'aanta goormaa laga bilaabay magaalooyinka, haddase ma la dhammeeyey?

2. Tuducyada: 1, 2, 3, 4 iyo 5aad, miyiga sida qiirada leh ee ardayda dugsiyada, barayaasha iyo dhakhtarradu ugu dareereen danta laga lahaa waa maxay? Adigu Ololahaas ma ka qayb gashay? Haddii aadan ka qayb gelin dadka ka qayb qaatay ma u bogtay? Maxaa kaa reebay? Haddaad ka qayb gashay halkaad ka shaqaysay? Dad intee le'eg baad wax bartay?

3. Tuduca lixaad:

   b) Munaafaqu dabkuu shiday ee lagu gubtay waa maxay?

   t) Yaa ku gubtay? Munaafaqa uu gabayaagu halkan kaga hadlayaa waa ka jaadkee ah? Ma ku waafaqsan tahay in dabkuu shido lagu gubto? Maxaad ku ciqaabi lahayd munaafaqa jaadkaas ah?

4. Tuduca 7aad:

   b) Dillaalka iyo tuugga la soo diray ee arlada meeraya ma jiraan? Sidee baa looga hortegi karaa?

   t) Ma Soomaali baa, ma caddaan baa, ma Afrikaan kalaa, mise cid walba way leeyihiin?

5. Tuduca 9aad

   b) Si tifaftiran u sharax:

   t) Doocaan waa xaggee?

6. Tuduca 10aad: Duca qabaha iyo kan san ee loo digayaa waa kuwee? Maxaase looga digayaa?

7. Tuducee baa ka hadlaya in maanta afkeenna qoran loo wada ordayo dadka badankiisuna bartay, inta kalena ku dadaalayaan barashadiisa?

8. Intaan afkeenna la qorin, afkee baa wax lagu baran jirey? Dhibaatase ma ka iman jirtey?

Gaaladii isticmaarka ee dhulkeenna berigii gumeysiga xukumi jirey waxyaabo badan oo aynu hiddiyo dhaqan u lahayn ayay ina nacsiiyeen. Tuducdee baa muujinaysa in ay afkeenna qaayihiisa iyo murtidiisaba innaga qariyeen oo ina nacsiiyeen?

t) Tuducdee baa muujinaysa gaaladii isticmaarku in ay afkoodii inna jeclaysiiyeen?

j) Ereyga "Duduuceen" maxay kula tahay inuu gabayaagu u isticmaalay?

9. Tuducyada 15 iyo 16:

Daayeerkii iyo gereygii Sanaag sheekada dhex martay waa maxay? Muxuu Gabayaagu uga jeedaa?

10. Tuducyada 17 iyo 18 maxaa ka dhexeeya? Gabayaagu muxuu ula jeedaa mase ku raacsan tahay?

11. b) "Dadnimadooda oo muuqatiyo duubigiyo xoogga, Dugaagga iyo cadowgii ku neceb way dardarayaane". Labadan tuduc sharax. Gabayaaga ma ku raacsan tahay siduu leeyahay?

t) Sidee dadnimadaada iyo xooggaaga (ama xagga dhaqaalaha iyo cududda ha ahaatee) ummadi u muujin kartaa?

j) "Innagoo danteenniyo ogsoon waxaynu doonayno". Tuducdan macnihiisa iyo waxa uu gabayaagu ka hadlaayo, guud ahaan adoo maskaxda ku haya waxaad ka hadashaa danta aynu ka leennahay Ololaha Horumarinta Baadiyaha. Tuducyada muujinaya sheeg?

x) Waxyaabahaas naftoodana sheeg?

12. b) "Murtida la duugaayey iyo dogobka nooleeya, dildillaacsha maansooyinkaa dahab ka buuxaaye".

Si deggan intaad ugu fiirsatid macnaha labadan tuduc, ka hadal murtida ka dambeysa.

t) Tuducyadee ka hadlaaya in hantiwadaagga ujeeddooyinkiisa qarannimadeenna iyo aqoonta kaleba si tifaftiran loogu dhigo dadka Soomaaliyeed ee baadiyaha ku dhaqan?

## CASHARKA 8aad

### *AFRIKAAY HURUDDOOY (Hees)*

Heestan la yidhaahdo "Afrikaay Huruddooy" waxay u baaqaysaa dadka reer Afrika oo ay ku guubaabinayso in ay ka dhiidhiyaan gumeysiga saancaddaalaha ah ee ku yimid qaaradda doolaallada budhcadnimada ah. Heestu waxay xusuusinaysaa dadka reer Afrika sidii loo kala iibsan jirey ee haddii loo baahdona loo rari jirey sida xoolaha. Heesta waxa curiyey Ismaaciil Xirsi Ciise (Farxaan).

*Hoheey! Afrikaay huruddooy*
*Cadow ku heeryee, huruddooy!*
*Halyeeyadaadii huruddooy;*
*Haad baa cunaayee, huruddooy*
*Haamaa la saaraa huruddooy;*
*Hayin sidiisii huruddooy,*
*La hoggaaminaayaa.*
*Dulli lama hillaabtee; aaway hanadadaadii?*
*Doqon baa habowsane;*
*Weligeed hallowsane,*
*Sidii xoolihiibaa;*
*Xero nalagu hooyaa.*

*Habeenna badan baan, huruddooy;*
*Hammuun ku seexdee, huruddooy;*
*Hiirtaanyo awgeed, huruddooy;*
*La hadli waayee huruddooy;*
*Caanihii hashaydaan huruddooy;*
*Haleeli waayee huruddooy;*
*La iga hooyaa.*
*Dulli lama hillaabtee; aaway hanaddaadii?*
*Doqon baa habowsane;*
*Weligeed hallowsane;*
*Sidii xoolihii baa xero nalagu hooyaa.*

*Horor waraabaha huruddooy;*
*Waaxyaha ku haystaa huruddooy;*
*Oo hantidaadii huruddooy;*
*Ka hirqanaayee huruddooy;*
*Aad hagaagi doontaa.*

*Dulli lama hillaabtee aaway hanaddaadii?*
*Doqon baa habowsane;*
*Weligeed hallowsane;*
*Sidii xoolihii baa xero nalagu hooyaa.*

**Sharax Ereyada:**

1. Hanad: Halyeey, geesi
2. Hillaabtay: Hagoogtay, huwaday
3. Hammuun: Gaajo, baahi.
4. Hiirtaanyo: Ciil raagay.
5. Hirqanaayee: Ka dhergaayee.

**L A Y L I :**

1. Muxuu abwaanku u dhaliilay qaaradda ee uu leeyahay "Afrikaay Huruddooy?"
2. Tuduca ah "Haamaa la saaraa, la hoggaaminaayaa". Waqtima ayuu abwaanku taariikhda ka tilmaamayaa?
3. Sidee buu hantida Afrika gumeystuhu uga hirqanaayaa?
4. Maxaa innagaga habboon gumeystaha dhibtaa inna soo mariyey inaan kula kacno?

## CASHARKA 9aad

### *KACAANKII OKTOOBAR*

Dalkeenna waxaa soo maray sannado badan oo gumeystayaashu gacanta ku hayeen. Muddadaana dadkeennay isku dirayeen, kalana kaxaynayeen, kuna wadeen siyaasadda ku magac dheer "kala eri aad xukuntide". Gumeysi nacayb awgii waxaynu odhan jirney "Soomaaliyeey nin aan kula tol ahayn, oo kaa taag roon oon kuu tudheyn, oon kaa tegeyn, ayaa ku yimiyee tasho".

Soomaalidu intuu gumeystuhu u talinayey waxay ahaayeen dad gobannimada doonaya ama u dagaallamaya. Markii gobannimada la helay 1960kii, Soomaali oo dhammi meel kasta ha joogeenee way farxeen oo ciyaar bay meel kastaba ka qabsadeen. Yididdiilo weyn baa wada gashay oo ruux kastaaba wuxuu is-yidhi haddaad gumeystihii ka raysanaysaa, ood gaajada iyo cudurka iyo cilmi-darrada ka baxaysaa. Hase ahaatee, waxay filanayeen oo dhammi wuxuu noqday wax aan waxba ka jirin. Maxaa yeelay, nimankii loo doortay madaxnimada dalka iyo danihiisa in ay maamulaan, ayaa noqday kuwo dantii dadweynaha tuuray, dantoodiina gooni u qabsaday.

Dadkii way isku direen, qolo-qolo ayey u qaybsheen siduu gumeystuhu yeeli jirey. Hantidii dadkana way boobeen, dabadeedna iyadoo hoog iyo balambali lagu jiro ayaa Ciidanka Qalabka Sidaa u adkeysan waayeen. Sidaa daraaddeed baan awoodda dalkii ula wareegeen 21kii Oktoobar 1969kii. Tawraddu sidaasay u dhalatay, dadweynuhuna garab iyo gacan ku siiyey, loona baabi'iyey foolxumadii dalka lagu maamulayey. Wadajirkii iyo walaalnimadii dadka Soomaaliyeed u baahnaa Tawraddii Oktoobar baa soo celisay oo soo noolaysay. Arrimihii Guddiga Sare ee Tawraddu ku dhawaaqay 21kii Oktoobar ayaa haatan danaha dalku ku socdaan, waana kuwo lagu guuleystay. Tawraddu dadweynaha dantooda ayey u dadaalaysaa waanay taageersan yihiin, maxaa yeelay, dadku wuu yaqaan dantiisa halkay ku jirto. Ciddii danahooda walaaqaysa indho gooni ah ayey u leeyihiin. Waxase jira dad yar oo ay la qallafsan tahay majaraha siyaasadda dalka maanta lagu hoggaaminayo. Kuwaana waxa ku habboon in ay iimaansadaan talada madaxda dalka iyo siyaasadaha la rumeysan yahay in horumar dhakhso ah iyo barwaaqaba lagu gaadhayo.

**L A Y L I :**

1. Xornimada ka hor maxay ku dhisnayd siyaasadda gumeystuhu?
2. Muxuu dadku filaayey dhalashada calanka 1960kii?
3. Maxaa lagala kulmay xukunkii dadkii la soo dooran jirey?
4. Maxaa ku kallifay Ciidammada Qalabka Sida in ay xukunka gacanta ku dhigaan 1969kii?
4. Wax ka sheeg waxyaalihii isbeddelay?

## CASHARKA 10aad

### *HAYS - XAKABIN MEEL (Gabay)*

Meesha la yidhaahdo Laas-adaar ayuu Ismaaciil Mire ku dhashay sannadkii 1872kii. Yaraantiisii wuxuu ahaa xoolo-dhaqato. Da'diisu markay ahayd labaatan (20) sano oo wax yar la', wuxuu ku biiray Ciidammadii Daraawiishta oo uu sida runta ah ka ahaa raggii wax ka aasaasay. Nin lagu yaqaan dagaalyahannimo, Sayidkana aad ugu hoggaansanaa halgankii Ingiriisku kula dagaallamayey ayuu ahaa. Wax badan baanu xaaskiisa waqti uu ku arko u heli jirin. Dhowr goor ayuu abbaanduule u ahaa Ciidammo Daraawiish ah oo soo hooyey lib aad u weyn; sida Ciidammadii Ingiriiska uu kaga guuleystay meesha la yidhaahdo Dul-madoobe. Dagaalyahannimada ka sokow, Ismaaciil wuxuu ahaa gabyaa weyn oo degaankiisa caan ku ahaa. Gabaygan soo socda wuxuu ku waaninayaa inan inamadiisa ka mid ahaa oo uu saluugay markii uu arkay isagoo dhallinyarannimo iyo cayaaro jiiteen. Wuxuu yidhi:

*Caliyow xusuus kugu dulee, walad xumaadaaye*
*Xaluun baan xa'daas gabay la kacay, oo xafiiltamaye*
*Dhaqashane ha xalaalaysanine, maqal xuruuftayda*
*Cabdi iyo Xuseen iyo Xirsaa, kaa xusuus badane*
*Xiniin-yaalihii kula sinnaa, xoogsi buu tagaye*
*Xadka qabada niman baa gudboo, soo xakaabsadaye*
*Niman baa xeryaha deyr ka dhiga, xananka Toomoode*
*Niman baa xijiga iibsadiyo, xabag qadhoomeede*
*Niman baa xafaarka u guntada, oo xabaal qoda*
*Niman baa dayuurado ku xidhan, xiima samadaase*
*Niman baa xarrago quudhsadoo, xaarka iibsadaye*
*Liiraha rag baa Xamar u tegay, xeeb intuu maraye*
*Hablaha xuuralcaynta ah rag baa, xeel ku guursadaye*
*Xaajinnimada rag baa ku tagay, xad iyo laandheere*
*Wax dhaaxaan sidkaha kuugu xidhey, xaaluf iyo dooge*
*Wax dhaaxaan xagaagii wan weyn, xawda kuu jaraye*
*Wax dhaaxaan sangaha xoobiyoo, kuu xadhaan ridaye*
*Soddon gu' baan ku xasaanshay iyo, waliba xaab-xaabe*
*Kugu xiiqay sidaan kuu lahaa, xaa-xiyahay toose*
*Xag-uun labada daarood ku daran, hays xakabin meele.*

Markii gabaygan loo tiriyey ka dib, Cali wuu isqaad-qaaday oo shaquu raadsaday, waxana uu qortay Askari.

**Sharax Ereyada:**

Cabdi, Xuseen iyo Xirsi: Gabayaaga dhallinyaro uu adeer u yahay.

Soo xafiiltamaye: Soo xoogsadaye.

Xanan: Dhir qodax leh.

Toomo: Meel magaceed.

Laandheer: Meel magaceed.

Xaaluf: Abaar.

Xawda kuu jaraye: Kuu qalaye.

Xoodiyo: Salaaxay.

Hays xakamin meel: Ha is-qotomin meel, ha is-taagin meel.

Xaaxayahay: Doqon-yahow.

Xiji: Beeyo, Foox.

Xafaar: Xabaale-qode.

Ku xasaanshay: Ku xannaaneeyey.

Xabbaadh: Qaybta la soo dhaqo ee geela ah.

Qabo: Geed haamaha laga qorto.

Liire: Lacagta Talyaaniga.

Xuuralceyn: Gabadh aad u qurux badan.

**Weydiimo:**

1. Tuduca labaad sharax, adigoo si tifaftiran uga hadlaya wuxuu gabayaagu u xafiiltamay.
2. Siyaabaha badan ee loo xoogsado isagoo tusaaleynaya Ismaaciil inankiisa dhawr mirood ayuu u tilmaamay. Si kooban uga hadal mirahaas iyo qaayahoodaba.
3. Sidee baa gabayaagu u xannaaneyn jirey inankiisa? Si kooban uga hadal?
4. Tuducdee baa muujinaya shaqada in qof kasta oo itaal lihi uu ku ordayo? Maxaad is-leedahay Cali Tuducdaas wuu ka korodhsaday?
5. Tuducdee baa muujinaya in uu Ismaaciil wax badan inankiisa waaniyey?
6. Si kooban waxaad uga hadashaa ujeeddada guud ee gabayga. Caddee inaad gabayaaga ujeeddadiisa raacsan tahay iyo in kale. Haddaad ku raacsan tahay maxaad ku raacday?

CASHARKA 11aad

## *RAH QAAMEYSAN*

Waxa la yidhi Rah baa amaah qaatay, isagoo gaajo xumi hayso. Rahu wuxuu ballan-qaaday in uu qaanta ku bixiyo muddo yar dabadeed. Hase yeeshee, ballankii muu oofin. Markii ciddii qaanta ku lahayd weydiisatay qaantiina wuxuu ku yidh: "Waar yaa waa ninka, waxaan kuu sheegayaa annagu goortan oo kale ma miyir qabno, maxaa yeelay, roob baa noo da'ay, haddaan rah nahayna, goortan oo goob waliba biyo noogu jiraan waannu waalan nahay ee marka aad wax miyir qaba aragto wax weydiiso". Ka dibna, ruuxii qaanta raha ku lahaa wuu ka noqday, isagoo la yaabsan.

Beri dambe ayaa ninkii Rahii ku soo noqday, isagoo Jiilaalkii axasha dhigay oo rahiina dhoobada ku naban yahay. Markaasuu rahii ku yidhi, "Waar yaahee waa raha, bal warran imminkana?". Markaasaa rahii intuu naxay yidhi, "Allah, waar miyaan in yar oo naxariis ahi wadnahaaga ku amban? Ma goortaan oo kale ayaa la is-qaanamaa? Sowtan aan Jiilaal caddaaga ku jirno". Intaa dabadeed ayaa ninkii qaanta ku lahaa dib uga noqday, waxase uu ku yidhi: "Imminkana waan kaa noqon, waayo, kaadi badane waa loo gogol badiyaa. Waxaadse ogaataa, markan marka xiga inaan dib kaaga laabmi doonin".

Ninkii qaanta lahaa kolkuu dhowr bilood ka maqnaa ayuu mar dambe ku soo laabtay, iyadoo Gu' fiican da'ay oo rahiina meel kasta ka qaylinayo — dhaa...dhaa...dhaa.., kolkaasuu ku yidhi: "Waar rahow, maantana maxaad odhan? Si aan kaaga noqdo ma dhaqnee wixii inna kala saaraya yeel". Dabadeed, rahii baa hadloo yidhi: "Waar yaa waa ninka xilligan oo kale ruuxii wax na weydiiyaa waa nin aan dunida la socon. Maantoo kale rah dhego uu wax ku maqlaa kuma yaalliin. Bal iska noqo waa dambe oo wax la kala garanaayo ha innoo ahaato".

Markaasaa ninkii intay cadho dhag ka tidhi, uu qaaro weyn kala booday halkan, ayuu rahii oo nimco awgeed bararay la dhacay. Rahiina intaa wuu qaylinayayey, waxaana la yidhaa waxa cida badan ugu wacan waa xanuunkii uu ninkaasi baday.

**Sharax Ereyada:**

Axasha dhigay: Habsaday

Ku amban: Ku jirin

Qaara weyn: Bud, ul qara weyn

Dheg uma dhigin: Ma dhegeysan, iska dhego maray

Cadho dhag ka tidhi: Aad u cadhooday.

**LAYLI:**

1. Gaajadu maxay ku kalliftay rahii?
2. Maxaa waalay raha? Waayo?
3. Sidee buu qaantii uga baxay?
4. Dulucda sheekadu waa maxay?
5. "Kaadi badane waa loo gogol badiyaa". Sharax maahmaahdaa.

*Googa:*

Meeshaa mar oo muuqaa la waa.

## CASHARKA 12aad

### *GEED IYO RUUX (Hees)*

Heestani waxay ka mid tahay heesaha xulka jacaylka ugu door-roon. Abwaanku wuxuu tilmaamayaa gabadh uu sifaheeda la cuskanayo quruxda dabeecadda iyo degaanka.

Waxay qaayaha heestu aqoon buuxda ka bixinaysaa qoto dheerida abwaanka caanka ah Maxamed Cumar (Huryo) oo allifay heestan; waxaanu allifaa heesaha, gabayada iyo riwaayadahaba. Maxamed wuxuu ka tirsan yahay abwaannada Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha.

*Geed iyo ruux markaynu kala garanno*
*Qorraxdoo gees kastaba fallaadha gantay*
*Yaad geddeedii tahoon lagaa garan*
*Yaad geddeedii tahoon lagaa garan.*

———oooOoo———

*Daruur goor barqa ah ku guud timi*
*Intay biyo gelisay kala gurataad*
*Yaad geddeedii tahoon lagaa garan*
*Yaad geddeedii tahoon lagaa garan.*

———oooOooo———

*Gugoo da'ay geedahoo baxay*
*Gelgelimo xareeda oo galacloo*
*Garaarale baan lagaa garan*
*Garaarale baan lagaa garan.*

———oooOooo———

*Goor fiida godkeeda jeex la gashay*
*Guduudka sagalkee u gaarka ah*
*Yaad geddeedii tahoon lagaa garan*
*Yaad geddeedii tahoon lagaa garan.*

*Dayaxoo goor caweysin soo gudey*
*Geyigoo nuuray gelin dhexaadkii*
*Yaad geddeedii tahoon lagaa garan.*

**Sharaxa Ereyada:**

Geddeedii: Sideedii, la mid tahay

Galacle: Halacle

**LAYLI:**

1. Tuduca u horreeya, waqtiga uu abwaanku tilmaamayo marna ma u fiirsatay?
2. Sidee bay sifada abwaanku kuugu dhalatay?
3. Shanta sifo ee uu gabadha ku tilmaamay kee dooqaaga aad u cajabiyey? Waayo?
4. Tuducyadan soo socda macnee:
   - b) "Goor fiida godkeeda jeex la gashay".
   - t) Gelgelimo xareedda oo galacle".

## CASHARKA 13aad

### *GUUBAABO (Buraanbur)*

Waxa tirisay Xaliimo Soofe oo ku dhalatay magaalada Gaalkacyo 1952kii. Hadalladeedu qiiro ayey leeyihiin, had iyo jeerna waxay guubaabin jirtey dadweynaha si ay uga gilgishaan waxyaalaha foosha xun; waxa aanay tilmaami jirtey in Soomaaliya gumeyste iyo dabadhilifkii u tashaday.

Mar Addis Ababa go'aan been-been ah laga soo saaray waxay shicibka ku tidhi:

*Waa tii Afrikaanku ururoo, la wada ogaa,*
*Waa tii Addis Ababa lagu, qaatay aaminnimo,*
*Waa tii lagu ooday Afrikaanku, way isku aqal,*
*Aaraa'dii iyo hadalkii waa, tii la wada ayiday,*
*Adduunka laga sheegay Afrikaanna, wada saxeex,*
*Itoobiya waxa ka dhacay, waa la wada arkaa,*
*Waxay ku ahaatay yaa, ii iftiimin kara?*

———oooOooo———

*Diigoolkii Faransa dhinac, buu i dubanhayaa,*
*Doollarkiyo lacagta dahab, buu ku iibsadaa,*
*Hadba ninkuu doonayuu, daawa kula dhigtaa,*
*Sidee geel dayr dhaluhu, doobbi ugu sitaa,*
*Diir xaraar ma laha raggii daarta noo fadhiyey,*
*Dadyow Soomaaliyeed, waad ka daahantay,*
*Waa dareen culuse shicibkow, dan ugu istaag.*

**LAYLI:**

1. Guubaabadan maxaa ku kallifay?
2. Maxay dadka ugu baaqaysay?
3. Afrikaanku maxay ku urureen? Halkayse ahayd?

## CASHARKA 14aad

### *SHAAH AAN SHAAHBA AHAYN (Geeraar)*

Cabdullaahi Cabdi Shube, Allaha u naxariisto waa gabayaa caan ku ah gabayada, maadda, majaajillada iyo murtidaba. Wuxuu ku dhashay kuna barbaaray magaalada Hargeysa, markii dambana wuxuu ka shaqeeyey Raadiyo Hargeysa. Geeraarkan hoos ku qoran wuxuu ku tilmaamayaa waxyaalaha aan sidoodii dhabta ahayd ee lagu yiqiinnay ahayn, hase ahaatee, lagu tilmaamo waxyaalihii dhabta ahaa iyo waxyaalo aanad markiiba garan karin waxay yihiin.

*Shaah aan shaahba ahayn,* ★ *Shaadh aan shaandhba ahayn,*
*Shooki aan cidi joogin,* ★ *Shariiryo aan dux lahayn,*
*Shimbir aan duuli kareyn,* ★ *Shaydaan aan la arkayn,*
*Iyo sheekh aan sheekhba ahayn,* ★ *Bal aan idiin kala sheego:-*
*Shaah aan shaahba ahayn,* ★ *Waa shey garab xaali qaboobayo*
*Islaantii shaqlan haysoo* ★ *Shadaabkii ay ku dartoo*
*Habro loo shushubaayo.*

———oooOooo———

*Shaadh aan shaadhba ahayn,* ★ *Waa shamiis ober koodh oo*
*Shaqaalahaa fasishoo,* ★ *Shiraaq buu u egyoo,*
*Kaasaan shaadhba ahayn.*

*Shooki aan cidi joogin,* ★ *Waa xabaasha shareeran*
*Iilka yar ee ka shisheeya oo,* ★ *Waa shooki aan cidi joogin.*

———oooOooo———

*Shariiryo aan dux lahayn,* ★ *Waa quraaca la shiilo*
*Shaydaan aan la arkayn,* ★ *Waa naag shaadir hagooganoo*
*Indhihiinna shareertoo,* ★ *Shaambinaysa agtaada,*
*Ee yaad ku sheegi lahayd,* ★ *Waa shaydaan aan la arkaynee.*

———oooOooo———

*Sheekh aan sheekhba ahayn,* ★ *Shanbadhyoodliyo naadir*
*Waa nin faal ka shaqeeya* ★ *Wuxuu sheegay la waayoo,*
*Kaasaan sheekhba ahayn.*

**Sharaxa Ereyada:**

"Shooki": Xabsi, "Jeel"

Shariiryo: Baruuro yaryar

Shey garab xaali: Shaaha xun

Shadaab: Geed udgoon oo shaaha lagu daro.

Shaadir: Shuko

Shareerto: Dabooshay, qarisay

Shaambinaysa: Xarragoonaysa, xarrago soconaysa, maraysa.

*Weydiimo:*

1. Geeraarkan yaa tiriyey?

2. Ujeeddada guud waa maxay?
3. Waxyaabaha laga hadlaayo sheeg?
4. Tuduca lilka ka hadlaya muxuu gabayaagu ku sheegay?
5. "Naag shaadir intay xidhatay, indha-shareertay", muxuu ku sheegay?
6. Shanbadhyoodliyo naadir muxuu ku sheegay?
7. Geeraarkani muxuu geeraarrada kale kaga duwan yahay?

## CASHARKA 15aad

### *NIMAAD DHASHAY KUMA DHALIN*

Bil iyo badh ayaa ka soo wareegtay geeridii Idriis xaaskiisa, wuxuuna galabtaa dhex fadhiyey daaradda gurigiisa. "Aabbo, Warmoogey, markaan ku arkaba hooyadaa baa qalbigayga ku soo maaxanaysa". Idriis ayaa sidaa yidhi, isagoo dhabta ku haya yartiisii oo hadba dhunkanaya. Idriis wuxuu aad u jeclaa inantiisa yar, waxaana caada u ahayd kolka uu guriga ka baxayo iyo kolkuu soo galoba in uu dhunkado. Ballan wuxuu ku qaaday inaan inantiisu weligeed waxay u baahato u ciishoon oo had iyo jeer ay faraxsanaato. Yarta waxa u hayn jirey gabadhii gurugiisa uga shaqayn jirtey, wuxuuna kala dardaarmi jirey oohinta. Wuxuu u bixiyey magacyo dhowr ah oo ay ka mid ahaayeen: Warmoog, Abyan, Dhimbiilo iyo kuwo kale. Warmoog hadday kortay oy toban jirtey, waxay noqotay inan cabban oo aabbaheed ka anfariirisay. Aabbaheed waxay ka codsatoba waa uu la jeclaa, waxayse ku kallifi jirtey waxyaabo in la sugo u baahnaa. Mararka qaarkood waxay weydiin jirtey aabbaheed waxyaabaha ay ka midka ahaayeen: "Haddaan weynaado, sidaan yeeli doonaa aabbe? Yaa i aroosi doona? Guri sidee ah ayaa la igu aroosi doonaa?" Iyo kuwo kale oo fara badan. Warmoog magac kale ayaa aabbaheed u bixiyey waxana uu ahaa Koran-waa, mid u qalmana wuu ahaa.

Idriis gurigiisa qof aannu isaga u idmin weligii ma soo gelin; Koran-waa cid guriga ugu iman kari jirtey ma jirin. Waxa inantii ku adkaatay siday u arki lahayd dhallinyarada ay dugsiga isku barteen. Dugsiga baabuur ayaa lahu geyn jirey, lagagana soo celin jirey. Sidaa awgeed, waqti ku filan oo ay kula sheekaysato Jaallayaasheed ma ay heli jirin. Inanta aabbaheed uma oggolayn in iyada cidi u timaaddo ama iyadu cid aaddo. Halkaa waxa ka dhashay in ay gabadhii aabbaheed colaad weyn u qaaddo aadna u necbaato. Kol odayga hargab ku xummaadayna waxay is-tidhi dhimashadiisii baa soo dhowaatay. Markii uu doorsadayna aad bay uga xumaatay, waxayna u qaadan weyday arrimihii ay isla saarsaaraysay oo waxba ka rumoobi waayeen. Koran-waa aabbaheed, maalintii ay dhalatay iyo markay weynaatay ee naag gurigal ah noqotay isku si ayuu u jeclaa. Jacaylkii uu inantiisa u hayey wuxuu ogeysiiyey in uu guurkii iska daayo, maxaa yeelay, wuxuu ka baqay in ay isku xumaadaan. Ayaandarraduse waxay ahayd odayga oo inantiisii indho kale ku aragtay, oo laga indha saabay fiicnaantiisii iyo xannaanadiisii.

Koran-waa way fekertay, waxayna is-tidhi: "Sidee baan odayga u dilaa aan dhibtiisa ka raystee?" Waxay intaa ku dartay: "Haddaan sun u qariyo sow ka iil heli maayo?" Markay gabadhu sidaa ku fekeraysay ruuxeeda, odaygu wuxuu ku maqnaa talo kale. Odaygu wuxuu ku tashaday in uu xajkii u kaco, waxase ku adkaatay in uu Koran-waa ka tago. Ugu dambeystiina wuxuu ku goostay in uu ruuxeeda xajka u kaxeeyo. Galab mar ay ahayd ayuu Idriis u yeedhay gabadhiisii, wuxuuna ku yidhi: "Maandhay waxaad ii raacaysaa xajkii, waxaynu bixi doonnaa toddobaadkan ee alaabtaada ururso." Koran-waa aad bay uga naxday warkaa isaga ah illeyn waxayba rabtay in ay aabbaheed disho laba beri kaddib. Markaas bay waxay tidhi: "Aabbe, naag baa dhar ii toleysay ee aan sugno". Runtiina waxay rabtay in ay labada beri dhexdooda kaga gaadhsiiso. Markaasaa dhunkasha aan dhab ahayn ka baadi-doontay. Odaygii baa isagoo faraxsan oggolaaday arrintaa.

Sir-ma-qabe Allow sahan ah ee subaxdii dambe ayaa wiil yar oo odaygu wax u dirsan jirey u soo sheegay in Koran-waa ay gurigii habartii falalowga ahayd ay joogtay oo ay ku lahayd waxaan rabaa inaad sun aan aabbahay ku dilo ii samaysid. Odaygii intuu orod boobay ayuu gurigii habarta daf yidhi oo arkay gabadhiisii oo koob wax biyo ah u eg ku sidata. Koran-waa markay aragtay aabbaheed oo kor taagan, ayey naxdin suuxday, habartiina intay qaylo dhegaha is-qabatay bay tidhi "Yaa kuu amray inaad gurigeyga soo gasho?".

**L A Y L I :**

1. Inanta hooyadeed xaggee bay jirtaa?
2. Maxaa ku tusaya in uu odaygu gabadhiisa jeclaa?
3. Koran-waa maxay aabbaheed kula collowday?
4. Idriis gabadhiisa wuxuu ku tashaday in uu xajka u kaxeeyo. Waayo?
5. Koran-waa hadimadii ay aabbaheed ugu talo gashay ma ku guuleysatay?
6. Maxaa loola jeedaa, "Nimaad dhashay kuma dhalin?".

## CASHARKA 16aad

### *OGOW (Hees)*

"Ogow" oo ah hees dadka Soomaaliyeed ogeysiinaysa ugana digaysa dhibta iyo cirib-xumada cadowyada aadamiga, siiba saddexda halista ah: Jahliga, Gaajada iyo Cudurka, waxa tiriyey Xasan Cabdi Nuur oo ku dhashay magaalada Qardho, sannadkii 1954kii. Abwaanku wuxuu tilmaamayaa oo kale qiimaha uu leeyahay wadajirka iyo isku duubnida ee meel looga soo wada jeesanaayo cadowyada:

*Gumeystaha haddii aan*
*Guruxyadu arkaynoo*
*Gacantuna la dirirayn*
*Marna garan maayee - Ogow.*

*Gaajada haddii aan*
*Laysu geynin xooggoo*
*Geesiga u diriraa*
*Gobannimada curiyee*
*Gees laga abbaarayo*
*Marna guuri maayee - Ogow.*

*Guunyada ninkii lahaa*
*Gaaxdeeda maalee*
*Geed maalee roob*
*Geedaha ka saaree - Ogow.*

*Go'aankiyo ujeeddada*
*Waxaan uga gol-leennahay*
*Nin walbow gilgilo oo*
*Geyiga u shaqeeyoo*
*Geestaada ka dhowr*
*Geldoloollada,*
*Jahliga gaboobaan,*
*Garashiyo aqoon weyn*
*Gunta lagaga goyneyn,*
*Marna guuri maayee - Ogow.*

*Cudurkii qaantooboo,*
*Gaasiriya adduunka,*
*Laga gacan-sarraynayn,*
*Marna guuri maayee - Ogow.*

*Hawsha garabsigeedaa,*
*Guusha lagu hantaayee,*
*Garsoor iyo mudnaan baa,*
*Geyi lagu dhaqaayee,*
*Geeddiga hayaamaa,*
*Durba rayska gaadhee - Ogow.*

*Go'aankiyo ujeeddada,*
*Waxaan uga gol-leennahay*
*Nin walbow gilgilo oo,*
*Geyiga u shaqee.*

**Sharaxa Ereyada:**

Guunyada: Xoolaha.

Guruxyadu: Indhuhu.

Gaacan maayo: Waaban-maayo.

Gol-leennahay: Dan leennahay.

Gaasiray: Wax u dhimay.

**LAYLI:**

1. Immisa cadow ayaa hestu tilmaamaysaa?
2. Muxuu abwaanku uga horreysiiyey gumeysiga cadowyada kale?
3. Si ballaaran u faahfaahi sida Gaajada loo dabar jaray.
4. Muxuu uga dan leeyahay abwaanku Tuducyadan:

   b) Geesigii u diriraa, gobannimada curiyee.

   t) Guunyada ninkaa lahaa, gaaxdeeda maalee.

   j) Geestaada ka dhowr gol-doloollada!

## CASHARKA 17aad

### *DARDAARAN (Gabay)*

Cabdi Gahayr, oo ay ooridiisii hore ka dhimatay ayaa gabadh kale guursaday. Gabaygan oo waano ah wuxuu kula dardaarmayaa gabadhaa dambe, wuxuuna yidhi:

*In gar xidhata ama guudka dabi, gebiga Soomaali,*
*Waataan gayaan dumar ku nacay, lama gubaantiiye*
*Adna geela waxaan kaaga madhay, gaaridaad tahaye*
*Ha yeeshee, wixii kula gudboon, garangartaad joogto*
*Niriga guriga daaqiyo ratiga, geela laga reebo*
*Waa inaad adduun waa gubbine, maqasha gaadhaaye*
*Waa inaad martida tii golmoon, gogosha siisaaye*
*Waa inaad gasiin ugu dartaa, xeedhyo geeda lehe*
*Waa inaad wax lama goofiyee, gaarna dhigataaye*
*Hadduu marada geyngeyn ku dhaco, waa gunnimo weyne*
*Waa inaan gambadu kaa xumaan, golaha joogtaaye*
*Kol haddaan gacmaha loo xinnayn, kuma guduutaane*
*Waa inaad gadaal dhaashataa, garashadeydiiye*
*Gudguduhu hadduu soo onkodo, geydhu waa halise*
*Gufaacada horuu kaga ridaa, guunta buulka lehe*
*Haddaan laba gufeys laysku darin, gale dabayluu*
*Gig ka siiso gibil xeeran bay, guudka mariyaane.*

**Sharaxa Ereyada:**

Gar: Garays

Guudka dabi: Timaha tidic (macnuhu waa gabdhoo idil)

Madhay: Bixiyey

Garaangar: Reeraha, Beesha aad la taal

Golmoon: Baahan

Lama goofiyee: Lama xaalufiyee, lama madhiyee

Geyngeyn: Barbaro wasakh ah, heerheer.

Gudgude: Roobka habeenka da'a, mirood

Geydhu: Dhaxanta roobka

Gufaaco: Burqashada hore roob iyo dabaylo isku jira.

Gig: Adkee, giiji

Gibil: Saan-weyn oo aqalka lagu gedfo.

**LAYLI:**

1. Ereyada gabaygan laga soo xulay macnahooda u sheeg siday ugu jiraan gabayga:

   I) Lama gubaantiiye

   II) Gasiin

   III) Xinnayn

IV) Guunta

V) Gufeys.

2. Muxuu uga jeedaa gabayaagu:

   b) "In gar xidhata ama guudka dabta" erey qudha ma ku sheegi kartaa.

   t) "Waataan gayaan dumar ku nacay lama gubaantiiye". Waa maxay waxa uu ku nacay gayaanka dumarka?

3. Cabdi Gahayr waxyaabaha uu gabadhaa kula taliyey waxa lagu soo koobi karaa dhowr qodob. Sheeg dhawrkaa qodob. Si kooban uga faallood.

4. Gabayga ka soo qaad Tuducyada muujinaya:

   b) In uu gabayaagu gabadha ka bixiyey xoolo yarad ah.

   t) In wixii gurigeeda yaalla ay wax la hadho cid kastaaba ha timaadee.

   j) In ay martida siiso cunto fiican.

   x) In ay daryeesho xoolaha iyo hantida gurigeeda.

## CASHARKA 18aad

### *WAXTARKA DHIRTA (Curis)*

Waxtarka dhirta lama soo koobi karo, wax baanuse tusaale ahaan ka sheegaynaa. Waxa ka mid ah waxtarka geedaha:

1. Looxaanta daaraha lagu dhiso, kuraasida, iyo miisaskana laga qoro.
2. Aqal-Soomaaligana waa laga sameeyaa.
3. Xaashidaa laga sameeyaa.
4. Birtaa lagu daabaa, sida dubbaha, gudinta, iwm.
5. Weelka ayaa saab looga dhigaa, sida haanta iyo qunbaha.
6. Jidhifteeda ama mayraxdooda asal baa laga sameeyaa, sida Sarmaanta, Xagarka iyo wixii la midka ah.
7. Caleenta geedaha xoolaha iyo ugaadhaa daaqda.
8. Midhahooda iyo xabagtoodana dadkaa cuna oo ku nool. Waana la karsadaa, waana la dugsadaa.
9. Dhirta waa la shitaa. Beeyadaa laga helaa.

Dhulku haddaanu dhir lahayn biyo ma qabsado oo badda iyo webiyaasha ayey ku shubmaan. Haddaanu dhulku biyo qabsan geedo kama soo baxeen, oo wuu nabaad guuri lahaa. Dad iyo duunyo midna kuma noolaan kareen dal abaar ah. Dhulku carro-san haddaanu lahayn, dhir iyo cagaar kama soo baxeen. Haddaan doog jirin naf, dad, duunyo iyo dugaag ma jireen.

Sida la og yahay, laf-dhabarka dhaqaalaha dalku waa xoolaha nool. Biyo iyo baad ayey xooluhu u baahan yihiin, haddii kale way le'anayaan oo anfac ma yeesheen. Ugaadhu dadka iyana waxtar weyn bay u leedahay: Hilibkeedaa la cunaa, saanteedana siyaabo badan baa loo manaafacaadsadaa. Dalxiiska ka yimaadda dhulka shisheeyaha ah ayaa u daawasha yimaada. Ugaadheennu lacag bay dalka soo gelisaa.

Neefleydaas oo dhammi doogga iyo dhirta ka baxa dhulka ayey ku nool yihiin. Sidaas darteed, dhirta dadku jarayo ama gubayo, dhaawac weyn ayey u geysanaysaa dhaqaalaha dalka. Maxaa yeelay, wixii dhulka ka soo baxay ee dad iyo duunyaba ku noolaayeen baa yaraanaya ama gebigood baaba'aya.

Haddaba, qof kasta waxa la farayaa in uu sida naftiisa oo kale u xannaaneeyo dhirta dalkiisa ku taalla. Qof geed bilaasha u gooyey denbi weyn buu galay, saa naf nool buu gooyey. Dawladdu waxay mar walba dadweynaha ka codsataa in hantida dalka si wacan loo dhaqaaleeyo mood iyo noolba.

**LAYLI:**

b) Sheeg saddex walxood oo muhiim ah kana mid ah waxyaalaha dhirta laga sameeyo.

t) Sidee dhirtu wax uga tartaa carro-guurka.

j) Maxay ku kala duwan yihiin meesha dhirta leh iyo meesha aan lahayn?

x) Waa maxay xiriirka ka dhexeeya dhirta iyo xoolaha nool?

kh) Waa maxay xilka kaa saaran dhirta xannaaneynteeda?

## CASHARKA 19aad

### *MAXAY KU NUUGTAA AMA...?*

Waraabe ayaa habar dugaag isugu yeedhay, isaga oo ka dacwoonaya magaca dhurwaa la yidhaahdo. Wuxuu yidhi: "Waar niman yahaw, magacan dhurwaa baan la hodmayee ha la iga daayo".

Habar dugaag baa yidhi: "Oo maxaan kuu bixinnaa?"

Waraabihii baa yidhi: "Saddex magac mid ha la iigu yeedho. Ammaan, Amiin iyo Aamin".

Habar dugaag baa yaabay oo yidhi: "Bal waanu ka soo shooraynaaye waa innoo saa dambe". Waraabihii durba wuxuu isu diyaariyey Aamin oo wuxuu madaxa ku xidhey meedhax cad, isagoo is-miskiininaya, iskana dhigaya Aamin.

Habar dugaag oo hal irmaan wada ayaa soo noqday. Waxay yidhaahdeen: "Magacii aad codsatay waa laguu bixinayaa haddii lagaa arko Aaminnimo. Saddex casho ayaan kugu eegaynaa hashan iyo nirigteeda. Haddii ay nabad-galaan waanu ku caleemo saari oo magacaa dhurwaa markaasaa kuugu dambeysa".

Waraabihii iyo hashii lammaanayd baa la isaga tegey, Waraabihiina wuxuu ballanqaaday in uu nabad-geliyo. Maalintii hore wuu is-adkeeyey, maalintii dambe ayuu intay gaajo qabatay is-yidhi: "Waar maad hasha garoocatid oo meel aan la arki karin in yar oo aad ku gaajo baxdid ka goosatid, beeriba way bogsane". Afartii naas buu goostay maalintii, ballantu ku ekaydna, nirigtii buu faruuryaha goostay.

Habar dugaag oo magac-bixintii u diyaar ah ayaa yimid, iyadoo waraabihii hashii soo xareeyey. Waxay yidhaahdeen: "Aamin, hasha soo godol". "Dubo murush maarush", ayuu yidhi Waraabihii. Nirigtii iyo hashii baa is-jaqi waayey. Illeyn midina way candho la'dahay midina way faruuryo la'dahay. Habar dugaag baa yidhi: "Waar maxay hashu u godlan weyday, nirigtuse maxay u jaqi weyday?".

Waraabihii baa yidhi: "Waar nirigtu maxay ku nuugtaa, maxayse ka nuugtaa?". Halkaas buu ku waayey magacii.

**Sharaxa Ereyada:**

Hodmey: Nacay, karhay.

Shoor: Faq, Tashi.

Garoocatid: Wax yar ka goosatid.

*Maahmaaho:*

1. Caadadii nin ma baajo, bahal ceedhiin ma daayo oo carru waa dhalankii.
2. Nin soori kaa qaadday waa nin seefi kaa qaadday.
3. Hunguri wax ka weyn la mariyaa wuu dillaacaa.

**L A Y L I :**

1. Magaca Aamin muxuu Waraabe u doortay? Magacuse muxuu tilmaamayaa?
2. Tijaabiskii sidee buu uga soo baxay?
3. Muxuu uga jeeday markuu lahaa: "Maxay ku nuugtaa, maxayse ka nuugtaa".

4. Waa maxay dulucda sheekadu?
5. Haddaad fahamtay sheekadan, maxaad ka korodhsatay?

*GOOGGAA:*

Xeradeydu waa wada ul, oo ul la qaato ma laha.

*"Waa geesaha riyaha".*

## CASHARKA 20aad

### *DHIRTA (Geeraar)*

Cali Cilmi Af-yare, wuxuu ku dhashay meel ku aaddan Gobolka Sanaag cidhifkiisa Bari. Intuu dhallinyarada ahaa wuxuu ahaa Hoobal aad ciyaaraha u jecel. Magaalooyinka markuu soo galay wuxuu qayb weyn ka qaatay halgankii gobannimadoonka. Muddo dheer wuxuu gabayaa ugu shaqaynayey, welina ugu shaqeeyaa Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha, halkaasoo dadku aad ugu barteen canna uu ku noqday murti gabayna leh oo ku baahsan wejiyada nolosha. Sababta geeraarkan uu u curiyey iyo ujeeddadiisaba waxa laga garan karaa marka la akhriyo geeraarkan:

*Adigoo dhalandhoolayoo,*
*Dharaartu ay kululaatayoo,*
*Dhafoorkaagiyo jiidhka,*
*Dhididku uu qulqulaayoo,*
*Dhalcaddaad ka gashaayoo,*
*Dhirtu waa nolosheenna.*

**— HADHSI —**

*Qabow dhuuxa laftaadiyo,*
*Dhogortaada dilaayiyo,*
*Dhaxantay kaa celisaayoo,*
*Dhanbaal aad huwanaysiyo,*
*Dhar bay ku noqotaayoo,*
*Dhirtu waa nolosheenna.*

**— H U —**

*Marna dhuuni la quutiyo,*
*Dhuguc aad u bislaadiyo,*
*Midhay kuu dhalayaanoo,*
*Dhibtu kaaga hadhaa, oo*
*Dhirtu waa nolosheenna.*

**— C U N N O —**

*Dhulkoo roobku ka raagayoo,*
*Abaar laysku dhammeeyaa,*
*Dhammeelkoodiyo xaygiyo,*
*Dhiimbiishii ku qabowday,*
*Dhaayinkay bixiyaan baa,*
*Reerku kuu dhacartaayoo,*
*Dhirtu waa nolosheenna.*

**— D A Q A —**

*Dhafkaa hawdkiyo soolka,*
*Hadday dheer tahay ooddu,*
*Dhoolla-weyn libaaxiyo,*
*Dhurwaagii wax cunaayiyo,*
*Dhowrtu soo mari maysoo,*
*Waa dhis aan laga maarminoo,*
*Dhirtu waa nolosheenna.*

**— O O D —**

*Marna dhuub la xiddeeyiyo,*
*Dhigtii laysku maraayiyo,*
*Udub dhiig cas la moodiyo,*
*Dhenged aad u qurxoon iyo,*
*Xabag kuu dhadhamaysiyo,*
*Waxuun baad ka dhurataayoo,*
*Madhax weeye dhitaysanoo,*
*Dhirtu waa nolosheenna.*

**— H O Y —**

*Daawo weeye dhabtiiyoo,*
*Adoo dhaawac ku gaadhay baad,*
*Dheyme soo gurataayoo,*
*Irbadda gaalku dhigaayiyo,*
*Dhakhtarkaa ka wanaagsanoo,*
*Dhirtu waa nolosheenna.*

**— D A W O —**

*Dhoon biyaa lagu qaatiyo,*
*Dhakal aad geela ku maashiyo,*
*Xeedho dhawr lagu sooriyo,*
*Mooyihii dhereraayee,*
*Badarka kuu dhambaalaaliyo,*
*Weel dhan baad ka qorataayoo,*
*Dhirtu waa nolosheenna.*

**— W E E L —**

*Haddii waayo la dhawro oo,*
*Dhuxushaad u gubtaaniyo,*
*Laga dhaafo jarriinka,*
*Kolka aad dhuganaysaa,*
*Dhaayuhu kuugu farxaanoo,*
*Dhirtu waa nolosheenna.*

**— Q U R U X —**

*Dhaxalkeenna dambeetiyo,*
*Dhaqaalaha waddankeenna,*
*Marna yaan lagu dheelin,*
*Dhirtu waa nolosheenna.*

**Sharaxa Ereyada:**

Dhalandhool: Socdaal.

Dhalco: Qorraxda kulul (subaxdii ama galabtii).

Dhogor: Korka qofka.

Dhanbaal: Dermo yar ama gogol yarba.

Dhuguc: Bisayl dhaaf, hoobaan.

Sool: Hawd, oomane.

Dhuub: Maydhax.

Xiddeeyo: La qurxiyo.

Xay: Ubax.

Dhitaysan: Kayd ah.

Dhoon: Haan biyood.

Dhakal: Hadhuub qori ah.

Dhaayo: Indho.

**LAYLI:**

1. Tuducyadee baa tilmaamaya waxay u tarto dhirtu qofka socdaalay oo qorraxdu gubtay, sidee bayse wax ugu tartaa? Sheeg dhawr geed oo la hadhsado.
2. Sheeg dhawr geed oo mirahooda la cuno.
3. b) Sheeg tuduca ka hadlaaya waxay dhirtu ka tarto dhaxanta?

   Sidee bay innooga gargaartaa dhaxanta?
4. t) Sheeg dhirta xabagtooda la cuno, iyo kuwa xabagtooda dibedda loo dhoofiyo?

   j) Sheeg dhirta fooxa laga helo?

   x) Sheeg dhirta waxyaabaha nolosha baadiyaha waxtarka ku leh ee laga qoro (sida fandhaalka, mooyaha iwm).

   kh) Sheeg dhirta lagu dhacarto.
5. Dhirtee baa oodda aad ugu fiican?

   b) Dhirtee maydhaxda laga diirtaa? Maydhaxda maxaa lagu falaa?

   t) Aqallada baadiyaha alaabta lagu dhiso, sida ubadka, dhigta iwm. dhirtee laga helaa?

   j) Dhir badan baa Soomaalidu isku daaweysaa. Kuwaa intaad ka taqaan sheeg?

   x) Dhirta waxtarkeeda badan ka sokow, dhulka maxay ku kordhisaa?

   kh) Dhirtee ubaxa qurxoon bixisa? Keese u jeceshahay? Maxaadse ku jeclaatay?
6. Dhirta cuntada aynnu ka hello ee dalkeenna laga beero sheeg? Mid waliba waxa laga quuto raaci?
7. Dhirta qoryahooda guryaha ama doonyaha iwm, laga sameeyo sheeg? Dalkeenna meelahee bay ka baxaan dhirtaasi?
8. b) Dhuxusha dhirtee laga shitaa?

   t) Dhirta haddii la gubo ama la jaro intay nool yihiin dhibta ka timaaddaa maxay tahay?

   j) Geedna weli ma ku beertay meel dalka ka mid ah?

   x) Xannaano maxay u baahan tahay dhirtu?

9. Gabayaagu wuxuu ka hadlay waxtarka badan ee dhirtu ay u leedahay dadka iyo dalkaba. Ma ku raacsan tahay waxtarka dhirtu leedahay ee uu tilmaamay. Mase waad ku diiddan tahay? Ma kula tahay in uu wax ka tegey? Hadduuse wax ka tegey muxuu yahay?
10. Waxtarka ay dhirtu u leedahay xoolaha kuwa la dhaqdo iyo kuwa kaleba ka hadal.

## CASHARKA 21aad

### *GEELA (Hees)*

Heestanu waxay ka warramaysaa kartida, adkaysiga iyo manaafacaadka geelu leeyahay. Abwaanku wuxuu tilmaamayaa sida geela loogu aayo marka abaari dhacdo oo baad iyo biyoba gabaabsi noqdaan. Wuxuu abwaanku sheegayaa inuu geelu kuu geli karo hanti, deeq iyo gaadiid intaba.

Heesta waxa curiyey abwaanka caanka ah Cabdalla Maxamed, (Cabdalla Sagsaag) oo heesaha allifa kuna luuqeeya.

*Geelaa markuu dararan yahay,*
*Laba nin duugtaaye*
*Geelaa markuu dararan yahay,*
*Laba nin duugtaaye*
*Markay dirirro hooraan,*
*Geeduhu da' joogaan*
*Dala wada irmaan baan,*
*Kugu diidin nirigtoo,*
*Godol debecsanaatee*
*Gabno kuma daryeesho,*
*Marti kuuma deeqdoo,*
*Doobbi lagama buuxshee.*

——— oooOooo ———

*Geelaa markuu dararan yahay,*
*Laba nin duugtaaye*
*Geelaa markuu dararan yahay,*
*Laba nin duugtaaye*

——— oooOooo ———

*Dunidoo ah Jiilaal,*
*Marka ay dameeruhu*
*Ilmahooda diidaan,*
*Isagaa wax daaqaba,*
*Ugu nolol dambeeyee,*
*Diihaalka gaajada,*
*Isagaw dulqaatoo,*
*Abaar kaagama doogee,*
*Geelaa markuu dararan yahay,*
*Laba nin duugtaaye*
*Geelaa markuu dararan yahay,*
*Laba nin duugtaaye.*

——— oooOooo ———

*Haddii gacal is-daystoo,*
*Waa ul iyo diirkeed,*
*Waxse maalin kala dira,*
*Taageero iyo cawl,*
*Waa dayr cadkiisee,*
*Baahi qabiyo geerida,*
*Waxa lagu daweeyaa,*
*Dambarkiisa weeye,*

*Geelaa markuu dararan yahay,*
*Laba nin duugtaaye*
*Geelaa markuu dararan yahay,*
*Laba nin duugtaaye.*

——— oooOooo ———

*Marka doog dhammaadee,*
*Dabeyluhu xagaagiyo,*
*Lo'du dooxa jiiftee,*
*Dadku wada harraadee,*
*Dirgan waaya socodkee,*
*Dalandool dal kaa dheer,*
*Isagaa degdeg u taga.*
*Geelaa markuu dararan yahay,*
*Laba nin duugtaaye*
*Geelaa markuu dararan yahay,*
*Laba nin duugtaaye.*

**Sharaxa Ereyada:**

Diihaal: Diif.

Dirgan waayo: Hollin waayo socodka.

Dalandool: Socod dheer, hayaan.

**LAYLI:**

1. Muxuu Abwaanku uga dan leeyahay "Geelaa markuu dararan yahay laba nin duugtaaye"?
2. Ka soo dhex saar heesta tuducda tilmaameysa adkeysiga Geelu u leeyahay harraadka.
3. "Dalndool dal kaa dheer, isagaa degdeg u taga", sharax tuducyadan.
4. Maxaad ka qabtaa tuducdan ah: "Isagaa wax daaqaba, ugu nolol dambeeya".
5. Ma ku raacsan tahay abwaanka sida uu u ammaanay geela? Waayo? Faahfaahi ra'yigaaga?.

## CASHARKA 22aad

### *WAA WAXAAN KU RAACAY!*

(Ammintu waa duhur dabadii. Madashuna waa makhaayad tuulo ku taal gudaheed. Reer baadiye badan baa fadhiya. Yulqankooda ayaa isu baxaya. Wax tuulada xoolo ka waraabsaday, wax safar ah, iyo wax baadi-doon ahba way isugu jiraan. Geeddi oo ri'dii uu saaka reerkii ka soo qabtay intuu ku iib waayey geed ku soo xiray, oo si u busaaradaysan oo afku jaynafay ayaa soo gelaya. Guuleed oo ay isku degsiimo ahaayee, oo sarar barruur weyn oo geedaysan kolkaa uun la hor dhigay oo birta ula soo baxaya, ayuu isha ku dhufanayaa. Xaggiisii ayuu u soo dhaqaaqayaa. Wuu u imaanayaa, (ag fadhiisanayaa).

*Geeddi: War Guuleed... nabad sow maaha?*

*Guuleed: (Oo hilibkii toorridii ku turturqaya): lays yidhi.*

*Geeddi: Saaka ayaan degsiimadii ka soo bixitimay.*

*Guuleed: (Oo cad barruur weyn afka ku sii wada): dantaada ayaa ku wadday.*

*Geeddi: Degmadiise waa lagu nabad qabay.*

*Guuleed: (Oo canku u buuxo): la ii sheeg.*

*Geeddi: Reerkaaga waan sii maray.*

*Guuleed: (Oo cad jiidh ah iyo barruur isu qaadanaya): marinkaagaa ahaa.*

*Geeddi: Haweeneydaadii xalay bay dhashay.*

*Guuleed: Sidkeedaa ahaa.*

*Geeddi: Way mantaanaysay.*

*Guuleed: (Oo canku u buuxo) sideeday u uur weyneyd.*

*Geeddi: Isla xalayba mantaanihii mid baa dhintay.*

*Guuleed: Wadkii baa galay.*

*Geeddi: Kii kalana saaka ayuu raacay!*

*Guuleed: Meeluu ku hadhuuna garanayn.*

*Geeddi: Birtaadu af badanaa!*

*Guuleed: Waan ku ogaa.*

*Geeddi: (Oo is-hayn la'): Oo cadka aad cunaysaa barruur weynaa!*

*Guuleed: (Oo subaggu labada qawlal ka da'ayo): Waa waxaan ku raacay.*

(Geeddi oo samal-haadsan, Guuleed oo niyadda ka hiifaya ayaa iska kacaya, oo makhaayaddii ka baxaya!).

**Sharaxa Ereyada:**

Madasha (Madal): Meesha, Barta, Goobta.

Ulqan: Buuq.

Basiirad: Basaas, busarad, gashi la'aan.

Jaynaf: Qalal.

Birtu (loo jeedaa): Toorreyda, Mindida.

Turturqaya: Mudmudaya, dulduleelinaya.

Geedaysan: Xawaashaysan.

Sumal-haad: Ku hungow, ku qadid.

**LAYLI:**

Su'aalahan si tifaftiran uga jawaab:

1. Geeddi muxuu Guuleed ka filaayey kolkuu soo ag fadhiisatay?
2. Guuleed "Jawaabaha gaagaaban" ee uu Geeddi u celinaayey maxay ahaayeen?
3. Weedha ah (Meeluu ku hadhuuna garanayn) Guuleed muxuu uga jeedaa?

## CASHARKA 23aad

### *INA XAGAA-DHEERE*

Ina-Xagaa-dheere adhi badan buu lahaan jirey. Dharaar dharaaraha ka mid ah, ayaa cudur ka galay. Markaasuu aad iyo aad adhiga tamootidiisii uga xumaaday. Wuxuu yidhi: "Waxaan yeeli si aan aniga iyo Ilaahay xoolo naga dhaxayn. Wuxuu iigu soo marmarsoodaba ha waayee". Markaasuu hadlay oo yidhi: "Eebbow adhiga qaybtaa adigaa leh. Qaybtaa kalena anaa leh". Haddaba, qaybtaada sidaad doontid dheh, qaybtaydase, faraha iiga qaad oo ha iigu iimaan".

Dabadeedna waxa dhacay, in adhigii uu socday oo maalin kastaba wax ka dhintaan. Ina Xagaa-dheere, mar alla marka adhigiisa neef ka dhintaba, isna adhigii kale intuu u galo, ayuu qaar ka gawracaa oo yidhaahdaa: "Adhi la laayaa adhi loo laayuu leeyahay". Maalin dambe, ayaa roob da'ay. Markaasuu Ina Xagaa-dheere sallax biyo joogaan, intuu jilbaha dhigay is-yidhi ka cab. Dabadeedna sallaxii baa dibnaha kaga dhegay. Muddo dabadeed, ayuu sallaxdii sii daayey. Adhigii baa sidiisii hore isaga le'day. Ina Xagaa-dheere, waxa hal-hayn u noqotay markaa, "Haddaanu hadalno waa af sallax ku dheggeygii, haddaanu aamusnana adhigaa sidaa laga deyn maayo.

**Sharaxa Ereyada:**

1. Tamooti: Dhimasho.
2. Sallax: Dhagax godan.

**L A Y L I :**

1. Adhiga qaybintiisii maxaa ku kallifay?
2. Ina Xagaa-dheere Diinta wax ma ka ogaa?
3. Ma ogaaday in uu qaldan yahay?
4. Wax ma ku qaatay cibaaradii la tusay?
5. Sheekada dulucdeedu waa maxay?

*HAL-XIDHAALE:*

Meesha geelu sannad maro ee aannu sannad labaad mari karin!

*MAAHMAAHO:*

1. Nin Ilaahay ka dambeeyo kabtiis ma yeella.
2. Gowso tuugeed iyo gowso macsiyeed ninba intuu galaa laga gudaa.
3. Nin talo xumi tabaalo ma waayo.

## CASHARKA 24aad

### *WAARI MAYSIDEE WAR HA KAA HADHO (Hees)*

Heestan ku hal-qabsatay maahmaahdan la yaabka leh, waxay dib ugu noqonaysaa taariikhda Soomaaliyeed iyo dadkii geesiyada ahaa ee naftooda iyo hantidooda u soo huray dalkooda.

Abwaanku isagoo dad badan tusaale u soo qaadaya sida ay naftoodii macaanayd ugu waayeen xoreynta dalkooda, ayuu leeyahay waxay geesiyaashaasi gudanayeen waajibkii ka saarnaa dalkooda, sidaas oo kale ayaa laga filaayaa qof kasta oo Soomaaliyeed in uu tusmo raaco. Heestan waxa tiriyey Xasan Cabdi Nuur oo ku dhashay Qardho sannadkii 1954kii.

*Waayadii horreytiyo,*
*Wakhtigii la soo maray,*
*Kuwaan waabanaynoo,*
*Wadka u badheedhoo,*
*Gurey weerarkiisiyo,*
*Sayidkii u weynaa,*
*Waxay gudanayeen waa,*
*Dalka waajibkiisee,*
*Kolna waari maysaan,*
*Walaalaha Soomaalaay,*
*Waddanka u dhintaay,*
*War ha idiin hadhee.*

——— oooOooo ———

*Xalanaba Wajaaluu,*
*Ku wareemay cadawgoo,*
*Wadnahana ku gooyee,*
*Dhagaxtuurna waagii,*
*Waaxdii haweenkaa,*
*Xaawo lagu warmeeyee,*
*Waxay gudanayeen waa,*
*Dalka waajibkiisee,*
*Kolna waari maysaan,*
*Walaalaha Soomaalaay,*
*Waddanka u dhintaay,*
*War ha idiin hadhee.*

——— oooOooo ———

*Guutadii wahaabiga,*
*Gumeystaha warjeeftaa,*
*Weyne guusha siiyee,*
*Wiiradii xumaydna,*
*Kuma waarin ciiddoo,*
*Saxalkii wareegyee,*
*Kolna waari maysaan,*
*Walaalaha Soomaalaay,*
*Waddanka u dhintaay,*
*War ha idiin hadhee.*

**Sharaxa Ereyada:**

Saxal: Xilliga xun.

Wiiro: Uur xumo.

Warjeef: Gumaad.

**LAYLI:**

1. Muxuu abwaanku ka rabaa wakhtigaa hore ee la soo dhaafay?
2. Maxayse ahaayeen Gurey iyo Sayidka uu abwaanku magacaabay?
3. Maxay guteen oo dalka waajibkiisa ahaa?
4. Muxuu uga dan leeyahay abwaanku: "Kolna waari maysaan, walaalaha Soomaalaay, Waddanka u dhintaay, war ha idiin hadhee"?
5. Xalane muxuu dalka u soo galay, muxuuse cadowgu u wareemay?
6. Muxuu Dhagaxtuur inna xusuusinayaa?
7. Dagaalka Xaawo ku dhimatay halkuu ka dhacay? Goor muuse dhacay?
8. "Weyne guusha siiyee" waa ayo dadka uu tilmaamayo abwaanku?
9. Ayuu heesaagu u tilmaamayaa saxalka? Waayo?
10. Ma ka mid ahayd dadka Abwaanku la hadlayo? Maxaa kaaga habboon dalkaaga iyo dadkaaga?

## CASHARKA 25aad

### *WARSHADDA DHARKA (Curis)*

Warshadda Dharku, waxay ku taallaa magaalada Balcad, waxana la dhisay 1966kii. Warshadda Dharku waxay samaysaa kaaki mareekan ah, bafto, marbuuc iyo dhar kale oo midabyo qurxoon leh oo kala duwan. Warshadda waxa ka shaqeeya boqollaal qof oo shaqaale ah iyo farsamayaqaanno Soomaali ah oo aqoon u leh sida dharka loo sameeyo. Warshadda Dharku waxay wax ka tartay dhibaatadii dadka Soomaaliyeed ka haysatay shaqo la'aanta.

Warshadda Dharku waxay ku taallaa Webi Shabeelle agtiisa, shaqaalaheeduna meel u dhow ayuu deggan yahay. Cudbiga dalkeenna ka baxa oo idil waxa la geeyaa Warshadda Dharka. Warshaddu cudbiga waxay ka iibsataa beeraleyda. Cudbiga marka la feedho kaddib ayaa la miiqaa.

21kii Oktoobar, markii Kacaanku ka dhashay dalkeenna kaddib, waxyaalo badan ayaa iska beddelay Warshadda. Kacaanku wuxuu kor u qaaday nolosha shaqaalaha iyo Warshadda maamulkeeda. Warshadda Dharka waxaa lagu tiriyaa in ay ka mid tahay warshadaha dalka Soomaaliyeed ugu waaweyn. Wixii ka soo baxa warshadda waxaa lagu isticmaalaa baahida gudaha. Reer miyigeennu wuxuu dharka ka qaataa Warshadda Dharka. 1971kii Warshaddu waxay soo saartay lix milyan oo yaardi oo dhar ah. Warshadda Dharku waxay ka qayb gashay horukaca dalkeenna. Iyadu waxay dharka u dirtaa Wakaaladaha Ganacsiga ee dawladda. Wakaaladuhuna waxay u kala diraan dharka Warshaddu soo saarto gobollada iyo degmooyinka dalka.

Dawladda Kacaanka ahi, waxay ku talo jirtaa in Warshadda Dharka la sii wanaajiyo oo la sii cusboonaysiiyo, si ay hawsheeda si wacan ugu gudato iyo sidii aan uga kaaftoomi lahayn dharka aynu dibedda ka soo iibsanayno.

**LAYLI:**

1. Xaggee bay Warshadda Dharku ka dhisan tahay?
2. Maxaa Warshadda looga dhisay Webiga agtiisa?
3. Qaybtee bay ka qaadataa horumarka dalka Warshaddu?
4. Maxay tahay himilada dawladdu ka leedahay dhismaha Warshadda?

*MAAHMAAHO:*

1. Xaglo laaban xoolo kuma yimaadaan.
2. Dhib dabadii bay dheefi timaadaa.
3. Xoogsadaa xalaal quuta.
4. Dan iyo xarrago is-weyday.

Maahmaahda kor ku qoran laba ka mid ah si buuxda u sharax.

## CASHARKA 26aad

### *CADKA RAG ISKU RAACO*

Wiilwaal, oo ahaa nin kulul oo abbaanduule ah, ayaa wax ka tijaabo badnaa. Maalin ayuu kooxdii uu madaxda ka ahaa isugu yeedhay oo yidhi: "Berri hadday ahaato waxa aan nin walba ka rabaa in uu keeno cadka rag walaaleeya ama isku dira". Kooxdii oo qof waliba dhiniciisa u yaabban yahay ayaa kala dareeray, iyaga oo ka fekereya cadkaa. Markii ay guryihii tageen ayaa nin waliba neefkii xerada ka dhaqaaqayey gawracay, oo cadkuu shirka la tegi lahaa meel dhigay.

Oday ragga ka mid ahaa ayaa reerkiisii oo iska xoolo yarow ahaa warkii u sheegay, isagoo la yaabban cadkaa oo leh, "Maantuu u darnaa oo uu hilbaha nagu raray". Gabadh xilo qabad ah oo uu odaygu dhalay ayaa hadalkii maqashay, dabadeed intay odaygii u tagtay bay tidhi, "Ee anaa cadkaa garanayee waxaad qashaan rideenna Caddo Wadhac" oo ahayd ri'dii adhiga u liidatay. Odaygii baa gabadhii maagay oo yidhi: "Buus, naa meesha ha igu ceebayn ee ka u roon soo qabo oo cadka u fiican meel dhig (awlalka)". Gabadhii baa tidhi: "Aabbe aniga ceebtii ka timaadda madaxa ii saar, oo haddii lagu weydiiyana anigaa ka jawaabi, ridaanna soo qabta". Gabadhii ri'dii bay soo qabatay, markii la qalayna waxay soo goysay cadka HUNGURIGA la yidhaahdo; markaasay aroortii odayga ku tidhi: "Waa kaa cadka lagaa rabay". Odaygii baa intuu dhabannada qabsaday yidhi: "Naa maandhe meesha ha igu dilin, anigu Wiilwaal waxan la hor tegi maayee cad fiican keen, (lug, awlal ama jeeni)". Gabadhii baa tidhi: "Aabbe Wiilwaal cad uu cuno uma baahnee ujeedduu ka leeyahay". Yartii oo gabadh dhabeel fiican ahayd waxay ku qasabtay aabbaheed cadkii Hunguriga ahaa.

Markii waagii beryey ee xoolihii la sii kala daayey ayaa odaygii cadkii qaaday, isagoo sii qarinaya, ayuu meeshii lagu ballamay la tegey. Wiilwaal oo afka taagaya ayaa yimid oo xeedho weyn oo madhan lala daba socdo. Markaasuu yidhi: "Nin walowba cadkii aad sidday intaad kor u qaaddo i tus oo xeedhadan ku rid". Nin waliba cadkii uu siday ayuu kor u taagay oo halkii lagu amray ku riday, waxaanay ahaayeen hilbihii ugu fiicnaa adhigii ay ku tadcaarteen. Hase yeeshee, odaygii isagoo qarinaya cadkii uu siday ayuu xeedhadii dubuq ku siiyey, oo ka soo dhaqaaqay. Wiilwaal oo nin waliba wuxuu dhigay eegayey baa arkay cadkii odaygu keenay, markaasuu u yeedhay oo ku yidhi: "Maxaad dadka u tusi weyday waxaad keentay?". Odaygii baa yidhi, "Mid yar oo bahal qaaday baa igu soo rartay waxaas oo waan muujin kari waayey". Dadkii oo yaabsan waxay ku wada hadlaayeen baa Wiilwaal odaygii ku yidhi: "Waar indhaha lagaa tuurye, cadka tus dadka". Odaygii oo amakaagsan oo is-leh maantaad u socotay aakhiro, ayaa cadkii sare u qaaday isagoo aan hadlin.

Shirweynihii ayaa jaanta rogay oo odaygii ku fooriyey oo yidhi, Allaha u naxariisto, maantaa la dilayaa, abbaanduulihii buu waxaa hor keenay". Markii qayladii dantay baa Wiilwaal yidhi: "Gabadhii hadda ii keen". Markii odaygii socday, ayaa Wiilwaal raggii ku yidhi: "Dhammaantiin waxa idin dhaanta gabadhaa odaygu dhalay". Cadka rag walaaleeya ama kala dilaana waa cadkaa inantaa yari u soo dhiibtay odayga; idinna waad ku qoslaysaan. Caawaan guursanayaa; aqal ha lay dhiso mar dhow. Odaygii wuxuu gurigii tegey isagoo murugo cagaha la jiidaya, markaasuu gabadhii ku yidhi: "Naa meel laguu kaxeeye, adna is-dishay anna i galfatay, oo ninkii Wiilwaal ahaa wuu ku doonayaa". Gabadhii oo aan waxba is-gelin ayaa tidhi: "Inna wadi waxba dhici maayaane". Iyagoo wada socda oo ay odaygii cadkii ka dhaadhicinayso ayey Wiilwaal u yimaadeen.

Wiilwaal: Naa maadaa cadkii soo dhiibay?

Gabadhii: Haa.

Wiilwaal: Oo maxaad cadka xun u soo dhiibtay?

Gabadhii: Oo ma mid aad cuntaad rabtay, mise ujeeddaad ka lahayd. Waxaan filayaa inaad ujeeddo ka lahayd; cad kale oo rag isu geeyaa ama ay isku afgartaan ma jiro.

Wiilwaal baa odaygii ku jeestay oo yidhi, gabadhanu adiga iyo intii kale ee meeshan isugu timidba ka fiican. Hadda ku raaci mayso oo waan guursanayaaye ii hibee. Odaygii oo faraxsan baa yidhi: "Waan kuu hibeeyey". Halkii baanu habeenkii laftiisii kula aqal galay.

Wiilwaal oo sidii aan hore u soo sheegnay ah nin tijaabo badan ayaa gabadhii habeenkii uu la aqal galayba tijaabo ku bilaabay oo yidhi: "Gabadh-yahay dhegeyso, waa inaad salaadda hore foolataa oo barqada dhashaa". Gabadhu intee bay gurigiisa joogtay? Gabadhii baa tidhi: "Waa yahay, laakiin, yaanan isku dhimanine iga war hay". Wiilwaal: "Waa hagaag".

Hirtii (Salaaddii — aroortii) markay ahayd ayaa gabadhii fooli qabatay oo marba gees isku rogtay oo qaylisay, dumarkii baa isugu soo ururey oo yaabay, markaasay gabadhii ku yidhaahdeen: "Naa maxaa ku haya?". Gabadhii: "Fool baa i haysa ee i qabta". Illayn waa xaaskii Wiilwaale, hadalba laguma celin, ee waa la qabtay oo marba gees loo rogey. Gabadhii baa tidhi: "Naa wax baan jantaye (calmaday — rabaa) Wiilwaal iigu yeedha." Dumarkii baa abbaanduulihii cid u diray oo yidhi gabadhii wax bay jamataye dhakhso u soo gaadh ayey isku bakhtiyini. (Ha moogaan maahmaahdii Soomaaliyeed ee ahayd, yaan walacina ku xoolo tirin, jamadna ku carruur tirin".

Wiilwaal oo ordaya baa yimid markaasay gabadhii tidhi, "waxaan jantay degdeg ha la iigu keeno, haddii kale fool igama suurtowdo".

Wiilwaal: "Waa la keenayaaye maxaad jamatay?". Gabdhihii (oo la wada maqlayo): "Waxaan jantay wan xalay dhashay subag madoobihii, iyo nirig gu' dhal ah danbarkeed". Wiilwaal baa afka kala qaaday, yaab awgii oo yidhi: "Naa waad waalan tahay; oo xaggay ka suurtoobaysaa nirig gu' jira danbarkeed iyo wan xalay dhashay subaggii". Gabadhii baa tidhi: "Oo haddaa siday u suurtoobi kartaa caawa uurayso oo fool dhal".

Wiilwaal baa u garaabay gabadhii oo halkii ku ogaaday in ay naago dhaaf tahay oo yidhi: "Alleylehe midina ma suurtowdo". Wiilwaal intuu dadkii meesha joogay la hadlay ayuu hadalkiisii ku soo xidhay: "Dhabeel iyo naag dhaliil leh dhab loo wada dheehan maayo".

**LAYLI:**

1. Wiilwaal muxuu dadkiisa waxyaabahaas oo kale ugu dhjibayey?
2. Wiilwaal sheekadan yaa ka shan iyo tobanaysiiyey?
3. Micnee: "Dhabeel iyo naag dhaliil leh dhab loo wada dheehan maayo".
4. Sheeg dulucda sheekadan.

*HALXIDHAALE:*

1. Sheeg meesha neefka nirigga ahi hooyadii uga weyn yahay?

*MAAHMAAHO:*

1. Hadal nin si u yidhi, ninna si u qaaday.
2. Ilaahow eexna ha nagaga tegin, aqoonna ha nagu cadaabin.
3. Naag kas ha lahaato, kartina ha lahaato.
4. Ayaanley aqal ma weydo.

## CASHARKA 27aad

### *DHALLINYARADA (Gabay)*

Gabaygan soo socda waxa curiyey gabayaaga weyn ee caanka ah, Xaaji Aadan (Af-qallooc). Wuxuu ka hadlayaa waqtigu xilka weyn ee uu garbaha u saaray dhallinyarada Soomaaliyeed, iyadoo odayaashii dalka xilka u hayn jirey gabow iyo waqtiga isbeddelkiisa arrimaha ka dhashay awgood aan maanta iyaga waxtar magac leh laga filayn. Gaar ahaan wuxuu ku guubaabinayaa dhismaha, dhaqaalaha, waxbarashada, shaqada, waajibaadka ka saaran wadajirka, iskaashiga, siyaasadda iyo u dadaalka iyo feejignaanta horumarka ummadda Soomaaliyeed, ay ku talo jirto una hanqal taagayso.

*Hadduu geed engego xaabadaa, lagu idleystaaye*
*Mid yar oo iniintiisa ah baa, soo awaal baxa e*
*Isagaa anfaaciga hadhkiyo, oodda kaafiya e*
*Dadkana odaygu goortuu ka baxo, iyo islaantiisu*
*Ubadkooda hadha baa tabcoo, aayatiin hela e*
*Markii Aadan iyo Xaawo iyo, kaynta la abuuray*
*Sidaasay arwaaxdiyo dhirtuba, ku isirraayeene*
*Ummaddaan shabaabkeedu hanan waw ayaan xumo e*
*Innamiyo hablaba waxa tihiin, aaranka kacaye*
*Itaal gabe dadkiinnii horoo, waydiin aragtaane*
*Idinkaa ammaanada xilkii, eeggan qaabbiliye*
*Iskaa wax-u-qabsadu noloshu waw, udub dhexaadkiiye*
*Israafkiyo fadhigu waa waxaad, ku ambanaysaane*
*Axmaqnimo waqtiga kaaga tegey, oohin kugu reebye*
*Ayaantii ku dhaaftana waa, waxaan la eegayne*
*Arsaaq yaridu waa caajiskaan, la oggolayn hawle*
*Ma amdaro cirkuye lacagta waa, lagu adeegaaye*
*Axadkii kaslaan ihi sabool, abidki weeyaane*
*Rabbi nimuu laxaadka u ebyey oo, camal awood waayey*
*Oo aan shaqo naftiisa u oggolayn, waa abaal dhacaye*
*Istiqlaalka waxa taam ka dhiga, waa adduunyada e*
*Mar haddii dhaqaaluhu aakhiro, calanku uumowye*
*Kolkaasuu amaahiyo baryaha, aradku doonaaye*
*Icaanaduna xornimaday u tahay, eebadii melege*
*Albaabkuu gumeystuhu ku xado, umamka weeyaane*
*Wixii uu ajnabi kuu qabtana, aayatiin ma laha e*
*Isku tiirsi baydiin eg iyo, ururin xoolaade*
*Ictasima Islamkaa la yidhi, gebi ahaantoode*
*Aayadaha Diintiyo sharcigu, waynagu amreene*
*Axaadiista Nebigay ku timid, saad ku aragtaane*
*Ikhtilaafku waa naar jannana, waa isu-imade*
*Ragannimo nimaan tacab ku arag, aayar heli waaye*
*Ijtihaada gobannimo dhib baa, lagu ilaashaaye.*

**Sharaxa Ereyada:**

Engago: Qallalo.

Israaf: Marka si xun xoolaha loo isticmaalo.

Ku isirraayeen: Soo ahaan jireen.

Kaslaan: Caajis, ma shaqayste ah.

Sabool: Faqiir.

U ebyey: Dhammaaday.

Malege: Mowdkii dilay.

Ictasima: Cuskada oo midooba.

**L A Y L I :**

1. Gabaygan yaa curiyey?
2. Tuduca 1, 2, iyo 3 dhirta yaryar kaalinta kuwa gaboobay ka baxeen sidee bay waxtarkii ay lahaayeen uga soo baxeen?
3. Sheeg tuducyada muujinaya in sida dhirtuba kaalinta kuwa engagay ka baxeen kuwa kale u buuxiyaan kaalintaa halkaana ka sii wadaan dheeftii iyo waxtarkii laga heli jirey, dadkuna kala mid yihiin.
4. Qor tuducyada gabayaagu dhallinyarada kagala hadlayo xilka la gudboon dabadeed duqaydii markay taag-darraysay?
5. Tuducee baa muujinaya guuldarrada iyo urugada uu leeyahay waqtiga lagu lumiyo wareegga, joog-joog xumada iyo macna-darrada.
6. Dan la'aan oo meel laysaga fadhiyo iyo israafka cidhibtoodu waa maxay sida gabaygu leeyahay?
7. Kaslaannimadu ayaan-darraday soo hoyso ka hadal.
8. Xumaantay leedahay foqorku wax ka sheeg.? Tuducee baa muujinaya saboolnimada iyo foqorka waxa keena?

## CASHARKA 28aad

### *MIDAB GUMEYSI DIIDA (Hees)*

Heestan la yidhaahdo "Midab Gumeysi Diida", waxay si aqoon iyo waxgarad ah inoo tusaysaa dhibaatooyinka iyo foolxumada uu gumeystuhu dalal ka mid ah qaaradda Afrika kula kaco. Wuxuu abwaanku uga digayaa dalalka xornimada jecel xeeladaha cusub ee doqoni-ma-garatada ah ee uu mar labaad rabo in uu gumeystuhu ku dago Afrika. Heesta waxa curiyey abwaanka weyn Maxamuud Cabdullaahi Sangub, oo ku dhashay Dhagaxbuur sannadkii 1947kii. Maxamuud wuxuu ka mid yahay abwaannada waaweyn ee Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha.

*Yaan Ismiidh ma muuqdeen,*
*Roodhiisiya ma maageen*
*Haddaan midig la siinin*
*Boortuqiis ma madhiyeen,*
*Mana uu maleysteen,*
*Moosambiig, Angoola.*
*Mindiyihii qarsoonaa,*
*Gini lagu miraayey,*
*Sowt Afrika ma moogin.*
*Hadal iyo murtina waa,*
*Afrikay is-maqaloo*
*Midab gumeysi diida, diida, diida.*

———oooOooo———

*Dadka oo midooboo,*
*Dunidii masowdiyo*
*Nabad lagama maarmo,*
*Maalintay xumaatee,*
*Ragga aydin murantaan,*
*Waranku waa macaan yahay*
*Madowgaaga kaan rabin,*
*Muuqaaga kii neceb,*
*Kiisana ha meel marin*
*Hadal iyo murtina waa,*
*Afrikaay is-maqaloo*
*Midab gumeysi diida, diida, diida.*

———oooOooo———

*Haddii aan maskaxi talin,*
*Dhegta maqal xumaha jira,*
*Indhuhuu maalin aragtida,*
*Laguu hawsha maamulin,*
*Gacmuhuna wax kuu qaban*
*Midabkuba sad weeye,*
*Magacuba dan weeye,*
*Murtidu dhaxalgal weeye*
*Hadal iyo murtina waa,*
*Afrikaay is-maqaloo,*
*Midab gumeysi diida, diida, diida.*

———oooOooo———

*Madaxdii Afrikaay,*
*Mabda'ii gumeysigu,*
*Magacood ba'e wuxuu yahay*
*Wanka macasha ii qabo*
*Adiguna gawrac ii mari,*
*Dhiiggana aan muudsado*
*Jidkii aad ku madhateen,*
*Maya haddaad tidhaahdaan,*
*Ma afkaa maroorsami,*
*Hadal iyo murtina waa,*
*Afrikaay is-maqaloo*
*Midab gumeysi diida, diida, diida.*

**LAYLI:**

1. Muxuu Abwaanku u magacaabay Yaan Ismiidh?
2. Maxaa ka dhexeeya oo isu keenay Boortuqiis, Musambiig, iyo Angoola.
3. Miyaa la gumeystaa, muxuu abwaanku u carrabaabay Koonfur Afrika?
4. Waa maxay midab-gumeysiga uu abwaanku sheegayo? Yaana sameeyey
5. Muxuu kaa mudan yahay qofkii yasa midabkaaga?
6. Maxay tahay tuducyadan:—

   "Wanka macasha ii qabo; Adigu gawrac ii mari; Dhiiggana aan muudsado".
7. Muxuu abwaanku Afrika ugu baaqayaa?
8. Dalalka uu abwaanku u baaqayaa dhaqdhaqaaqoodii iyo halgankoodii ma ku guuleysteen?
9. Sheeg xiriirka ka dhexeeya heesta iyo maahmaahda Soomaaliyeed ee ah: "Nin waliba sida uu kuugu liso ayaa loogu hambeeyaa".

# CASHARKA 29aad

## *DUMAROW AQOON (Gabay)*

*Allahayow markaad damacday, Xaawo inaad uunto,*
*Ee inay adduunayada anfaci, ifka u keenaysay,*
*Eeggiyo ayaantaa maxaa, dumar la iimeeyey!*
*Immisaa sidii adhi dammaan, iibsi loo xulayey.*
*Immisaa sidii ayro-geel, oodda lagu gooyey,*
*Ahe! Arraweelo oo kale miyaan, maanta la arkaynin,*
*Inkastoo Kacaankii anfacay, idil dadkeenniiba,*
*Inkastoo sinnaan laga eg yahay, saaka la arkaayo,*
*Inkastoo Ururkii Bulshada, dumarkii loo oogay,*
*In yaroo iskuullada gashoo, unugga mooyaane,*
*Ma aflaxin kuwii aan lahaa, iinta way tiriye,*
*Abbaartoodii may marin intay, dunida eegeene,*
*Asaaggood kuwaa liido ee, lagu ilroonaado,*
*Iyo kuwaan awood runa lahayn, laga aqoon waaye,*
*Dumarow aqoon baro intaad, adeegga soo dhaafto.*

**Sharaxa Ereyada:**

Uunto: Abuurto.

Adhi dammaan: Adhiga iibka loo soo xulo.

Ayro: Hasha geela ah ee fiican.

Asaaggood: Aynigood, filkood.

Il-roonaado: Gacan sarreeyo.

Laga ajoon waaye: La tixgelin waaye.

*Su'aalo: Goobaab-gelin jawaabta saxa ah:*

1. Berigii hore dumarku;
   b) Sida xoolaha baa loola dhaqmi jirey;
   t) Sida adhiga baa loola dhaqmi jirey;
   j) Sida geela baa loola dhaqmi jirey;
1. Kacaanka hortii;
   b) Ragga iyo haweenku waa sinnaayeen;
   t) Raggaa haweenka ka sarreeyey;
   j) Haweenkaa ragga ka sarreeyey;
3. Haweenka Soomaaliyeed;
   b) Kaalintooda may garan;
   t) Koox yar oo wax baratay ayaa abbaartoodii garatay;
   j) Kulligood abbaartooda way garteen;
4. Waxa laysku dhaafaa waa:
   b) Aqoon iyo af-miinshaarnimo;
   t) Aqoon iyo indha-garad;

j) Aqoon iyo awood;

5. Gabayaagu waxay haweenka ku dhiirrinaysaa;

   b) In ay guriga fadhiyaan;

   t) In ay ragga ka gacan sarreeyaan;

   j) In ay wax bartaan.

## CASHARKA 30aad

### *DHEGDHEER (Sheeko)*

Dhegdheer waxay ahayd dad-qalato aad looga baqi jirey, oo ku noolaan jirtey boholaha Xargaga la yidhaahdo oo Laascaanood u dhow. Meeshaa waa laga qaxay, iyada oy sabab u ahayd abaar ku sinnayd intii ay meesha hoyga ka samaysatay iyo cabsi ka dhalatay.

Dheegdheer, dheg aad u dheer oo ay lahayd darteed, bay magaca kula baxday, wax aad u dhega waddan bayna ahayd. Laba haamood, mid hilibka ay ku ridato iyo mid biyood bay lahayd. Bawda haanta hilbood meel ay joogtaba way maqli jirtey, xitaa hadday ay sardho ku jirtana, dhegta dheer oo hoos u dhacda baa lagu garan jirey in ay huruddo.

Dhegdheer oo sida dabaylaha u duusha baa maalin naag ilmo xambaarsan oy eryanaysay ka gudubtay boholaha Xargagan oo ahaa waxa qudha ee wadnaha u galay. Calaacal iyo baroor bay boholaha qarkoodii isla taagtay.

*Hoh iyo boholaha Xargagan*
*Nin xiimayey xidhaan*
*Nin duulaayey dabraan*
*Bal naagtaa badhida daya*
*Bal bawdyo caddaanta daya.*

Gabadh ay dhashay baa aad u necbayd waxa ay ku kacaysay, in badanna ka tuugaysay in ay mar uun u badbaadiso qof yar oo ay weheshato, dhegse uma dhigi jirin.

Laba gabdhood oo ambada baa Ina-dhegdheer oo keligeed guriga joogta u yimid — "Amarkii Ilaahay waqtigu waa wax kaa adage, nin ambaday halkuu aaday waa ula ekooneyd".

Inantii oo ka calool go'day in ay la noolaato hooyadeed baa ka tuugtay hablihii in ay la joogaan ama kaxeeyaanba. Waxay ugu jawaabeen, iyaga oo ogaaday khatarta meeshu ku sugan tahay, "Haddaan kula joogno hooyadaa baa na qalan, haddaad na raacdidna way na soo raadin; dhexdayna innagu soo gaadhi oo ka daran".

"Haddaba, ila dila hooyaday" inantii baa tidhi, "Sidee baanu u dilnaa", hablihii baa weydiiyey, iyagoo cabsidii ku sii weynaatay. "Hadda waan idin qarinayaa, caawa markay seexato ee ay dhegta dheeri hoos u dhacdo baynu madanayaal dab leh ku gubi doonnaa". Wayna kaga dhabeeyeen, oo halkaas bay ku dhimatay Dhegdheer, dhibaatadiina lagaga raystay. Eebbana dhulkii raxmad mariyey oy farxad heleen:

*Dhegdheer dhimatoo dhulkii nabad.*

*Xargaga roob baa ka da'ay.*

*Dadow soo doogsin raac.*

**Sharaxa Ereyada:**

Waddan: Fiiqan, furan, maqal wacan.

Bawda: Sanqadha ka dhalata marka haanta daboolka laga qaado.

**LAYLI:**

1. Buti, orgobe, dadqal, dad-qalato, madax-kuti, qoryo-ismaris, caws iyo biyo ku nool, iyo xadhigluhu wax jira ma yihiin?
2. "Dhegdheer" magacu ma astaan buu u ahaa, mise dhege waddanaan?
3. Boholaha Xargaga waa gobolkee?
4. Dulucda sheekadu waa maxay?

*MAAHMAAHO:*

1. Haddaad xoog weydid xeelad ma weydid.
2. Nimaad dhashay kuma dhalin.
3. Nin kula yaal baa tabtaada yaqaan.
4. Ilko wadajir bay wax ku gooyaan.
5. Arrin adaa ku nool ee iyadu kuguma noola.

*HALXIDHAALE:*

Fardo guul ma hor baa loo wadaa mise dhib.!!!!

—oooOooo—

## CASHARKA 31aad

### *HOOYO (Hees)*

Heestan waxa tiriyey Axmed Nuur Yuusuf oo ku dhashay Baargaal sannadkii 1938kii. Axmed oo Bare ahi wuxuu ka mid yahay abwaannada waaweyn ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta. Heesta wuxuu abwaanku innoogu tilmaamayaa wanaagga Hooyada.

*Hooyooy waxaad tahay,*
*Hawlaha adduunyada,*
*Midda hanata badidood,*
*Hadadlada kalgacallada,*
*Hibada Eebbe siiyee*
*Hiddaha iyo dhaqanka,*
*Midda haysa xeerkoo*
*Dugsi lagu hirtaayoo,*
*Dadnimada habeeyoo*
*Hanankeeda noloshaba,*
*Midda laga hal raacoo*
*Ummaduhu higsanayaan.*
*Hooyooy ma liicdooy,*
*Hanuunisooy habbooney,*
*Loo wada hiloobay,*

———oooOooo———

*Hooyooy waxad tahay,*
*Hogoshii adduunkoo*
*Noloshaba hirgelisee,*
*Hambalyada carruurta*
*Marka aad u heestaa,*
*Hibataa naftaydoo*
*Hooyo kugu farxaayo.*

———oooOooo———

*Hooyooy waxad tahay,*
*Geesiga halyeyga ah*
*Midda hanaddo koriso,*
*Ragga kala hormarisoo,*
*Hoygeedu deeqoo*
*Hadhow lagu tilmaamoo,*
*Ku hirtaan Quruumuhu.*

———oooOooo———

*Hablo sidii hibaaq baxay,*
*Ubaxna la haybad ah*
*Meel dhaliila laga helin,*
*Midda hooyo haysoo*
*Habtayoo wax siisoo,*
*Hooyada u noqotee.*

———oooOooo———

*Hooyooy calooshaad,*
*Bilahaa sagaalka ah*
*Igu haysay gacalooy,*

*Immisaan harraatiyey*
*Fidhayoon hirdinaayoon*
*Hooyooy dhalashadeydii*
*Immisaad hafeefiyo*
*Heegado xanuun iyo*
*Soo mudatay hawl badan*
*Immisaan horaaddada*
*Ku hafsiiyey ñigoo*
*Hagardaamadaydaa*
*Hihna aadan odhanoo*
*Habeenkoo la seexdana*
*Waxaad la hurdi waydaa*
*Halka aan ka sheegtiyo*
*Hawlahayga weeye.*

———oooOooo———

*Hangaleyladaydiyo*
*Ku habeendintaydii*
*Kama aad hawoon jirin*
*Hooyooy abaalkaa*
*Lama heli karaayee*
*Sidaan kugu tilmaamay*
*Ha jirto ha joogto.*

**Sharaxa Ereyada:**

Hagardaamo: Waxyeello.

Heedadow: Liicliic.

Hangalayladaydiyo: Saxaradaydiyo.

Habeed: Kaadi.

Kama hawoon jirin: Kama kibri jirin.

**L A Y L I :**

1. Sidee bay u noqotay hawlaha adduunyada mid hanata badidooda?
2. Waxyaalihii ay kugu soo barbaarisay hooyadu markii aad yarayd maxaa ka mid ah?
3. Eedaadka iyo dhibta hooyo kaa soo martay maxaa ka mid ah?
4. Muxuu abwaanku ugu tilmaamay hooyada hanuuniso?
5. Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa "Qof waliba waa hooyadii". Maxaa loola jeedaa?
6. Hooyada ma u adeegaysaa oo ma u dhega-nugushahay?
7. Ma taqaan heesaha hooyadu ku koolkooliso carruurta?
8. Waa maxay waajibka kaa saaran waalidkaa?
9. Ka sheekee sidii ay hooyo kuu xannaanaysay markii aad yarayd?

## CASHARKA 32aad

### *HAWL IYO HANTIWADAAG (Gabay)*

Gabaygan waxa tiriyey Cabdulqaadir Xirsi "Yamyam", taariikhdu markay ahayd 6dii Agoosto 1974kii.

*Wax waliba murtay leeyihiin, lagu macneeyaaye*
*Marka roob ku da'o meel cidla ah, milayga jiilaalka*
*Xidid buu mutaa geedka baxay, maalmo dabadeede*
*Milic buu u baahdaa dugsina, wuu mitimiyaaye*
*Kama maarmo mooskiyo biyaha, ciiddu waa malabe*
*Neecaw macaan iyo hawadu, waa midduu rabaye*
*Marka uu intaa helo ayuu, muuqan karaayaaye*
*Magool iyo markaasuu man iyo, mirana yeeshaaye*
*Dabadeedna waa loo muhdaa, laga macaashaaye*
*Waxa la mid ah mabda'a Hawlwadaag, mudashadiisiiye*
*Marka hore sinnaan iyo cadlaa, lagu muquunshaaye*
*Muruqiyo laxaad wada socdoo, meel u wada jeeda*
*Maskax iyo aqoon daacadoon, maagasho aqoonin*
*Miyir iyo kartuu doonayaa, lagu midoobaaye*
*Marka uu iskaashado ra'yiga, mirana soo saaro*
*Ayaa lagu abaal marin karaa, nin iyo wiilkiise*
*Nin waliba wixii uu mutaa, meeris leeyahaye*
*Mataanaha is-raacaa ka adag, sida aad mooddeene*
*Waxay labadu maamuli karaan, midigta haw daynina.*

**Sharaxa Ereyada:**

Milay: Araxda jiilaalka.

Mitimiyaaye: U baadhaaye.

Magaasho: Hakasho.

**LAYLI:**

1. Ereyadan gabayga laga soo soocay macnahooda sug: Mataano, moos, magool, man, loo muhdaa, mudashadiisiiye.
2. Gabayaagu wuxuu ku tilmaamayaa tuducyada hore ee gabayga waxyaabaha ay noloshu geedka ku dhisan tahay. Sidaas si le'eg ayuu tuducyada dambe ku tilmaamayaa waxyaabaha uu ku dhisan yahay mabda'a Hawl iyo Hantiwadaag. Sheeg waxyaabaha gabayaagu uu ku dhisay nolosha geedka iyo kuwa uu ku dhisay mabda'a Hawl iyo Hantiwadaag, isna barbardhig.
3. Tuduca u dambeeya:

   "Waxay labadu maamuli karaan, midigta haw daynin".

   b) Muxuu uga jeedaa tuducan?

   t) Ma xasuusan kartaa murti Soomaaliyeed oo u dhiganta tuducan?
4. Murtida guud ee gabaygan soo koob.

## CASHARKA 33aad

### *SAYID CALI IYO XOOLIHII UMMADDA (Curis)*

Cali Binu Abii Raafic oo khasnadda xoolaha Muslimiinta hayn jirey, kolkii Sayic Cali Binu Abii Daalib, Dawladda Muslinka u madax ahaa, wuxuu yiri: "Waxaa khasnadda oolli jirey qool luul ah". Dharaar Ciid ah ayay Inan Sayid Cali dhalay farriin ii soo dirtay, waxaanay farriinteeda ku tiri: "Waxa i soo gaadhay in uu khasnadda yaallo qool luul ahi, waxaan jecelahay inaad qoolka i soo ergiso inta Ciidda". "Ma oggoshahay in uu qoolku ammaano kugu ahaado, saddex ayaamooc aad ku soo celiso, hadduu lumana aad magdhawdid?". Way aqbashay sidaa.

Sidaasuu Raafic ku bixiyey qoolkii. Hase yeeshee, markuu Sayid Cali qoolki Inanta qoorteeda ku arkay, ayuu ku yiri: "Xaggee buu kaaga yimid qoolkani?". Waxay tiri: "Waxaan ka soo ammaanaystay Raafic, si aan ugu Ciido, Ciidda dabadeedna aan celiyo". Markiiba Sayid Cali wuu ii yeeray. Markaan u imid buu igu yiri: "Miyaac muslinka khiyaamaynaysaa Ina Abii Raaficow". Waxaan iri: "Ilaahay baa ka magan galay inaan wax khiyaameeyo". Sayid Cali wuxuu yiri: "Haddaa sawdiga xoolihi dadka ka dhexeeyey, qaar bixiyey maaha?". Markaasaan ku irir: "Sayid Cali, waa Inantaadii, waxayna i weydiisatay inaan qoolka ammaanaysiiyo oo markay ku Ciiddo iska soo celiso".

Sayid Cali wuxuu yiri: "Imminkadan ka soo qaad, iskana jir inaad sidaas oo kale mar dambe yeeshid".

**L A Y L I :**

1. Muxuu Abii-Raafic u siiyey qoolka ummadda gabarta Sayidka?
2. Ma ku habboonaa taa?
3. Gabadhu sidee bay u haweysatay qoolka dadkoo dhan ka dhexeeya?
4. Muxuu Sayid Cali ugu qoonsaday qoolka gabadhiisa?
5. Wuxuu Sayidku, Raafici kula dhaqmay ma kula wanaagsan tahay? Waayo?
6. Maxay shuruudda uu ku xiray ku tusaysaa?
7. Sidee bay taasi raad ugu leedahay caddaaladda Islaamka?

## CASHARKA 34aad

### *TIMIRTII HOREBA DAB LOO WAA (Sheeko)*

Nin reer miyi ah oon weli magaalo arag amaba indha saarin, baa is-yiri: "Horta maxaan magaalo uun u qaban waayey, waa tanoo qayrkayba tegeye. Wallee haddaan waaga waraabe cunun inaan tegi". Waaberigii buu intuu xeradii arigiisa usha la dhex galay ka soo soocay dhawr wan oo ahmin ah, soona qabsaday awr hayina. Markaasuu u ambabaxay magaalo. Dabadeedna goortuu magaaladii yimid ayuu wanankii jibiyey, oo lacagtoodii ku soo gatay dhar iyo dhuuniba.

Dhuunigii uu soo gatay waxa ka mid ahaa timir. Markuu danihiisii ka soo qunsaday magaaladii, ayuu gurigiisii u soo ambaxay. Laba habeen uu soo dhaxay baan waxba jidiinkiisa ka degin, biyo madowna dhehoo. Habeen saddexaadkii buu reer u soo hoyday. Reerkii baa timir u keenay. Ninkii baa yaabay. "Naw! Waar reerku miyuu waashay? Miyaanay ogeyn inaan aniguba timir sito?" Dabadeedna reerkii buu u qayshay "Waar waa reerka, waxaad yeeshaan timirtiinna qaata, oo waxaad ii keentaan dab iyo biyo" Markii la weydiiyey wuxuu timirta u cuni waayey, wuxuu ku jawaabay, "Waar timirtii horeba dab loo waaye,dabka iyo biyaha aan idinweydiistay i siiya, hadday timir ii tahay taydaba waan bislaysane".

Dadkii meesha joogay baa qosol la daatay oo sheegay in aan timirta la karin ee sideeda loo cuno. "Waar ciyaarta iga daaya oo gaajaa i dileysee biyaha iyo dabka ila soo gaadha". "Waar malaha waad dheeldheelaysaa, balse horta annagaa cunaynee, na eeg". Markay cuneen, buu isna cunay oo yiri: "Waar bahashu macaanaa ma malab baa. Waar ma bahashanaan ka qatanaa! Alla nacasnimo fara weynaa".

**LAYLI:**

1. Maxaa ku kallifay in uu magaalada tago?
2. Timirtii ma karsaday? Adiguse weligaa timir ma karsatay?
3. Sidey noqotaa timir la kariyey?
4. Ma u malaynaysaa inay sheekadu run tahay?

*MAAHMAAHO:*

1. Ilaahow aqoon la'aan ha nagu cadaabin, eexashana ha nagaga tegin.
2. Nin waliba intuu cunuu ciidamiyaa.
3. Dad aqoon la'aan waa la qadaa, dal aqoon la'aanna waa la habaabaa.

*HALXIDHAALE:*

Nin baa watay shabeel, ri' iyo caws uu u siday. Ninkii baa waxa ka hor yimid tog biyo ah, waxaanu damcay in uu ka tallaabiyo, wuxuu watay oo midba mar qaado. Sida la og yahayna shabeelka iyo ri'da iyo cawskuna waa isu col. Meeshuna waa ban oo dhir ma laha. Sidee buu ninkaasi u tallaabinayaa waxa uu wato?

## CASHARKA 35aad

*CALAACAL (Gabay)*

Raage Ugaas oo nin gabayaa weyn ahaa ayey hawaaney uu qabay ka dhimatay. Markaasuu tixdan gabayga ah ugu calaacalay.

*Sida koorta yucub oo la sudhay, koromo buubaal ah*
*Ama beelo kaynaana oo, kor u hayaamaya*
*Ama geel ka reeb ahoo nirgaha, laga kaxaynaayo*
*Ama ceel karkaarrada jebshiyo, webi karaar dhaafay*
*Ama habar kurkii iyo wadnaha, lagaga kow siiyey*
*Ama kaal danlay qaybsatiyo, kur iyo dhaal yaabis*
*Shinni kaaluf galay ama sidii, koronkortoo oomay*
*Xalay kololo'aygii ma ladin, kaamil reeruhuye*
*Kunbuulkiyo ardaagii miyaa, laygu keliyeeyey?*
*Wixii laygu kuunyeeyey miyaa, igu karaamoobay?*
*Kumbiskii miyaa layga qubay, kolayo ii buuxay?*
*Maantana kataantii miyaa, laygu kala tuuray?*
*Kob abaar ah oo dhexe miyaa, koore ila meeray?*
*Kub miyaan ka jabay biixi aan, kabaya loo haynin?*

**Sharaxa Ereyada:**

Yucub: Waa geed magacii.

Koromo: Awr.

Buubaal ah: Didaya.

Kaynaan: Hayaan.

Karkaar: Xakab.

Karaar dhaafay: Wuu fatahay.

Kaal: Xoolo yar.

**LAYLI:**

Erayadan iyo odhaahyadan gabayga laga soo xulay siday ugu jiraan macnahooda u sug:

1. Beelo kaynaana, geel ka reeb ah, ceel karkaarrada jebshay, shinni kaaluf galay, dhaal, wixii laygu kuunyeeyey, ardaagii, kub, biixi.
2. Muxuu gabayaagu uga jeedaa tuducyada soo socda; si fiican uga faallood:
   - b) Kumbiskii miyaa layga qubay kolayo ii buuxay;
   - t) Maantana kataantii miyaa layga kala tuuray;
   - j) Kob abaara oo dhexe miyaa koore ila meeray;
   - x) Kub miyaan ka jabay biixidaan kabayo loo haynin.
3. b) Gabaygan yaa tiriyey? Muxuu ka tiriyey?
   - t) Soo koob macnaha guud ee gabaygan.

## CASHARKA 36aad

### *AFKA HOOYO (Hees)*

Heestan waxa curiyey Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi), oo ku dhashay miyiga Gobolka Togdheer sannadkii 1943kii. Abwaanku wuxuu heestan innoogu caddeynayaa baahida loo qabay Afka Hooyo.

*Dhalashada afkaygiyo,*
*Dhigashada fartaydaan,*
*Kaga baxay dhibaatoon,*
*Hawlihii ku dhaafee,*
*Iyadaa dhaqaalaha,*
*Dhidibbada u aastoo,*
*Dheelliga u diiddaye,*
*Dhulka wadajirkiisee,*
*Iyadaa dhammaysee,*
*Waa inaan ku dhaataa, afkayga,*
*Waa inaan ku dhistaa afkayga,*
*Waa inaan ku dhaqdaa afkayga,*
*Waa inaan ku dhergaa afkayga,*
*Waa inaan ku dhintaa afkayga.*

———oooOooo———

*Shalay dhabannahayskii,*
*Dhoolla ka qosol maanta ah,*
*Xalay bow dhaxaysee,*
*Dadka dhooban meesha,*
*Laysku soo dhawaadee,*
*Dhanka qudha u jeedow,*
*Ma hesheen dhambaalkii,*
*Hadalkii ma dhuuxdeen,*
*Ma idiin dhadhamayaa,*
*Waa inaan ku dhaataa, afkayga,*
*Waa inaan ku dhistaa afkayga,*
*Waa inaan ku dhaqdaa afkayga,*
*Waa inaan ku dhergaa afkayga,*
*Waa inaan ku dhintaa afkayga.*

———oooOooo———

*Qofka dhoohanow arag,*
*Kii dhega la'ow maqal,*
*Haddaan dheri lagu shidin,*
*Dhuuniga ma kariyoo,*
*Waxba lagama dheefee,*
*Dheehdoo danteennii,*
*Halka dhaawac kaga yaal,*
*Lafta dhabarka weeyee,*
*Boogaha ma dhaynaa?*
*Waa inaan ku dhaataa, afkayga,*
*Waa inaan ku dhistaa afkayga,*
*Waa inaan ku dhaqdaa afkayga,*

*Waa inaan ku dhergaa afkayga,*
*Waa inaan ku dhintaa afkayga.*

———oooOooo———

**Sharaxa Ereyada:**

Dheelli: Dhan u liicin, dhicid.

Dhaataa: Faanaa.

Dhabannahayskii: Yaabkii, amakaaggii.

Dhambaal: Farriin.

Dheehdoo: Arkoo.

Boog: Meesha bugta.

**LAYLIS:**

1. Maxaa ka mid ah dhibaatooyinka dhigaalka farta lagaga baxay?
2. Siday fartu u keentay wadajir?
3. Muxuu Abwaanku ula jeedaa?
   b) "Shalay dhabannahayskii",
   t) "Ma hesheen dhambaalkii",
   j) "Waa inaan ku dhaataa afkayga",
   x) "Haddaan dheri dab lagu shidin".
4. Maxay tilmaamaysaa "Lafta dhabarka weeyee"?

## CASHARKA 37aad

### *WAX NA DILAY 1967 (Gabay) I*

Gabaygan oo uu tiriyey Xaaji Aadan (Af-Qallooc), oo gabayo badan aad hore ugu soo qaadateen, wuxuu tilmaamayaa, ama si fiican u koobayaa maamulkii dawladihii hore ee Kacaanka ka horreeyey. Xaajigu isagoo dawladahaas la rabay in ay si toos ah u wadaan maamulkii lagu aamminay ayuu had iyo jeer gabayo ku tilmaami jirey ama ku cambaareyn jirey. Gabaygan oo gabayadaas ka mid ah, waxa aannu u qaybinnay laba qaybood, qaybtii horena waa tan:

1. *Afkaa laga maqlaa maaddaadiyo, ereyga qaanuune*
2. *Faqii guriga lagu soo abyey, ka akhriyaan koodhe*
3. *Aqoon laawe laaluush cuniyo, aafo daba gaab ah*
4. *Iyo oday ergo ah baa sharciga, dila abidkoode*
5. *Eexdiyo rishwadu waxay dhalaan, uur-xumiyo ciile*
6. *Aanaduna caaliga laga tegay, aabbaheed tahaye*
7. *Aargoosigiisiyo dulmigu, waa isu adeere*
8. *Marka xaqa la awdaa tolnimo, loo abtiriyaaye*
9. *Haddii uu insaaf jiro qabiil, lama ogaadeene*
10. *Kolkuu oday durbaanka u tumuu, inan cayaaraaye*
11. *Wax ka dhigan mas'uul edeb la'oo, lagu ilqaadaaye*
12. *Dadku kuma aqbalo qalad hadday, kugu arkaayaane*
13. *Adna iinta inaad dhawrataad, ku arrin weydaaye*
14. *Wax na diley xaqoon aasniyo, iib dacaawiyaha*
15. *Wax na diley danuub anad ogeyn, aanadeed bixiye*
16. *Wax na diley anaaniyad iyo, ab iyo laan sheege*
17. *Wax na diley albaabbada dantaan, uunka loo furine*
18. *Wax na diley halkaad ku agbanayd, Kongo ku abuure*
19. *Wax na diley is-maqal li'ida aan, lays adeecayne*
20. *Wax na diley istaafka iyo tijaartoo iskaashada e*
21. *Wax na diley araajida la qoro, imad la'aanteede*
22. *Wax na diley ujrada kuuligaan, abad la siinayne*
23. *Wax na diley u-sheekee midkii, hawl abyi lahaaye*
24. *Wax na diley umuur waajib aad, kaga baqdaa eede*
25. *Wax na diley iskuullada la baro inanka qaad keene*
26. *Wax na diley akhlaaq xumo mas'uul, aabbaheed yahaye*
27. *Wax na diley dadkoo la xaqiriyo, gaal isu ekeyne*
28. *Wax na diley faqiir eed nin kale, lagu ijbaaraaye*
29. *Wax na diley rag amarkii sinnaan, iniq is-dheerayne*
30. *Wax na diley acyaan aan xilkii, fulin awoodayne*
31. *Wax na diley ajnabi taladayda, lagula eertaaye*
32. *Wax na diley adeege u ahow, kaad amri lahayde*
33. *Wax na diley adduun nimaan raboon, eegahayn sharafe.*

**Sharaxa Ereyada:**

Koodh: Maxkamad.

Abyey: Dhammeeyey.

Aafo: Bilo.

Aano: Aargudasho.

Ilqaade: Daydo.

Uunka: Dadka.

Agbanayd: Halkaad joogtay.

Istaaf: (Staff) Shaqaalaha Xafiisyada.

Ujrad: Mushaar.

Kuuli (coolie): Muruqmaal.

Ijbaaraaye: Kallifaaye.

Iniq: Wax.

Eertaaye: Lala cuskadaa.

**LAYLIS:**

I. b) Ereyadan Af-Carbeedka ah, adoo la kaashanaya macallinkaaga macnahooda sug:

1. Rishwada, (maaddaadiyo), (9) insaaf, (16) anaaniyadda, (30) acyaan.

t) Ereyadan kale oo Af-Soomaali ah iyo afaf kaleba sheeg macnahooda:

Daabgaab (3), dacaawe (14), danuub (15), qaan-sheeg (16), abyi (23).

II. b) Wax isbeddel ahi ma ku dhacay xagga caddaaladda iyo sharciga inta maamulka Kacaanka ahi dalka maamulayey, marka aad eegto maamulkii dawladaha Kacaanka ka horreeyey ee gabayaagu ka gabyaayey?

III. t) Waa maxay isbeddelkaasi hadba sida aad u aragtid?

t) Tuducyadan gabayga laga soo xulay macnahooda sheeg:

i. "Markii xaqa la awdaa tolnimo loo abtirinaayey" (8).

ii. "Kolkii oday durbaanka u tumuu inan cayaaraaye" (10).

iii) "Wax na diley umuur waajib aad kaga baqdaa eede" (24).

iv. "Wax na diley adeege u ahaw kaad amri lahayde" (33).

v. "Wax na diley halkaad ku agbanayd Kongo ku abuure (18).

i. Waa maxay waxa Kongo ka dhacay 60kii dabadiisii?

ii. "Muxuu gabayaagu ugu ekeysiiyey Kongadii markaa, Soomaaliyadii 1967kii?

## CASHARKA 38aad

### *SADDEX MAANLAAWE (Sheeko)*

Nin doob ah baa gabadh doonay; markaasaa gabadha aabbaheed ku yidhi: "Boqol halaad iyo baarqabkoodii haddaanad ii keenin, naayaa odhan maysid". "Oo heedhe, xoolaba boqol baan leeyahaye haddaan boqolkaba adiga ku siiyo annana xaggaan u kici? Waxba igama gelinee geela ii keen, haddaad dooni inaan kugu daro gabadhayda". Boqolkii halaad iyo baarqabkoodii ayuu ninkii bixiyey. Odaygii markii geelii loo keenay wuxuu yidhi: "Wax dhibaad ah, kolay tulud ku tahay, oo aan gabadha kuugu darayaa ma jiraan, ee kaxayso waa taasee". "Dhibaad oo dhan kaa dooni maayo, mar haddaad gabadhii anigaa u xoogsanaya".

Gabadhii buu sidii ku kaxaystay, oo ku guursaday. Waxay la derseen nin dabata ah. Ninkii gabadha guursadayna dabatuu noqday oo isaga iyo afadiisii ku noolaadeen. Soddoggii sidii kagama hadhin, waa dambe ayuu yarad cusub u soo doontay. Markuu u yimid buu Ilaahay qoyskii naxdin iyo yaab ku keenay. Maxaa yeelay, wax kaleba daayoo, habeenkaa wax dib loo rogaa baradooda ma oollin, isagana meesha kamay fileyn.

Ninkii gabadha qabay baa yidhi: "Naa maxaynu yeellaa, way-na-kanoo waxaynu u soo qaadno ma haynee!". "Bal ninkan deriskeenna ah aan gaarno inaan wax ka soo helo". Gabadhii baa u tagtay oo ninkii deriskooda ahaa ku tidhi: "Waar wax ma dhaantaa? Odaygii i dhalay baa noo yimide." "Lug sagaaro baan hayaa; kuse siin maayo adigoo ballanqaada inaad ninkaaga iiga soo baxdo maahee". "Waan ka tashane bal lugta horta odayga soo sii".

Markii odaygii lugtii cunay, ayay inantii hadashay oo tiri: "Saddex maanlaawe ayaad tihiin". Aabbaheed baa yiri: "Maxaan ku noqonnay".

Waxay tidhi: "Boqolkii halaad ee inankaad soddogga u tahay xoolo ka lahaa baad ka qaadatay. Markaasaad adigoo cayr nagu og caawa yarad kale u fadhidaa". Ninkeediina waxay ku tidhi: "Adna waxaad ku maan la'dahay adigoo boqol geela leh, yaad boqolkiiba subax dareerisay". Deriskoodii baa yidhi: "Oo anna?" "Waxaad tahay naag boqol halaad iyo baarqabkoodii laga bixiyey ninka lug sagaaro ku doonaya". Odaygii isagoo hadal aan celin ayuu dhaqaaqay, oo reerkiisii tegey. Isagoo tira ariya iyo boqolkii halaad wada ayuu soo noqday, oo intuu mihiibsiiyey iska tegey. Kolkaasuu ninkii gabadha qabay ku jeestay deriskiisii oo yiri: "Waar Ilaahay caydhii innaga furaye, aan xoolaha wada manaafacaadsanno".

**LAYLI:**

1. Odaygii iyo inanka kee baa aad u jeclaa gabadha?
2. Odayga miyuu iimaan la'aa, mise inantiisa ayuu aad u jeclaa? Jawaabtaada ku dhis caddayn.
3. Saddexda nin mid waliba waxaad ku dhaliishay sheeg.
4. Dulucda sheekadu sheeg waxay tahay? Ma waxa weeye dumarku in ragga ay talada dhaamaan?

*MAAHMAAHO:*

1. Saddex baa rag u liita.

   i. Ma tashade;
   ii. Ma toshe;
   iii. Iyo ma tashiishe.

2. Laba qaawani isma qaaddo.

3. Arrin xumo abaar ka daran.

4. Hibo Eebbe ku siiyey habeen layskama qaado.

*HALXIDHAALE:*

Nin baa gabadh u soo haasaawe tegey, markaasay la hadli weyday. Ninkii baa yiri: "Naa adaan kuu socday ee maxaad iila hadli weyday ee sidaa iigu galaysaa?".

"Waxaan kula hadlayaa haddii aad toddobada tog ee innoo dhexeeya aad miro ka soo gudbiso adoo miraha aad siddo toggii walba aad bar ku ridayso anna mid qura ii keenayso".

CASHARKA 39aad

*II GUNUDDEY CAASHAQE (Hees)*

*Sida geed caleenliyo*
*Ubax guudka qariyeen*
*Oy gooni laamaha*
*Ay midiba geesteed*
*Hoobaan isgaadhiyo*
*Guntin midhaha ah leedahay*
*Oo soo gandoodoo*
*Galka faraqa soo daray*
*Oo godan barwaaqo ah*
*Durdur aan go'ayniyo*
*Gacan webi ku yaalla*
*Oo gu' iyo jiilaal*
*Midab guurin baad too*
*Gabadh yahay kalgacal baad*
*Goortaan ku eegoba*
*Qalbigayga gelisaa*
*Waxse aanan garanayn*
*Ii gunudday caashaqe*
*Halka aad i gaadhsiin!*
*Sidaad tahay gammaan faras*
*Sange geesi daaqsaday*
*Uu haro Gal-duur mirey*
*Soddon bil iyo gawdeed*
*Uu goobey farawgii*
*Sararta iyo gaaddada*
*Oo galangalcoodoo*
*Cududduhu gammuurmeen*
*Oo galabba loo raro*
*Sida ramad gu'aad dhalay*
*Hadba kaynta geed leh*
*Oon guluf colaad iyo*
*Weli socoto dheer gelin*
*Gabadh yahay kalgacal baad*
*Goortaan ku eegoba*
*Qalbigayga gelisaa*
*Waxse aanan garanayn*
*Ii gunuddey caashaqe*
**Halka aad i gaadhsiin!**
*Sida gorey haldhaayoo*
*Goor hore aroornimo*
*Gegi doog leh iyo rays*
*Goob wacan ka soo kacay*
*Oo gedefka baalkiyo*
*Gilgilaaya waaxyaha*
*Oo gudub tallaabada*
*Miyir u gundhinayoo*
*Xarrago u guraaya*
*Ama galacda eegmada*
*Indhahaaga goodka ah*

*Gabadh yahay kalgacal baad*
*Goortaan ku eegoba*
*Qalbigayga gelisaa*
*Waxse aanan garanayn*
*Ii gunuddey caashaqe*

**Halka aad i gaadhsiin!**

*Sida gubanka qaarkii*
*Dhul gargoorku siman yahay*
*Ama maadh galdhiidhoo*
*Gubadiyo ku taal Hawd*
*Oo laba gardhawdoo*
*Badhba gees u seexdeen*
*DHabarka iyo gaaddada*
*Quruxdaada gaadhka ah*
*Ama haro gingimanoo*
*Guudka ka xarfanaysoo*
*Shimbiruhu ka giigeen*
*Galawgiyo ugaadhuna*
*Goonyaha ka joogaan*
*Gabadh yahay kalgacal baad*
*Goortaan ku eegoba*
*Qalbigayga gelisaa*
*Waxse aanan garanayn*
*Ii gunudday caashaqe*

**Halka aad i gaadhsiin!.**

**Sharaxa Ereyada:**

Soo gadooda: Soo foorara.

Faraqa: Baarka.

Haro galduur: Waa haro hawdka ku taal.

Mirey: Habeenkii daajiyey.

Goobey farawgii: Burburtii buuxisay.

Galangalcoobay: Barruur la socon waayey, buuxsamay.

Ramad: Geel markaas dhalay.

Gu'yaad: Xilli gu'.

Gargoor: Geed cawseed dooxooyinka ka baxa (gargaro).

Maadh: Geed cawseed harraarada ama cawska laga sameysto.

Galdhiidhay: Biyo ama rays badan ku baxday aadna u ballaadhay.

Laba gardhow: Aad u baxday, kala seexatay.

Gingiman: Buuxda.

Ka giigeen: Ka dhargeen.
Goonyaha: Hareeraha.

LAYLI:

1. Ka faallod sida abwaanku geedka quruxdu marka ay u dhammaato uu ugu sifeeyey gabadha?
2. Haddaad maskaxdaada ku sawirto quruxdaa uu abwaanku ereyadaa innagu tusay, kalgacal ma ku gelin kartaa aad heer qof aad jeceshahay ku tilmaanto? Waayo?
3. Sheeg laba waxyaalood oo kale oo uu abwaanku qurux ku dhammeeyey kuna tilmaamay gabadha.
4. Sharrax tuducyada hoos ku qoran:

   b)... Oo gudub tallaabada, miyir u gundhinaaya.

   t)... Sida ramad gu'yaal dhalay.

   j)... Oo laba gardhooboo, badhba gees u seexday.
5. Heestan waxaad u qiyaastaa hees kale oo aad taqaan, sheegna waxay ku kala duwan yihiin.
6. Muxuu abwaanku gabadha ugu tilmaamay dhir iyo xoolo ee uu ugu tilmaami waayey dad kale quruxdooda?

## CASHARKA 40aad

## F A A L (Curis)

Faalka iyo Maryannadu waa tabo loola jeedo in lagu ogaado waxyaalo aan la hubin. Faalku waa tiro lagu tiriyo tusbaxa iyo quruuruxa. Waxa kaloo jira xarriiqyo dhulka lagu xarriiqo. Maryannadu waa kuusha haweenka oo la weedhaamiyo.

Waxa la arkaa in qof cudur faalkiisa la waayey ku dhaco. Waxa markaa loo doonaa qof u faaliya ama habar u maryanaysa. Inta badan faalka iyo maryannaduba waxay sheegaan wax qof buka u roon. Waxay sidaas ku noqotay faalka iyo maryannadaba qofka yaqaan waa ku xoogsadaan. Kolkaa haddii uu sheego waxa qofka buka ka nixiya, wuxuu ka baqayaa inaan wax la siin.

Badanaa kuwa faaliya dadka wax u keensada been bay ku maaweeliyaan. Waxa suurowda qofku in uu la buko cudur fudud oo qalis u baahan, sida Kolanta caloosha ku taal. Kolantu waxay ku siman tahay in qofka buka la jeexo oo laga gooyo oo uu durba biskoodo. Waxa suurtowda in faalkiisu yiraahdo, qofka waxa u dawo ah orgi cad oo afarta qoob ka madow yihiin, inta fiidkii loo qalo dhiigga iyo uuska ha la mariyo qofka. Waxa la arkaa in orgigii la helo oo dhiigga iyo uuska la mariyo, isla kolkaas, waxa suurtowda in qofka inta Kolantii ku dillaacdo naftuba ka baxdo.

Haddii faaliyihii la weydiiyo waxa dhiiggii iyo uuskii u daaweyn waayeen, waxa suurtowda in uu yiraahdo qofkii gawracay ayaa ahaa qof xun.

Bal haddaba, haddaynu u fiirsanno arrintaas, maxaa iskaga jira bugtada Kolanta iyo orgiga cad ee afarta qoob ka madow iyo xumaanta ama samaanta qofka qalay. Qiilkaa aan meel-marka ahayn ayaa kuu caddeynaya in faalka iyo maryannada midna aanay habboonayn in qofka wax garadka ahi uu isku halleeyo.

**L A Y L I :**

1. Waa maxay faalku?
2. Maxaa loogala dan leeyahay?
3. Sidee buu dadka aamminsan u anfacaa?
4. Ma lagaga kaaftoomi karaa takhaatiirta iyo tegidda cusbitaallada?
5. Sheeg dhibaatooyinka ay faalka iyo maryannadu u keenan dadka?
6. Adigu ra'yigaaga aad ka qabtaa waa maxay? Waayo?

## CASHARKA 41aad

### *WAX NA DILEY (Gabay) II*

Gabaygani waa qaybtii labaad ee gabaygii hore "Wax na diley" ee Xaaji Aadan (Af-Qallooc).

*34. Wax na diley ummadaan qaddarin, aadamigaan nahaye*
*35. Wax na diley ismiga calanka oo, lagu ugaadh taaye*
*36. Wax na diley af beena oo aan runtii, waana la arkayne*
*37. Wax na diley aqoontaada ood, eed ku mudataaye*
*38. Wax na diley idaaradaha, aan shaqo awoodayne*
*39. Wax na diley islaax caam dan qudha, lagu illaawaaye*
*40. Wax na diley ninkii "maaha" yiri, uubta loo qodo e*
*41. Wax na diley iflaas aan baxayn, abad xayaadkeede*
*42. Wax na diley adduunkoo, nin lagu aamminaa dhaco e*
*43. Wax na diley ninba intuu hayuu, daar ku iibsadey*
*44. Wax na diley iska horjeedintay, shicibku eedeene*
*45. Wax na diley asbaab temeshle Qarab, madaxdu aadaaye*
*46. Wax na diley icaanada badhaan, lagu intifaacayne*
*47. Wax na diley uluuf cagafta, oo ay cidla ah yaalle*
*48. Wax na diley iblayskiyo, arbiskaan cidina eegayne*
*49. Wax na diley dantoo lagu akhriyo, yuu cadhoon odaye*
*50. Wax na diley qallooca aan wato, e adiga waa kiise*
*51. Wax na diley innaga reer fulaan, laynaga adkaaye*
*52. Wax na diley inkaar tacasubay, nagu abuureene*
*53. Wax na diley idaacadda kaddib ah, iyo dhaarta iibka ahe*
*54. Wax na diley afka iyo dhaqanka, oo la inkiraayaaye*
*55. Wax na diley islaannimada, oo aan la tixgelinayne*
*56. Wax na diley amwaashiga bukaan, loo ixsaan faline*
*57. Wax na diley abkood bahalahoo, qoday adduunkiiye*
*58. Wax na diley mujtamacaan aqoon, nolosha iinsaane*
*59. Wax na diley addoon daallimoo, lagu ismaa aw e*
*60. Wax na diley iblays,fooxle yidhi, awliyaan ahaye.*

## CASHARKA 42aad

## AFAR WALAALO AH (Sheeko)

Afar nin baa walaalo ahaa. Nin wuxuu ahaa caalin, ninna geesi, ninna deeqsi, ninna abwaan. Afartii nin baa is-qabtay. Waxay isku qabteen taladii reerka. Caalinkii baa yiri: "Talada ha lay daayo, maxaa yeelay, idinku caamaa tihiin, nin caama ihina waa nin indho la'. Anigu diintaan aqaan, oo shareecadaan aqaan iyo xisaabta; kolkaa waa in aniga talada aad ii daysaan".

Geesigii ayaa kacay, wuxuu yiri: "Nimanyahaw waa og tihiin oo anigu geesi baan ahay, nin alla ninkii soo duulana warankaas baan gelinayaa. Haddaan aniga layga cabsanayna waa horaa laydin dhici lahaa. Kolkaa haddaan anigu ahay ninkii idin daafacayey waa in aniga talada la ii daayaa".

Deeqsigii baa soo booday, wuxuu yiri: "Bal horta anigu deeqsi baan ahay; waxaad ku dhaqan tihiinna waa aniga gacantayda. Iyada ayaa ragna idinka jeedisa, xirsi xirna idiin ah, la'aanteedna rag baa hunguri ama il idinku dili lahaa. Kolkaa waa in aniga talada lay daayaa".

Abwaankii oo u dambeeyaa kacay, oo wuxuu yiri: "Waar hooya bal horta saddexdiinnuba saddex nin oo loo baahan yahay baad tihiin, oo midkiinna lagama maarmo. Waxase jira, saddexdiinna ninba meel gaar ah ayuun buu wax ka qaban yaqaan, ee reer ma wadi karo. Wadaadow adigu hanuuniye ayaad tahay, geesiyow daaface ayaad tahay, deeqsiyowna soore ayaad tahay, aniguse dhammaantiin baan ahay. Ninka isku kiin wadaa aniga weeye. Cilmi waa maxay? Waa caqli la ururshay. Geesina ka dirira uun ma aha ee dhul badan oo kale ayaa iyana geesinnimo u baahan. Deeqina aqoon bay u baahan tahay. Waar aniga talada ii daaya".

Afartii nin way heshiin waayeen. Markaasay aguugeen oo wax kala saara doonteen. Degmay u tageen. Waa u warrameen, "Waar na kala saara."

Degmadii waxay tiri: "Bal waa tahaye, meeshu horta libaax afarran bay leedahay, habeen walbana qof baa loo xiraa, ee awal degmadaa habeenba qof u xiri jirtaye, bal caawa haddii Eebbe idin keenay, horta ninkii iska soo saara." Hadalkii oo la hayo raxantii libaaxyada ahayd mudh soo tidhi; dadkii degmaduna way kala yaaceen, way wada dhiilaabeen oo shib la wada yiri. Abwaankii baa kacoo yiri: "Waar caalin diin innagaga akhri". Ku ye, "Alamtaruu libaaxu leeyahoo soo dhaaf". Ku ye, "Waar geesi" Ku ye, "Hub ma sito". Ku ye, "Waar deeqsi". Ku ye, "Qudheydaaba gaajaysan". Ma wada diiddeen? Bal hadda igu eega. Libaaxyadii buu ku jeestay: "Waar waa afarta libaax, annagu nin weydiin soo saaraynaa, ninkaase cad la yiraahdo "Jooharad" oo cimriga dheereysa ayaa ku jirta, bal idinku ka cadkaa cuni lahaa soo saara."

Markaasaa Gooshii soo boodday "waa aniga". Aarkii baa dhirbaaxo qaadayoo dheg iyo dhaban fujiyey oo meeshaa ku tuuray. Say halkii isku qabsadeen. Cabbaar markii aarkii iyo gooshii dirireen baa baranbarqadii yarayd ee dheddigneyd tiri: "Waar ani". Markaasaa yarkii lab dhirbaaxo qaadoo dheg iyo dhaban jabshay. Markii afartii libaax is-qabsadeen buu yiri: "Waar haddaba, intay qaybsan yihiin ee is-haystaan idinna geesaha kala gala."

Markaasay warmaha la dhaceen oo raxantii halkii ku dhimatay. Dabadeedna degmadii baa soo baxday. Waxa la yiri: "Waar kiinnee shaqadan fiican qabtay? Waxay yidhaahdeen, "Abwaanka". Markaasaa la yidhi: "Abwaanow lagu boqor; dunidana adiga u tali".

**LAYLI:**

1. Adiga kee baa kula fiican? Waayo? Jawaabtaada caddeyn ku dhis.
2. Sheeg gaar ahaan mid walba wuxuu ku fiican yahay?
3. Ma og tahay in abwaanku raggii ka soo baxay mise waad beddeli lahayd sheekada dhammaanteed?
4. Rag maxaa kala saara?
5. Dulucda sheekadu waa maxay?

*MAAHMAAHO:*

1. Xaajo nin la toosan baa nin la tuur leh.
2. Lafo geri iyagaa laysku jebshaa.
3. Muran rag waa isku murgaa.
4. Nin waliba qumanihiisaa qoorta ugu jira.

*HALXIDHAALE:*

Nin baa reer u yimi; markaasaa gabadhi ka hor timi. Ninkii baa gabadhii ku yiri: "Naa guriga rag ma joogaa?". Gabadhii baa tiri: "Nin baa jooga oo waa hurdaa." "Ii toosi", "Xil buu igu leeyhay oo ma toosin karo." "Oo waayo?". "Dee waayadeed! Ninkan tii hooyaday dhashay baa dhashay, aabbihii baana i qaba."

## CASHARKA 43aad

### *LABA - EEF (Hees)*

Heestan oo ah "Calaacal jacayl" oo uu tiriyey Maxamed Cali Kaariye, waxay si hufan oo aad u qoto dheer u tilmaamaysaa heerka gabadha abwaanku sheegay jacaylku ka gaaray. Himilada iyo hawada gabadha oo ahayd inay noloshooda meel ku wada dhammaystaan iyo tii wiilka ayaa aad u kala fogaaday. Sida heesta magaceedu muujinaayo waxay gabadhu jaallaheed ku dhaleecaynaysaa in uu godadle laba eefeeye yahay. Kolkaa waxay isku dayeysaa in ay qalbigiisa soo jiidato, iyada oo tusaalaynaysa barashadii wanaagsanayd iyo jacaylkii ay soo taxeen.

*Lahaashada jacaylkiyo*
*Labxashada naftaydaa*
*Qalbigay lulaayoon*
*Soo laabmi waayee*
*Waxay laabtu doontaa*
*Innagoo lammaaniyo*
*Laba nolol wadaagtoo*
*Kala leexi noqonine,*
*Ma inaad kalgacaylka, laashaa*
*Ma inaad lumisaa, aqoontaa*
*Ma inaad libidhoon, ku waayaa*
*Ma inaad laba eef ahaataa.*

———oooOooo———

*Lalabaha hayaankiyo*
*Lugtu socod ma daysoo,*
*Waxa layga baaqaa*
*Loolidda galidda galduuree*
*Waxaan weli ku leeyahay*
*Halkii laydha caashaqa*
*Leexadu i geysoo*
*Soo laabmi waayee*
*Ma inaad kalgacaylka, laashaa*
*Ma inaad lumisaa, aqoontaa*
*Ma inaad libidhoon, ku waayaa*
*Ma inaad laba eef ahaataa.*

———oooOooo———

*Lulumihii biyaha galay*
*Abaar kuma lihiimee*
*Aniguna listiisii*
*Caashaqa la daabtee*
*Waxaan laba-legdoodoon*
*Keliday lignaadaba*
*Sidaan ahay lammaantii*
*Lixdii xalay dhawaaqe.*
*Ma inaad kalgacaylka, laashaa*
*Ma inaad lumisaa, aqoontaa*
*Ma inaad libidhoon, ku waayaa*
*Ma inaad laba eef ahaataa.*

**Sharaxa Ereyada:**

Lahasho: Niyad ka doonid, muhasho.

Labxasho: Laab — nugeel.

Libdhay: Qarsoomay.

Kuma lihiimee: Kuma noolaadee.

Lignaadaba: Taagnaadaba.

**LAYLI:**

1. Maxaa calaacalka gabadha u sabab ah?
2. Maxay tabanaysaa gabadhu?
3. Sharax tuducyadan:
   i. Lalabaha hayaankiyo — naftu socod ma deysoo.
   ii. Lulumihii biyaha galay — abaar kuma lihiimee.
4. Soo saar tuduc tilmaamaysa in jacaylku gabadha ku weyn yahay?
5. Maxaad ka fahantay. "Ma inaad laba-eef ahaataa".

CASHARKA 44aad

## *KU DHAWAAQA FARTEENNA (Geeraar)*

Geeraarkan waxa tiriyey Axmed Cabdullaahi Qaalib oo ka mid ah Guddiga Af-Soomaaliga qoritaankiisa loo xilsaaray.

Guddigu markay guteen hawshaa weyn ee loo xilsaaray, ayey u gudbiyeen Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha ayuu Axmed ku dhiirrinayaa labada Gole in ay degdeg ugu dhawaaqaan afkeenna.

*Afaf dhawr qolo keentay*
*midba uu dhan u jeedo*
*Isku soo dhici hayn*
*iyagoo is-dhagraaya*
*Carruurtaynaa dhibayeen*
*maskaxdii ku dhalaashay*
*Waxay soo dhadhabeen bay*
*dhar u soo galiyeeniyo*
*Dhunkaal weeye qadhaadh*
*dhaxalkeedu khasaare*
*Dhinacuu ku hayaayoo*
*dhalanteediyo beeniyo*
*Waa dhaqankii dabagaalle*
*dhirfacawga lahayne*
*Haddaan tooda u dhaafno*
*intoo teenna la dhawro*
*Dhaqankeennii horreetiyo*
*murtideenna la dhuuxo*
*Sayniskii dhab u raacno*
*dayaxaa naga dheer baan*
*Dhan ka fuuli lahaynoo*
*dhagxan soo guran lahayne*
*Kuwii dhaarta rumeeyow*
*Ilaahay wax ma dhaafee*
*dhulka maalin u dhiibow*
*Kutubtii la dhigaayey*
*Kimisyoonkii dhammeeyoo*
*ka caddeeya dharaare*
*Dhaqso aan u qornee*
*ku dhawaaqa farteenna.*

**Sharaxa Ereyada:**

Is-dhagraaya: Isdhaawacaya.

Dhaan dabagaalle: Dhalanteed.

Dhirfacaw: Anfaco.

Kimisyoonka: Guddi.

## LAYLI:

1. b) Wax ka sheeg waxyaabaha waaweyn ee u sabab ahaa qoris la'aanta afkeenna?

   t) Sheeg waxa laga qabtay dhibaatooyinkaa waaweyn ee hortaagnaa afkeenna qoristiisa?

2. b) Afafka dhawrka qolo keeneen kuwee ahaayeen?

   t) Sidee bay u dhibaayeen carruurteenna?

   j) Muxuu gabaygu uga jeedaa dhaanka dabagaalle?

   x) Sheekada dhaanka dabagaalle ee uu gabayaagu ku hal qabsaday maxay ahayd?

3. b) Kuwa dhaarta rumeeyey ee gabayaagu sheegayo ama la hadlaayo waa kuwee?

   t) Kimisyoonku waa kee?

   j) Waxay dhammeeyeen muxuu ahaa?

4. Ujeeddada guud ee gabayga soo koob.

## CASHARKA 45aad

### *GOBANNIMO SHINKEED GALAY (Hees)*

Heestan waxa curiyey Axmed Yoonis Habbane oo ah Bare. Heestan waddaniga ahi waxay ka mid tahay dhawr heesood oo uu tiriyey Axmed kana tiriyey dagaalladii iyo gobannimadoonka Soomaaliyeed la galay gumeystaha 1977kii.

*Hadduu shicibku oogsado*
*Gobannimo ku shawroo*
*Shucuurtiisa nololiyo*
*Qarannimo shidaalaan*
*In shakaalku go'ayoo*
*Aan gidaar shilaynoo*
*Shanta ay ku dhigayaan*
*Miyay shakiba leedahay*
*Gobannimo shinkeed galay*
*Shaaceedii soo hirey*
*Waa shey hubaaloo*
*Indhohoo shanay dhalan.*

———oooOooo———

*Hadduu shiro gumeystoo*
*Been soo shaladoo*
*Ama xoog shadiidiyo*
*La yimaado shaabuug*
*Dab in ay ku shidayaan*
*Shalaw ay ka ridayaan*
*Weligeed shahiidaan*
*Yaa u sheega nacabkana?*
*Gobannimo shinkeed galay*
*Shaaceedu soo hirey*
*Waa shey hubaaloo*
*Indhohoo shanay dhalan.*

———oooOooo———

*Orgi harag shabeel xidhan*
*Hadduu shaambiyo aar*
*Shaarubaha ka leefoo*
*Shafka uu ka soo galo*
*Shaashluhu caroodoo*
*Shanshadiisa dheeriyo*
*Shirixyada ka buuxsado*
*Shilkaa yaa la weydiin?*
*Shaadirlow gumeystuhu*
*Asagaa shaleynoo*
*Shicibkii halgamayaa*
*Way shiili doonaan.*

**Sharaxa Ereyada:**

Shileynoo: Celinayn, joojinayn.

Shinkeed: Xilligeedii.

Hirey: Muuqday, baxay.

Shalado: Hadoodilo, Qariyo.

Shaadir: Shuko.

Shaleyno: Naasnaasin.

*SU'AALO:*

1. Heestani guud ahaan maxay ka hadlaysaa?
2. Shucuubta madaxbannaanidooda u halgamaysa iyo gumeystaha maxaa ka dhexeeya?
3. Gumeystaha hadda, gaar ahaan, heestanu ay tilmaamaysaa kee kula yahay?
4. Wax ka sheeg dhibaha laga mutaysto ama loo soo maro gobannimada?
5. Yaa loogala jeedaa "Orgi harag shabeel xidhan", Aarkuse waa ayo?
6. Heestan magac kale ma u taqaan, mase u bixin kartaa?

## CASHARKA 46aad

### *ISMA GABO FARIID*

Nin safar ah ayaa habeen ku soo beegmay tuulo. Gurigii ugu soo horreeyey ayuu albaabkiisa garaacay. Islaan buuran baa lahayd. Keligeed bay degganayd. Iyadi baa irridkii ka furtay.

"Marwooy, socotaan ahayee, caawa i marti geli", ayuu yidhi ninkii.

Islaantii doc bay uga joogsatay.

"Soo gudub", ayay tidhi. Ninkii aqalkii ayuu horey u sii galay. Gambar ayuu ku fariistay. Waa la iswareystay. Goortii dambe ayuu ninkii yidhi, Marwooy:

*"Cidlaan joogay xalay oo*
*Maantana cid maan helin*
*Caano lagu qaboobiyo*
*Cunto kale kol ay tahay*
*Maan saarin carrabkoo*
*Cunahayga may marin*
*Calooshayda may galin!".*

Guriga way taallay cunto. Hase yeeshee, islaantu bakhaylad bay ahayd. Ninka inaanay waxba siin ayey damacday. Iyadoo u dayrinaysa ayey tidhi, "Gacaliye:

*Waatay gooman noqotaa*
*Oo guga la waayaa*
*Giddi maanta oo idil*
*Amba maan gasiimanoo*
*Maan goosan hiliboo*
*Wax ma saarin gowsaha!".*

"Waa hagaag. Kaa geesan oo kaa guddoonsaday!" ayuu ugu jawaabay ninkii. Waxa u caddaatay in aan islaantu waxba ula diyaar ahayn. Kolkaasuu fakaray. Dhagax yar oo halkeer oo kale yaal ayey ishiisu ku dhacday. Markiiba talo ayaa ku dhalatay. "Haddii aynaan wax kale haysan, dhagaxan yar ayaynu shuuro ka sameysan. Dhaqso, oo digsi iyo fandhaal ii dhiib. Girgirahaa dabku ka buuxana ii soo dhawee", ayuu si niyad ah u yidhi.

Islaantii way yaabtay. Afkay gacanta saartay. Waxay tidhi, "toddoba iyo soddon baan jirayo, tanoo kalena weligayba maan maqal! Yaa arkay dhagax shuuro laga samaysto!".

"Caawaba waad arki", intuu yidhi nankii ayuu istaagay. Girgirihii ayuu soo qaaday. Hortiisa ayuu qotomiyey. Dambaskii ayuu gilgilay. Islaantii oo weli sidii u amakaagsan ayuu qalabkuu ka dalbaday u keentay.

Ninkii dhagaxii yaraa oo uu maydhay ayuu markiiba digsigii ku riday. Dabkii buu saaray. Qaddar biyo ah ayuu ku shubay. Kolkaasuu sugay. Biyihii baa karay.Fandhaalkii ayuu dhex mariyey. Isagoo dhagaxii yaraa kolba dhan u dhaqaajinaya ayuu yidhi: "Alla haddaynu in yar oo milix ah haysan lahayn, horey cashadu inoogu bislaan lahayd".

"Anigaa haya intay tidhi islaantii ayay sallad daasad milix ku jirto ka soo saartay. Ninkii bay u dhiibtay. Intuu uga baahnaa ayuu kaga darsaday. Digsigii ayuu

walaqay....walaaqay....walaaqay... Xoogaa ayuu u kaadiyey. Goortii dambe ayuu dhadhamiyey. "Alla haddaynu in yar oo jidhiidh ah haysan lahayn, cashadeenna caawa carrabkaa la isku goosan lahaa!".

"Anigaa haya", ayay islaantii la soo boodday. Hul kobteer ah ayey kiish jidhiidh afkaa ka maraya ka soo qabtay. Ninkii bay soo ag dhigtay. Intii uu uga baahnaa ayuu kaga darsaday. Biyihii ayuu kordhistay. Fandhaalkii ayuu dabada ku dhagay. Wuu ku walaaqay. In nabar ah ayuu sugay. Kolkii dambe ayuu dhadhamiyey. Isagoo madaxa lulaya ayuu yidhi, "Haa! Haa! Waar wuxu macaanaa! Wayse yara adag tahay. Alla in yar oo buda ah oo aan ku jilcinno hadduu Ilaahay ina siin lahaa shuuradeennan afka lagama qaadeen kollaba".

Markiiba islaantii afkeedii waxa ka soo fakaday, "Anigaaba haya". Kolkaasay masaf budo cadi ka dul dhoorsan tahay la soo carartay. Ninkii bay gacanta ka gelisay. Isna intuu uga baahnaa ayuu kaga darsaday. Wuxuu fandhaalkii ku walaaqo shuuradii oo uu kolba dhadhamiyoba way u bislaatay. Markaasuu dabkii ka dhigay. Dhagaxii yaraa ayuu ka saaray. Xeedho maran oo ay islaantii u soo diyaarisay ayuu shuuradii intuu uga baahi qabey kaga rogtay. Baaqigii iyo digsigii oo is-watana islaanta xaggeedii ayuu isaga durkiyey.

"Allow subag iyo caano ha inoo waayin, iyagaa innaga dhimane", ayuu ka soo daba tuuray.

"Alle inoo ma waayo", intay tidhi islaantiina, ayay dhiil hilan iyo joog codcod ah ninkii soo ag-qotomisay.

Doqoni markii horeba gaajay meel isla duubi lahayd. Fariidse isma gabo. Ninkii isagoo dhereg cifta haya ayuu seexday habeenkaa.

**L A Y L I :**

*GOOBOO GELI TAN SAXA AH*

1. b) Ninku tuuladuu degganaa.
   t) Cali baa la odhan jirey ninka.
   j) Ninku safar buu ahaa.
   x) Ninka iyo islaantu horey bay isu yaqaanneen.
2. b) Islaantu deeqsiyad bay ahayd.
   t) Islaantu qariibka wax u roon bay ahayd.
   j) Martida islaantu kama ay seexin jirin.
   x) Bakhaylad bay ahayd islaantu.
3. b) Ninku nin buuran buu ahaa.
   t) Islaantu mid buuran bay ahayd.
   j) Midna ma buurrayn.
   x) Soomaalidu waa dad wada buurbuuran.
4. b) Shuurada dhagax baa laga sameeyaa.
   t) Shuurada biyo, jidhiidh iyo dhagax baa laga sameeyaa.
   j) Shuurada biyo, jidhiidh iyo budo ayay ka koobantaa.

x) Shuurada dadka maalqabeenka ah ayaa aad u cuna.

5. b) Ninku doqon buu ahaa.

t) Ninku nacas , xariif ayuu ahaa.

j) Ninku fariid, xeel-yaqaan buu ahaa.

x Ninku dhabcaal buu ahaa.

## CASHARKA 47aad

### *FARRIINI WAA QAAN:*

Gabaygan soo socda, waa farriin gaar ahaaneed oo ku socota dhammaan barayaasha maanta. Waxa curiyey Baashe Muuse Jaamac (Macallin Sooyaal). Waa hal-abuur ka tirsan Kooxda Iftin ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.

*Wuxuu Macallin mudankiisu yahay, doqoni waa mooge*
*Meel buu la joogaa, Rasuul Mawle soo diraye*
*Raggaad magac wadaagtaan horay, dhaxal u muujeene*
*Mar haddaan sidii ina Bilaal, madhax la reebeynin*
*Maxamuud sidiisii haddaan, lala masuugeynin*
*Oo aan macnaha loo ekeyn, meelna laga raacin*
*Alla magane maahayn inaan, maansa triyaaye*
*Waxbase yaan muraaqoon xusuus, bari samaadkiiye*
*Taariikhda soo meertay iyo, maanta waxa jooga*
*Iyo muuqi ay shalay lahayd, kala mid weeyaane*
*Maalinba ishay leedahaa, loo mutihiyaaye*
*Maaggii horaan doonayaa, inaad marsiisaane*
*Oo meheraddeennaan rabaa, inay macaataaye*
*Indho idin ku soo maqan ayaan, meel fog ka arkaaye*
*Maal iyo halkii iin leh baan, maanta sarayaaye*
*Ka meermeeri maayee runtaan, soo mutuxayaaye*
*Anigoon maldihin macallinow, adiyo maankaaga*
*Nin masaajid galayaa hadduu, marada biifeysto*
*Oo aannu meeshii xumeyd, magane soo meydhin*
*Hadduu madal salaadda u hor maro, ma aha iimaame*
*Muuniyo dulqaad baa carruur, lagu muquunshaaye*
*Muxibbiyo kalgacal waalid baa. la iska muujaaye*
*Usha adoon ku miidaamin baa, loo miyiriyaaye*
*Casharkoo macaan badan haddii, anad mihiibsiinnin*
*Malab daadanaanyiyo haddaanad, miidda ka hiraabin*
*Margashada horuu kugu nacaa, waa maqaadir e*
*Sidii madi irmaan oo nin lihi, maraqyadow siibey*
*Goortuu ka maaloba haddii, anad maggowsiinin*
*Ood madaxa taataabatoo, yarahe maagmaagto*
*Inaadan meel wax sii dhigin adaa, ii markhaatiyahe*
*Haddii anad mataanayn kuwaa, meesha kula jooga*
*Muraajacada dariskii horaa, laga miin-guurshaaye*
*Mustawaha kuwaa liita baa, lagu miiqdaaye*
*Haddii aanu mashquul noqon ilmuhu, meel kaluu dayiye*
*Oo aad wax kala miiratoo, nin ku maan qaaddo*
*Maa midig e bidixdi haddii, anad ku miisaamin*
*Wax ma garatadaa kale aday, kuu mas'uul tahaye*
*Maaweelo filin aad gashoo, miridho soo joogtey*
*Maskaxdiyo hadday kala tagaan, maanka lagu siiyey*
*Oo aad is-midab doorisaan, waa dheg-xumo weyne*
*Wax nin moodo door baan aniga, layba soo marine*
*Hiddaheennu yuu madal kufine, maandhow ka ilaasha.*

**Sharaxa Ereyada:**

Qaan: Waxa laga rabo inaad mag-dhowdo.

Waa mooge: Ma oga.

Mawle: Eebbe.

Ina Bilaal: Macallin Jaamac.

Maxamuud: Maxamuud Axmed Cali (Father of Education).

Maaggii: Jidkii.

Maal: Meel bukta.

Biifeysto: Caadeysto.

Madal: Meel.

Muuno: Qaabsan, sharaf iyo deggenaan.

Midaamin: Tuurin.

Mihiibsiinin: U gudbin.

Miid: Inta ugu saafisan, uguna macaan.

Ka hiraabin: Ka dhergin, ka waraabin.

Madi: Hasha badisa.

Maraqyadow siibey: Maraqa ka furey "Maraqu waa meedhax inta la feedhay la buleeyey naasaha geela lagaga maro, si aan nirguhu u nuugin".

Maagmaagey: Ka joogjoogsadey, meermeeriyey, indhaha la waabtey.

Minguurshaayee: Laga amba-qaadaaye
Madal hufine: Marin habaabin, dhaqan gaddoomin.

**L A Y L I :**

*GOOBO GELI JAWAABTA UGU HABBOON*

1. Macallinka waxa lala misaaley.
   i) Shiikh oo kale.
   ii) Xaakin oo kale.
   iii) Rasuul oo kale.
   iv) Aabbe oo kale.
2. Gabayaagu wuxuu qabaa in la raaco marinkii billaa ee:
   i) Macallin Jaamac Bilaal oo qudha.
   ii) Macallin Sooyaal iyo barayaasha kale.
   iii) Maxamuud Axmed Cali oo qudha.
   iv) i) Iyo iii.
3. Meheradda gabayaagu sheegayo waa:
   i) Hal-abuurnimada.

ii) Macallinnimada.

iii) Ardaynimada.

iv) Gabaynimada.

4. Indhaha Macallinka ku soo maqani waxay yihiin:

   i) Kuwa barayaasha kale.

   ii) Waalidka.

   iii) Ardayda.

   iv) Dadweynaha.

5. Ardayda waxa wax lagu bari karaa:

   i) Ushoo lagu miidaamiyo.

   ii) Muuno iyo dulqaad.

   iii) Canaan iyo ciqaab.

   iv) Mashquulid la'aan.

## CASHARKA 48aad

### *GEEL JACAYLKIISA IYO SOOMAALIDII HORE (Curis)*

Soomaalidii hore geela aad bay u jeclayd. Ninkii aan geel lahayn nin tirsan oo tixgelin mudan ma haan jirin! Tirada uu geel ka leeyahay ayaa qaddarinta qofku ku xidhnaayeen, xoola kale intuu doonaba ha ka lahaadee. Ninkaan xagla weynow geel u soo xeroon habeenkii, caydh xaalufa oo xeradiisu madhan tahay xaggooda ka ahaa, oo xurmo iyo xisaabba geel bay ku xidhnaayeen.

Dhaqan iyo dhaqaalahoodaba geel buu ku dhisnaa. Nin yar iyo nin weynba waxa lagu taamaa ee helitaankiisa la isku tirtirsiiyaa wuxuu ahaa geel. Waxa isku dara dareenkooda kulmiyaa ama kala dila ee dab dhexdooda ka oogaa wuxuu ahaa geel. Ninka ay habaarayaan, "Geel waa", ayay ku odhan jireen. Ninka ay u ducaynayaan ee ay wax wanaagsan la damcaanna, "Geel hel", ayey odhan jireen.

"Geel waa geel, in goysaana waa geel", tiraabta ah ayaa saldhig u ahayd xeerkooda baayacmushtari oo ahaa inta badan mid ku siman heer wax la kala beddesho. Tusaale ahaan labada qaalmood ee lo'da ahi, qaalin geel ah ayey goyn jireen.

Hadday wax ammaanayaan, hadday wax sifeynayaan iyo hadday dareenkooda gaar ahaaneed soo bandhigayaanba, halqabsigoodu geel buu ahaa. Geelu siduu ula qiimo weynaa waxa marag muran reeb ah ayuu ahaa, qof ay jecel yihiin oo qudha laga jaray ayey geel kaga samri jireen, oo xaggooda geelu dadna waa u goyn jireen! Bal qabsoo ninku boqol halaad ayuu u dhigmi jirey; haweentuse konton bay ahayd!!!

Hadal iyo dhammaantii gebagebadu waxay tahay, Soomaalidii hore geela aad bay u jeclayd.

**Sharaxa Ereyada:**

Xaaluf: Abaar, madhan.

Taamaa: Hammiyaa, helitaankiisa jecleystaa.

Tirtirsi: Dhiirrigelin.

Tiraab: Hadal.

Baayacmushtari: Ganacsi.

Qudha: Nafta.

**L A Y L I S :**

I. *SU'AALAHAN SI KOOBAN UGA JAWAAB:*

b) Tixgelinta iyo maamuuska qofku maxay ku xidhnaayeen waagii hore?

t) Xeerka baayacmushtari waagii hore saldhiggiisu muxuu ahaa?

j) "Shan gu' iyo shan jiilaal haddii cirku, naga shakaalnaado
Shan riyaad ninkii haysta buu, shaamareer dili
Annaga shaaxin uun baa markaa, laga shareeraaye".

Xoolaha uu ku faanayaa gabayaagani waa maxay?

Naga shakaallado: Aanu di'in, naga xidhnaado.

Shaamareer: Yaab, welwel iyo walaac.

II. *SHARAXA MAAHMAAHYADAN:*

b) Abaal raaga, raag baa leh. Abaal soo degdegana xoolaa leh.

t) Dundumo in la dugsado iyo in la dareensado la iskuma helo.

## CASHARKA 49aad

### *AAN OOYEE ALBAABKA II XIDH!*

Heestan waxa tiriyey hal-abuurkii waddaniga ahaa ee la odhan jirey Maxamed Ismaaciil, kuna magac dheeraa (Belaayo-cas). (Waxa loogu beddelay Barkhad-cas). Heestan wuxuu curiyey mar uu yimi Waqooyi nin ka socday Dawladda Ingiriiska (Duke of Gloucestor) 1958kii. Ninkaas oo ahaa Boqoradda Ingiriiska adeerkeed.

Waxa lagu yidhi Barkhad-cas u soo diyaari hees ammaan ah, oo kaalay aan ka hor-tagnee. Isagoo taa diiddan, kana gubanaya gumeysiga Ingiriiska, nacayana aragga ninkaa Ingiriis, dadka Soomaaliyeedna ku guubaabinaya in ay diidaan ka hortagga iyo soo dhoweynta ninkaa Ingiriis ayuu yidhi:

*Awowgey ninkii indhaha tirey*
*Ninkii aabbahay addoonsaday*
*Ninkii anigana i iibsaday*
*Ninkii ifka igu adduun tirey*
*Iidaan li'i baa ishaa i bidee*
*Haddaan ogohoon ka aarsan kareyn*
*Haddaan Aadanow unuunka jarayn*
*Ninkaa araggiisa uurkaan ka necbee*
*Aan ooyee albaabka ii xidha!*

———oooOooo———

*Isagoo Iglan jooga buu i diloo*
*Ushuu soo fidshaa i iimaysoo*
*Waa taa aramidu i oofa tirtayee*
*Asaag li'i baa ishaa i biddee*
*Ninkaa araggiisa uurkaan ka nacee*
*Aan ooyee albaabka ii xidha!*

———oooOooo———

*Arladii ka samroo adduun ma hayee*
*Haddii la ilaashay afkaygii*
*Haddaanan ikhtiyaar aqoontay hadlayn*
*Haddaanaan erey qudha shirkaa odhaneyn*
*Ninkaa araggiisa uurkaan ka necbee*
*Aan ooyee albaabka ii xidha!*

———oooOooo———

*Wixii arineen Ilaahay jecleyn*
*Haddaanan addimada ku oolin kareen*
*Aayaadka Qur'aanka wada aragtoo*
*Udgoonena yidhi indhaha ka qarshee*
*Ninkaa araggiisa uurkaan ka necbee*
*Aan ooyee albaabka ii xidha!*

———oooOooo———

*Ugaadha ninkii dhaqdee urursha*
*Ruuxii iigayaa adduun ka baxshee*
*Raggiinnii ogaa horuu u arkee*
*Ninkii ooridiisa u geynaayow*
*In "keeg iyo shaal" ayuu ku arkine*
*Iimowdey axankaaga weynee*

*Libaaxa anasiye, abaarse ka ciyey*
*Abuuriin lo'da joogta baa urisee*
*Oodday jabisaa in ay u dhacdoo*
*Anshaxuu ka guraa idilkeed*
*Waa kaa Ingiriiskii iihda hayee*
*Idinna u dabbaaldegoo adhiyahow*
*Ayaanu ninna odhan Soomaalaan ahee*
*Ordoo magacana ka iibsada!*

**Sharaxa Ereyada:**

Aadan: Waa heesaaga walaalkii.

Oolin kareyn: Joojin kareyn.

Unuunka: Kurka, madaxa.

Udgoon: Nebi Moxamad.

Ooridiisa: Afadiisa.

Axan: Ceebowday.

Amayo, Abaarso, Abuuriin: Meelo Hargeysa u dhow magacood.

**LAYLI:**

1. Waa kuma ninka heesaaga awowgii indhaha ka ridey, aabbihii addoonsaday, isagana iibsaday ee ifka ku adduun tirey?
2. Muxuu u leeyahay "Aan ooyee albaabka ii xidha?"
3. Sharax tuducan:
4. Haddii Barkhad-cas loo oggolaan lahaa in uu ikhtiyaarkiisa hadlo, maxaa laga filaayey in uu odhan lahaa?
5. Waxa cad ee heesaagu ka soo hor-jeeday soo dhoweynta iyo u soo shiriddii ninkaa Ingiriis. Tuducyada dareenka si cad u muujinaya heesta ka soo saar.

## CASHARKA 50aad

### *GUMEYSIGA AMXAARADA*

Gabaygan (aan dhammeyn) waxa tiriyey nin la yiraahdo Faarax Cilmi (Geydh). Faarax waa nin gabayaa ah. Gabaygan wuxuu ku sifaynayaa sida gumeysatada Amxaaradu u gumeysanayso, una kadeedeyso dadka Soomaalida ah ee xukunkeeda ku hoos jira.

**Faarax wuxuu yidhi:**

*Awal maanso waa taan danciyey, toban diraacoode*
*Waa taan dawaarka u xidhayoon, daayey waayahane*
*Xaluun baan daktaan idhi hurdada, laygu soo dagaye*
*Aan daleeyo caawana hal bay, damacday laabtiiye*
*Dad Amxaara diidoo ka nacay, dhuunka iyo laabta*
*Ooy duri colloobeen tan iyo, duuddii Nabi Aadan*
*Oo lagu digeeyaannu nahay, doog iyo abaare*
*Dawlooyinkoo idil haddaan, daraf u gaadhsiinnay*
*Xaqa lama dadee waa inaan, daacad la hadlaaye*
*Beri qudha inaan taa la dayin, maaha dawgiine*
*Nimankaa dubaaxdiyo ku cuna, daribta ceerriinka*
*Ee sida dugaag xoola helay, noo dudubinaaya*
*Oon diir naxaayiyo lahayn, dib u dhaqaaleynta*
*Diin naguma raacaane waad, nagu dilaysaane*
*Dirna naguma raacaan awow, durriyadiisiiye*
*Dabuubtana inaan kala tagnaa, daahir loo yahaye*
*Haddii Xayle nagu sii dafiro, hadallo deelqaaf leh*
*Dagaal iyo xummaan baan rabnaa, inaan ku doonnaaye*
*Haddii debedda ruux nagaga hadho, daafac baan nahaye*
*Kolley dooni maynee haddii, lanaga deyn waayo*
*Dirqi in ay ku haystaan intii, nagula doodaysay*
*Rabbi waxaan durraansaday inay, demeg yidhaahdaan.*

**Sharaxa Ereyada:**

Danciyey: Daayey, iska dhaafay, dayacay.

Dhakhdaan idhi: Seexday, sardhada galay, dugtaan idhi.

Daleeyo: Bilaabo.

Duri: Beri hore.

Lagu digeeyey: Gumeysi ku raagay.

Daw: Jid, xaq.

Darib: Hilib.

Dudubinaya: Cunaaya.

Dir: Isir, durriyad.

Daduub: Af, luqad, hadal.

Deelqaaf: Af-lagaaddo, gaf.

Dirqi: Khasab.

Demeg: Baaba'aan.

CASHARKA 51aad

## *HEERIN*

Afar hablood ayaa beri ku guur seegay beeshoodii. Waxay guudka fidhaan oo gayaankooda sugaanba, habeenkii dambe ayay hoos isula faqeen. "Waxaynu dhawrnaaba waa guumeysinnimo ee aan ka heerino oo ka huleelno meesha", ayey tala ku goosteen. Haddii dayaxii dhacay hebeenkaa, ayay muska soo jeexeen. Mid walba hu' waxay lahayd ayay gosha soo gashatay. Laba caanamaal hadday jidka soo dhiganayeen ayey habeenkii dambe goor fiid ah reer u soo hoydeen.

Inta ooddii laga rogey ayaa buulkii gabdhaha gogol loogu fidiyey, wan saddex jir ah oo macashu dhulka xaabayso, oo barruur dhaqaaqi la' ayaa loo loogey. Intii hilbuhu uga bislaanayeenna, karuur geel oo ay hammuunta ku sii jabiyaan ayaa loo geeyey. Kor Dahab oo reerka keli gabadh ku ahaydna way ugu sii sheekaysay. Haddii hablihii intaa la isugu qoofalay, ayaa odaygii reerka ubadkiisii oo gugaa labaatan jirsadey, ayuu gooni ugu yeedhay. Wuxuu yidhi, "Aabbe gedahaad ku guursan lahayd waad joogtaa, gabdhuhu waa heerin oo way inoo soo galeen ee waa inaad mid kala hadhaa".

"Ha la yeelo aabbe eh, tan aan kala baxayo ma dhaban baan ku doortaa illeyn wax kama naqaanno e?" ayuu yidhi wiilkii. Odaygii baa intuu shaarubta miiqey ugu jawaabay, "Maya, gacaliye, balse si kalaynu ku dayi. Waynu xujeen. Hilbahoo kulul baynu u geyn haweenkayna ku odhan; innana waynu u kuur geli".

Hablihii heerinka ahaa waxay jirriqsadaanba kolkii dambe ayaa hilbihii oo karaya oo xeedho geedeysan lagu sido loo keenay. Illeyn waa meel wax laga wado eh, kor dahabna waa looga yeedhay. Haddii ay hablihii hilibkii ku cidlaysteen ayaa tii ugu horreysay ku soo haaddey, oo ay xeedhadii hab ku tidhi sidii haad-ka-adagta! Gacantay galisaa kor bay ula soo booddey, iyadoo ku hiiraanhireysa. "Hoh...Hoh... kama naale kululaa!"

Tii xigtey ayaa soo hilatay oo ku tiraabtay, "Naa karan weynay hore u kala goo!".

Tii saddexaad oo hanqalka la soo boodday ayaa ku gurxantay, "Naa ha qaboobee... qabo-weyn ku rid".

Tii afraad oo raarta ugu xigtay oo aan halkeedii ka soo ruqaansan ayaa tidhi kolkaa iyadoo afka gacanta ku haysa, "Naa ha kanfafa e... korka saar".

Odaygii iyo wiilkiisii oo buulka docdiisa bari ee dibedda ah taagnaa ayaa is-eegay. "Waa taa afraad ee codkeedu xabeebta yare leeyahay, tii aad kala bixi lahayd ee tilmaanso", ayuu waayeelkii ubadkiisii kala xanshashaqay.

**Sharaxa Ereyada:**

Naale: Joognee.

Karan: Sugi.

Qaboweyn: Qabow.

Hiiraag: Neef googoyn.

Hanqalka: Qaarka sare.

Tiraabtey: Ku dhawaaqday.

LAYLI:

*SI KOOBAN UGA JAWAAB SU'AALAHAN:*

1. Heerin waa maxay?
2. Immisa maalmood bay habluhu jidka ku soo jireen?
3. Caanaha karuurka ah maxaa hablaha loogu hormariyey?
4. Weedha ah, "Hablihii heerinka ahaa waxay jirriqsadaanba..." maxaa looga jeedaa.
5. Hablaha maxaa tii afraad loogala baxay?

## CASHARKA 52aad

### *GOBANNIMO IYO GALOOL (AMA XARAASH)*

Heestan waddaniga ah ee soo socota waxa tiriyey abwaankii Maxamed Ismaaciil Belaayo-Cas (Barkhad-Cas) — 1925-62, hase yeeshee, halgankii lixdankii loo bixiyey Barkhad-Cas.

*Diintaan ku gabowney baan gambinee*
*Ayaan cidi guursan gabdhaheennee*
*Soomaaliyey giddigiin gartaa naqa oo*
*Maxaa la gudboon oo garab yaal oo*
*Maxaynu gobannimada siinnaa?*

———oooOooo———

*Nin iilka galaa isagoo gob ah*
*Luxudkuu ku gamaa ma soo gudbiyee*
*Idinkoo gun ah waydinkaa go'ayee*
*Soomaaliyey giddigiin gartaa naqa oo*
*Maxaydin ku garawsan geerida?*

———oooOooo———

*Hangool iyo gudin gar iyo xarig*
*Aqalkaa la galiyo dhuxusha giniga ah*
*Geedkaa ina deeqay gabigeen*
*Gadniin Iglan goosan kari maysee*
*Soomaaliyey giddigiin gartaa naqa oo*
*Galoolka maxaynu siinnaa?*

———oooOooo———

*Wuxuu galo iyo wuxuu gudo*
*Gasiirad kuwaa go'doon ku noqdee*
*Isguud baxay baa dal garanaayee*
*Inaan ku gargaarno gaalada iyo*
*Inaan ka guddoonno Guullahay*
*Miduun labadaa inoo gooyoo*
*Soomaalaay giddigiin gartaa naqa oo*
*Maxaynu gayigeenna siinnaa?*

**Sharaxa Ereyada:**

Gartaa naqa: Gartaa gala; qaada.

Luxud: Qabri.

Gasiirad: Wuxuu ula jeedaa carriga Ingiriiska.

Gar: Xadhig dhumuc weyn.

**L A Y L I :**

*SU'AALAHAN KA JAWAAB*

1. Diinta aan ku gabowney waa tee?
2. Dadka uu heesaagu la hadlayaa goormay gob noqdeen?

3. "Geedkaa ina deeqay gabigeen.

Gadniin Iglan goosan kari maysee,

Galoolka maxaynu siinnaa?".

Si buuxda u sharrax tuducyada kor ku qoran:

4. "Miduun labadaa inoo gooyoo".

Waa maxay labada arrimood ee uu heesaagu dadka Soomaaliyeed kala doorransiinaayey?

## CASHARKA 53aad

### *BERIGII GUMEYSIGA*

Gabaygan aan dhammeyn, Tima-Cadde, wuxuu tiriyey 1969kii, markii la isu diyaarinayey doorashadii ugu dambeysay. Wuxuu dadweynaha tusayaa in adduunku soo wada maray dhibaatadaa, hase yeeshee, dadaal iyo aqoon ay ku muujiyeen dhibaatooyinkii soo food-saarayey. Tima-Cadde wuxuu yidhi: "Doorashadii u dambeysay siday u socotay markaan arkay baan idhi:

*Banii'aadmigii hore dhammaan, wuu baraarugaye*
*Ragga bahasha duushiyo madfaca belo la soo saarey*
*Badawnimadu soo wada mariyo, baaba'iyo hooge*
*Goortaad wax barataa khalqigu, kuu bal dhigayaaye*
*Biyahaan dhaqaaqin dhagxaan, badan ma riixaane*
*Basar baa dhismaha doorashada, loo bineyn jiraye*
*Boqontiin go'daye uunku waa, baratamaayaaye*
*Boqollaal gu'yoo tegey wixii, idin baguugaayey*
*Bawdyaha wixii idin ka jaray, haw badheedhina ee*
*Nin qabyaalad beertoow wanaag, kuuma soo baxa'e*
*Barbaar wada caweysiyo hayaan, baadi kala soocda*
*Barwaaqiyo way kala fog yihiin, beelo nabadeede*
*Budulkay ku kala leexatiyo, badhax la'aanteeda*
*Beriguu gumeysigu yimaad, bilahan mooddaaye.*

**Sharaxa Ereyada:**

Bal: Halkan waxa loola jeedaa dermo.

Baguugaayey: Cidhib-tirey, burburiyey, baabi'iyey.

Hayaan: Geeddi dheer.

Budul: Meel cagtu ku badatay.

**L A Y L I :**

Goobo geli ereyga ama odhaahda saxa ah:

1. Ummaduhu waxay isku dhaafaan:
   b) Qabyaalad.
   t) Aqoon.
   j) Badawnimo.
2. Waxa Soomaaliya dib u ridey waa:
   b) Hawl-nacayb.
   t) Caydhnimo.
   j) Qabyaalad.
3. Boqollaal gu' oo tegey waxa Soomaali wiiqey, welina wiiqaya waa:
   b) Aqoon iyo is-garabsi la'aan.
   t) Sad yaraan iyo saboolnimo.

4. Qabyaalad iyo kala fog:

   b) Nabad.

   t) Colaad.

   j) Barqaawo.

   x) B iyo J.

5. Tima-Cadde, wuxuu leeyahay qabyaalad looma baahna:

   b) Wakhtigii gumeysiga.

   t) Wakhtigan.

## CASHARKA 54aad

### *CABDI-GAHAYR IYO GEELA*

Beri ayaa ninkii Cabdi-Gahayr la odhan jirey, geel laga dhacay. Markii loo sheegay in geeliisii la qaaday, ayuu wuxuu ballan ugu qaaday nimankii dhacaa ku kacay in uu ka aar-gudan doono, aar-gudashadiisuna ay keeni doonto cidhib xumo weyn oo aan laga soo waaqsan.

Markaas ayuu tuducyadan soo socda ee kala googo'an tiriyey, isagoo ku halqabsanaya wiil uu dhalay (Guhaad).

*Wallee ama gufaacada ka qaday, gu'ga la eegayo;*
*Wallee ama Guhaadow waxaan geysto, lala yaabe;*
*Gacantayda jeeraan sidii, Gurey ku ciil beelo;*
*Amaan gaal madow Herer ku dilo, Giibba laga noole;*
*Oo ay dumar ganba-cad soo xidhan, gabaygu waa beene.*

Nin wadaad ah ayaa waaniyey, kuna ahbiyey Cabdi-Gahayr in uu cagta dhigo, oo meel joogo. Cabdi-Gahayr wuxuu ku yidhi wadaadkii sidee meel u joogaa, haddii xoolihii oo dhan la iga dhacay. Isagoo wadaadkii xusuusinaaya qiimaha iyo nacfiga geelana wuxuu yidhi:

*Magaalada Hargeysiyo Berbera, moodka waxa keena*
*Oo Adari "Maarsey" ka dhigay, muranku waa ceebe*
*Waa muruq addoonlow ratiga, micidu weynaatay*
*Markab buu adduunyada u yahay, macallinow geele*
*Nin waliba micnaha loo dhaqduu, maanka ku hayaaye*
*Muraadkaa ku toos awgayow, hay makeekiyine!*

Sidaa markii uu yidhi, ayuu haddana wadaadkii ku yidhi: Cabdi-Gahayr waxaad garan doontaa markii xabbadi wadnaha kaaga joogsato.

*Cabdi-Gahayr wuxuu ugu jawaabay wadaadkii gabay:*
*Dagaalkii Jidbaalaba ninkii, joogay baan ahaye*
*Abidkayba meel lagu jabaan, jiqilo weynaaye*
*Ilaahay i jeclaa muxuu, jiray arwaaxaygu.*

Wadaadkii kumuu hadhin ee wuxuu haddana ku yidhi Cabdi-Gahayr, iska joog oo wardiga iyo Quraanka dhigo. Geelii waad heli doontaaye ee si nabad ah ku raadso.

Cabdi-Gahayr wuxuu haddana ugu jawaabay wadaadkii tixdan kale, isagoo ku celcelinaya sida uu ugu hanweyn yahay lahaanshada geela.

*Idinbacasa awrkay dhashiyo, aarankay wadatay*
*Aakhiro nimaan geel lahayn, lama ammaanayne*
*Asaxaabihii horeba waa, ku intifaaceene*
*Maxaan idinla awlaadsadaa, awr ma dhaansado e.*

**Sharaxa Ereyada:**

Gufaaco: Roob dabayl leh.

Herer: Waa Hargeysa.

Giib (Gibb): Wuxuu ahaa D.C. Ingiriis ah oo Burco lagu diley.

Maarsey (Marseilles): Waa magaalo Faransa ku taal oo deked leh.

Makeekiyine: Hadalka ha ka duwin jidka toosan, oo muranka iyo is-yeelyeelka dhaaf.

Idinbacasa: Qaalin geela.

## CASHARKA 55aad

### *ISKUDUUBIN*

Geelle, toddobaatan jir laga talo qaato oo la tixgeliyo ayuu ahaa. Guunyo hodan buu ku ahaa. Ubadna afar barbaar oo isa soo gaadhay oo kan ugu yari siddeed iyo toban jir yahay, kan ugu weynina labaatan iyo lix yahay, ayuu kala lahaa.

Adduunse laguma waaro e, habeenkii dambe ayaa Geelle sakaraadkii qabtey. Hadduu odeygii gartay in tiisii soo gashay, ayuu goostay afartii wiil oo hareeraha ka taagan inuu la dardaarmo.

"Afar ulood oo is-xoog le'eg", ayuu odaygu yidhi ha la ii keeno. Waa loo keenay. "Ha la isku xidho", ayu yidhi. Waa la isku xidhay. "Hadda isku day oo jabi", ayuu curadkii ku yidhi. Curadkii waa isku dayey. Mise wax la loodin karoba ma aha. Saddexdii kalena midba markiisuu isku dayey. Way quusteen. Kolkaasaa Geelle yidhi, "Ha la kala furo oo mid mid in loo jabiyo ha la isku dayo". Sidii baa la yeelay. Curadkii ayaa ushii ugu horreysay qabsaday. Mise waa bash-ka-lax oo xoog sidaa ahba uma baahna. Hawl yari ayaa ulihii kalena loo jajabiyey.

Geelle oo hadalkuba si adag kaga soo baxayo, ayaa kolkaa yidhi, "Afartaan dhalayeey, wax ku qaata ulahaa. Haddii aad isku-duuban tihiin, dad idinkaa u wanaagsanaan doona oo wixii idinka gardaran ka gacan sarreyn doona. Haddii aadse kala firirtaan oo aad tacab iyo talo ku heshiin weydaan... tabar yeelan maysaan oo tunkaa la idinka fuuli... oo keli-keli cadawgiinnu idiin turqi... oo xoolihiinnaa yaraan...xabaalihiinuna way badnaan!".

**Sharaxa Ereyada:**

Guunyo: Xoolo.

Hodan: Maalqabeen.

Tiisii soo gashay: Dhimashaduusu dhawaatay.

Turqi: Mudi layn.

**L A Y L I :**

*SI KOOBAN SU'AALAHAN UGA JAWAAB:*

1. Uluhu markay isku xidhnaayeen maxaa loo jabin kari waayey?
2. Haddii keli-keli la yahay oo nin waliba gaarkii u shaqaysto horumar ma la gaadhi karaa? Waayo?
3. Adiga oo ka murti qaadanaya sheekadan, aad soo akhridey, sharax tuducan soo socda:

   "Taban tabaday laba gacmood tabar ku yeeshaan".

## CASHARKA 56aad

### *CALI-QAAWANE*

Waa Cali-qaawane... waa daleel iyo darbi jiif. Dhulkuu gogladaa, cirkuu huwadaa. Waa is-koris. Waa laflow dhagax. Waa labiyo toban jir wakhtigu harraatiyey. Waa ubax wax uu dheefsado waayey oo dhadhey. Lix jir baad mooddaa!

Waa Cali-qaawane.... hilib iyo harag toona ma leh. Feedhihiisa debeddaa laga tirin karaa, oo saantay hoosta ka soo gujinayaan. Jidhkiisii wuu gudhey oo laf iyo seedo isa-sudhan ayaa ka soo hadhay. Dhafoorkaa godan; bog iyo beerkaa isku dhagay, oo macluul darteed ayey dhaguhu la dheer yihiin!

Waa Cali-qaawane...qadaa ma dharge. Waa silic ku nool, dadka soocan ka ah, oo gaajadu u sahay tahay. Cidse ma tuugsado, oo marna gacanta ma hoorsado. Meelahaasuu midhaafaa. Tuug ma aha, saa tabarteedaba ma lahee. Wixii dagan uu arkose ma dhaafo. Waa waayo'arag, oo intiisa waa ku duq. Habeenka iyo maalintaa wax baray!

Waa Cali-qaawane... in uu xoogsado had iyo jeer waa u heegan, taag la'aan baase meel xil leh dhigtay. Kuwa dhargay ee ay u gaadhay ayuu inta badan baabuurta u tirtiraa. Kolkaasay wax aan waxba u goyn, oo aan ri' gudhan naaskeed laga dhiijin bilaalena caddeyn oo "hooyoo-ku-go" ah u soo taagaan!

Waa Cali-qaawane, waa Soomaali jira, oo dadkiisii dhex jooga. Kolkaad adigoo dheregsan oo xarrago dhaclaynaya ood suuqa u soo dhaadhacdo, isagu wuu ku arkaa, ku dhaataa, dhab kuugu fiirsadaa; adiguse ma aad aragtid, oo in uu jiro iyo in kale ma kala ogid. Isagoo shanta dhigaya... saa dhalayooba kabo dhaadka ma uu sudhinee...oo jirqin yar oo hun ahi dhexda ugu maran yahay, ayaad meelahaa isku dhaaftaan. Adigaase mooge, isagu wuu ku eegtaa.

Waa Cali-qaawane...waa noole jira, misna jiritaankiisu tiran yahay. Waayaha ayaa takooray, tiir adag ku xidhay oo tuke baal-cad weeyaan. Hadal iyo dhammaantii, gaajada dhibteed iyo dhaxantuu ku nool yahay. Waa Soomaali. Adiguu ku sugayaa. Aniguu i sugayaa. Annaguu ina sugayaa. Cidi innoogama sokeyso!

**Sharaxa Ereyada:**

Lafloo dhagax: Is-koris.

Takoor: Gaar u soocid.

Hun: Maro dhammaatey, Calal.

Dhaadka: Cagta.

Dagan: Aan cidi ,la joogin.

**L A Y L I :**

*SU'AALAHAN SI BUUXDA UGA JAWAAB:*

1. Cali-qaawane, hoygiisu waa xaggee?
2. Haddii ay da'diisu laba iyo toban jir tahay, maxaa lix jir loogu misleeyey?
3. Waayaha ayaa takooray, tiir adag ku xidhey oo tuke baal cad weeyaan." Weedhan si buuxda u macnee.
4. Innaguu ina sugayaa...oo cidi innoogama sokeyso", ayaa la yidhiye, ka faallood sidii wax loogu qaban lahaa.

## CASHARKA 57aad

### *ISHTIRAAKIYADDA (Gabay)*

Gabaygan waxa curiyey gabayaaga weyn ee caanka ah, Xaaji Aadan Af-qallooc. Wuxuu ku muujinayaa ishtiraakiyaddu in ay ahaan jirtey hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed iyo weliba sida toosan ee mabda'aas loogu habeeyo nolosha iyo dhismaha Ummadda. Sida ka muuqata gabaygan wuxuu Xaajigu u curiyey in uu dadka u miijiyo una tilmaamo hantiwadaaggu inaanu wax qalaad oo dibedda lagaga keenay Ummadda Soomaaliyeed ahayn:

*Ishtiraakiyaddu waa mabda'a, lagu islaaxaaye*
*Asalkiisu waa kaalmadaad, ab u lahaydeene*
*Waa wadajirkay odayadii, hore u asaaseene*
*Akhlaaq xumada boobka iyo dhacuu, kala ilaashaaye*
*Axad kelidii nolol doonaya, baanu oggolaanayne*
*Insaan mulki leh iyo sabool, shilin la' weeyaane*
*Midna ma afdalo ee sharcigu, waa wada ekeeyaaye*
*Isticmaarka iyo gaajada, iyo aafadii cudurka*
*Iyo wuxuu dagaal ku aclinaa, waa aqoon li'iye*
*Isku tiirsi buu doonayaa, camal la ogaaye*
*Afka hadalka oo lagu beddelo, gacan adeegeysa*
*Ummaddoo wada shaqaysiyo, dhulkoo oonta lagu beero*
*Arsaaq badatay aradkoo nimcada, idil la gaadhsiiyo*
*Oommane halkii ah oo biyaha, riigga lagu eego*
*Dhulkoo laga ummuliyo wixii, aasan laga baadho*
*Dhaqaalaha adkaadaan cid kale, laga amaah doonan*
*Eexda iyo rishwada oo go'oo, xaqu iftiin yeesho*
*Alla qabyada beenta ah oo ciqaab, lagaga aargoosto*
*Edebta iyo dhaqankii horaan, waana la ilaabin*
*Inta maqan dalkii oo xorriyad, lala itaal doono*
*Axadkii qudh gooya oo qiyaas, lagu abaal siiyo*
*Insaafnimo ninkii maal hayaa, caaddil ku ahaado*
*Ixtiraamka diintiyo tacliin, aayo lagu gaadho*
*Adiga oo xasila, jayshka oo aalad, iyo xoog leh*
*Feejigo maamulkii og yahay, aradka xaalkiisa*
*Ahdaaftiisa badan baan intaa, ku adkirayaaye*
*Adduunkaaga adigaa iska leh, aynigu yahaye*
*Ninna lama afduubo ee qasdigu, waa isu imaade*
*Mar hadday intaasuba dhacdo, tawraddu adkaysay*
*Ayidaaddu waa waajibiyo, inaan adeecnaaye*
*Nin dantiisa qudha eegayow, adigu yeelkaaye*
*Ayaxa guurey weligiis Alluu, koronkor aasaaye*
*Malaha isticmaarka ayaad, axad lahaydeene*
*Afka lagama dhowree xaqa waa, la ictiraafaaye*
*Sida haatan amarku u socdo ee, aynu ku arkayno*
*Isbeddele arrimihii hore iyo, urugadoodiiye*
*Haddii aan maragga lagu eexanayn, waa islaannimo e*
*Saw tii aad ogeydeen wixii, uunku qabay maaha!*

**Sharaxa Ereyada:**

Ab: Isir.

Afdalo: Kama bido, kama sarreysiiyo.

Aafo: Masiibo.

Ku aclinaa: Ku dhawaaqaa.

Riig: Aaladda ceelasha lagu qodo kuna rakiban baabuur.

Rishwada: Laaluushka.

Insaaf: Garsoor, Caddaalad.

Ka adkurayaaye: Ka sheegayaaye.

Weligiis aaluu: Dhaaxuu, qajeeluu.

**LAYLI:**

1. Adigoo la kaashanaya toddobada tuduc ee gabayga ugu horreeya sheeg wuxuu ku tilmaamay ishtiraakiyadda.
2. Macnee tuducyada soo socda:

   b) Asalkiisu waa kaalmadaad ab u lahaydeene ..................... (2)

   t) Afka hadalka oo lagu beddelo gacan adeegeysa ................ (11)

   j) Dhulkoo lagu ummuliyo wixii aasan laga baadho ................ (15)

   x) Eexda iyo rishwada oo go'oo xaqu iftiin yeesho ................. (17)

   kh) Axadkii qudh gooyoo qiyaas lagu abaal siiyo ................... (21)

4. b) Ayaa tiriyey gabaygan?

   t) Waa maxay ishtiraakiyaddu?

   j) Sheeg erey Af-Soomaali ahoo u dhigma ishtiraakiyadda?

   x) Sug tuduca gabayaagu uu ku tilmaamay in ay ishtiraakiyaddu tahay wax weligeedba aynu hiddo iyo dhaqan u lahayn.

   kh) Ma ku waafaqsan tahay sidaa gabayaaga?

   Sheeg sababta aad ugu waafaqsan tahay ama ugu diiddan tahay sidaas.

## CASHARKA 58aad

### *DHAADAA WAX MA DHAAFAAN*

(Guuleed oo safar ah, iyo nin tafa xaydan oo awr ka lumay baadi-doonkii ah, ayaa meel cidla ciirsi ah ku kulmaya. Isma gacan qaadayaan, afkayse iska salaamayaan).

Ninkii: War salaamu calaykum.

Guuleed: Caleykuma salaan.

Ninkii: War inay baadidaa badbaaddo, awr baadi ah ma ii sheegtay?

Guuleed: Allaa igu og, oo il ma saarin.

Ninkii: Bidhaan geel oo kalese?

Guuleed: Ha sheegin.

Ninkii: (Oo dhaqaaqid u holanaya): Haddaa nabadgelyo.

Guuleed: Sug: Awrku ma il la'aa?

Ninkii: Ilaahay ballankii haa!

Guuleed: Awrku culeys ma siday?

Ninkii: Iska daa awrka aad tilmaantay waa kaygii.. loo.. noqon maayo.

Guuleed: (Oo tallaabo horey u qaadaya): Waan gartay...Ee nabadgelyo.

Ninkii: (Oo yaabban): War waa ku sidee! Xaggee isaga dhaqaaqday!

Guuleed: Xaggaa iyo meeshaan awalba u socday.

Ninkii: (Oo cadho soo galaangalaysa): Awrkaygiina...

Guuleed: (Oo socosho maaggan): Awr ma arag...Ee adiguu kaa maqan yahee raacdeyso.

Ninkii: (Oo caro is-maray, oo Guuleed hor goynaya): Waar aragtayee... awrkii meel iigu sheeg.

Guuleed: Il ma saarin...ee iga hor baydh.

Ninkii: (Oo indhuhu soo gal baxsan yihiin): War ha isku keen dilin ee awrkii iska keen.

Guuleed: Allaa igu og inaan...war iyo wacaal toona ka hayn.

Ninkii: Alla laysay... awrkaygii kaama sokeeyo, kaamana... shisheeyo.

Guuleed: (Oo ay ka dhan tahay): War kuuma arag!

Ninkii: Inkir iga kaa wadi maayo.

(Goor ay isla il daran yihiin oo qir uu xaal joogo, ayaa oday socoto ahi ku soo baxayaa).

Odaygii: War salaamu caleykum...aa... war bal cag dhiga!

Guuleed: Goor fiican baad timid... waayeelna waad tahay...ee bal ninkan na kala saar!

| | |
|---|---|
| Odaygii: | Waa tahay... sidee wax u jiraan? Bal warka i siiya! |
| Ninkii: | Laguu warran.... |
| Odaygii: | H a y e. |
| Ninkii: | Baadi-doonkii baan ahaa. |
| Odaygii: | H a y e . |
| Ninkii: | Awrku wuu il la'aa. |
| Odaygii: | (Oo shaarubta miiqaya): Waa tahay. |
| Ninkii: | Wuu daba go'naa. |
| Odaygii: | H a y e. |
| Ninkii: | Laba moohaaradood oo hadhuudh cad ah ayuu siday. |
| Odaygii: | Waa — tahay. |
| Ninkii: | Ninkan ayaan la kulmay... waa Ilaah mahaddiiye. |
| Odaygii: | H a y e. |
| Ninkii: | Awr baadi ah ma sheegtay baan ku iri? |
| Odaygii: | H a y e. |
| Ninkii: | Maya buu igu yidhi. |
| Odaygii: | Waa tahay. |
| Ninkii: | Misna awrka tilmaantiisii buu ii sheegay. |
| Odaygii: | (Oo wajiga ururinaya, sankana baloolinaya): Haye. |
| Ninkii: | Waa sida...ee ninku awrkaygii meel ha ku sheego. |
| Odaygii: | (Oo Guuleed indhaha ku sugaya): War adna taada soo oog! |
| Guuleed: | Wax ku dari maayo oo waa siduu kuugu sheegay. |
| Odaygii: | (Oo bidaarta salaaxaya): Awrka maad arag? |
| Guuleed: | Haa... oo Alla og yahay. |
| Odaygii: | Tilmaantaa la sheegayna waa aad ka bixisay? |
| Guuleed: | Haa heyto. |
| Odaygii: | Oo awrka maba aad arag... tilmaantiisa sidee baad ku ogaatay? |
| Guuleed: | Kuu sheegay. |
| Odaygii: | Waa — tahay. |
| Guuleed: | Awrka raadkiisaan meel aan dhoweyn kaga soo dhacay. |
| Odaygii: | H a y e. |
| Guuleed: | In uu il la' yahay, oo waliba tan uu la' yahay... waxaan ku ogaaday.... |
| Odaygii: | H e e! |
| Guuleed: | Dhirta dhanka bidix kaga soo hagaagta wuu jiidhayey. |

Odaygii: Haa gartay!

Guuleed: Daba la'aantiisa wax aan ku dhaaday.

Odaygii: H e e!

Guuleed: Saalada ayuu tuuminayey.

Odaygii: (Oo madaxa lulaya): Gartay... Gartay.

Guuleed: In uu culays sido waxa aan ku dhaadey...

Odaygii: H e e!

Guuleed: Cagta ayuu dhulka ku ballaadhinayey... raadkiisuna... si fiican ayuu u dhignaa.

Odaygii: Haa... Haa... Gartay... Gartay!

Guuleed: Waa sidaa... Ee ma ku qanacday?

Odaygii: (Oo ninkii muddiga ahaa kugu quus-reebaya): Ku qanciye... ma ku qanacday oo wax dhaadiddiisu intay tu gun-dheer... tahay ma ku dhacday!

Ninkii: (Oo goorahaanba yaabsanaa): Ku qancay oo wuu iga kaafiyey siduu tilmaanta awrka ku helay!

**Sharaxa Ereyada:**

Dhaadid: Wax u fiirsasho dhab ah.

Muuhaar: Laba jawaan muggood qaade.

Tuumin: Isku meel dhigid.

**L A Y L I :**

*SU'AALAHAN SI BUUXDA UGA JAWAAB:*

1. Saalada awrku tuuminayey iyo daba go'naantiisa maxaa ka dhexeeya?
2. Sadarta 51aad muxuu ninkii awrka ka lumay u leeyahay "... waa Ilaah mahaddiiye?".
3. Magacu riwaayaddu ma ku habboon yahay? Waayo? Ma u raadin kartaa mid ka fiican?

## CASHARKA 59aad

### *DAAWAD (Hees)*

Heestan waxa tiriyey Maxamed Ibraahim (Hadraawi) "8.3.1973". Waxay si gaar ah oo hufan u sifeynaysaa quruxda ay leedahay Buurta la yiraahdo Daalo ee ku taal Gobolka Sanaag.

*Deeqdii Ilaahay* ★ Dhulkan lagu daleeyee
Ciiddiisu dihin tahay ★ Danbarkii ku joogee
Dheg da'weyni maqashee ★ Kolley dunidan yaabka leh
**Waxaan uga dan leeyahay**

*Daaloo korkeedii* ★ Daruuruhu hogteenoo
Baddu dhinac ka dabartoo ★ Dirir gaaxdey miraayoo
Toddobaad ku da'ayoo ★ Danabkiyo hillaacii
Isku daba mareenoo ★ Onkodkuna dayaankii
Dhulka dakharra yeeloo ★ Casar gaaban daadkiyo
Durdurradu kulmeenoo ★ Isku soo dareenoo
Dooxooyinkeedii ★ Dacal kula jiraanoo
Dooggii is-gaadhoo ★ Dayibkii is-qariyoo
Hadh qaboobe damalkii ★ Soo daadshey ubaxoo
Dooggiyo caleentii ★ Dugsi kala heleenoo
Shimbiruhu mar duuleen ★ Marna soo degaanoo
Dananka iyo foodhida ★ Darandoori heeseen
Dayaxiyo cadceedduna ★ Dacallada ka joogaan
Isha daawanaysaa ★ Kolley daali meysee
**Waxaan uga dan leeyahay**

*Ruuxii dalxiisee* ★ Ka yimaada dibedaha
Naftu damac ha gelisoo ★ Xera kale ha diidee
Intaa daadahaysaan ★ Debec ugu adeegtaan
**Maad daalo korisaan**

*Guri duug ahaayoo* ★ Dirindiir xagatoo
Ayax duullimaadkii ★ Dufankii la laastoo
La dumaaley haatane ★ Degmo weeye hodanoo
Dagal lagu abuuroo ★ Inta guudka loo dabay
Laga furay daboolkoo ★ Dirkoo magac ugaadheed
Lagu soo dareershoo ★ Dannigii ka ba'ayoo
Cawl aan dideynoo ★ Deeradu ku tarantoo
Cidi aanay dilinoo ★ Ninna aanu dabanoo
Waa degel qabow oo ★ Qorrax diib is-marisoo
Jidka aan damqayn baa ★ Loo soo deldelayo
Dadku kama gabooboo ★ Nimankii darwiish
Kula jirey dagaalkoo ★ Weli doob la moodaa
Birta daabka haystoo ★ Gala duullimaadkee
**Waxaan uga dan leeyahay**

*Ruuxii dalxiisee* ★ Ka yimaada dibedaha
Naftu damac ha gelisoo ★ Xera kale ha diidee
Intaa daadahaysaan ★ Debec ugu adeegtaan
**Maad Daalo korisaan.**

*S U' A A L O :*

1. Ku qor af caadi ah labada qaybood ee ugu horreeya heesta.
2. Sharrax ereyada:

   Hogteen, mirayo, dayibkii, danbarkii, dilin tahay.

1. Qor ereyada tilmaamaya in roob ku da'ay Daalo, marka Gabayaagu sifeynaayey.
4. Qor xayawaanka uu magacaabay gabayaagu.
5. Soo saar tuduca uu gabayaagu ku sheegayo in aan Daalo dadku cimrigiisu isku beddelin.
6. Sidee heestu wax kuugu kordhisay aqoontii aad u lahayd Daalo?

MINISTRY OF EDUCATION, TEXTBOOKPRESS MOGADISHU - 4/84 - 50.000